# CILMIGA BULSHADA

## BUUGGA ARDAYGA

Fasalka 8aad

ISBN 978-99944-2-120-6

JAMHURIYADA DIMOQRAADIGA FADARAALKA ITOOBIYA
WASAARADDA WAXBARASHADA

Birr 68.00

CILMIGA BULSHADA BUUGGA ARDAY GA Fasalka 8aad

# CILMIGA BULSHADA

## BUUGGA ARDAYGA

Fasalka 8aad



JAMHURIYADA DIMOQRAADIGA FADARAALKA ITOOBIYA
WASAARADDA WAXBARASHADA

# CILMIGA BULSHADA

## BUUGGA ARDAYGA


**Fasalka 8aad**



JUMHURIYADA DIMOQRAADIGA FADARAALKA EE ITOOBIYA

WASAARADDA WAXBARASHADA

# Buugan Ilaali oo daryeel.




**Buuggani waa hanfida Dugsigiina**

**Daryeel si aynan waxyeelo u gaadhin. Hoos waxa kuxusan 10 firadood oo ah talooyin kaa caawinaysa sida ad buuga u ilaa linaysid una daryeelaysid.**

1. Buugga ku jaldiyee jaldi ku haboon dhawrista sida Bilaastiga  waraaqad adag sida Jaraaiidka la akhristay.
2. Markasta meesha ad buuga dhigaysaa waa in ay ahaataa meel nadiif ah oo engagan.
3. Buugga marka aad isticmaalaysid waa in ay gacmahaagu nadiif ahaadaan.
4. Waxna ha ku qorin buuga jalddi giisa ama boggaga dhaxdiisa.
5. Isticmaal waraaqad yar ama kaardi yar markaad bog calaamadaysanaysid.
6. Fadlan ha ka jeexin ama haka jarin sawir ama bog.
7. Boggaga jeexma ku kab, Xamag ama bilaastar.
8. Buuga markaad dugsiga uqaadanaysid boorsada ama shayga aad ku qaadanaaysid qumaati u dhaxdhig si uunan u jacdadin ama u jajabin.
9. Buugga marka aad qofkale u dhibaysid si taxadar ah ugu dhiib.
10. Buugga cusub marka ugu horaysa ee aad isticmaalkiisa bilaabaysid dhinicisa ay boggagiisa u dan beeya ay ku yaaliin u jiifi kadibna markiiba dhawr bogg fur ama banne. Marka aad bogg rogaysid, Cidhifka uu ka taxan yahay gacanta kale ku yar xaji. sidaasina daryeelka jaldiga buuga ayay u wanaagsantahay.

# CILMIGA BULSHADA

## BUUGGA ARDAYGA

### FASALKA 8AAD


**Qorayaasha, Tafatirayaasha:**

Cali Muxumed Bakaal
Cabdlcasiis Maxamed Aadan (Baaruud)

**Qiimeeyayaasha:**

Maxamed Cabdi Roble
Maxamed Bade Maxamuud
Deeq Axmed Badal



JAMHUURIYADA DIMUQRAADIGA FEDARAALKA
ITOOBIYA, WASAARADA WAXBARASHADA

Wasaarada waxbarashada ee jamhuuriyada Dimoqraadiga Fedaraalka Itoobiya mashruuca hoos yimaad ee uqaybsan kor u qaadista iyo horumarinta tayada waxbarashada Guud oo taageero ka helay hayada IDA Credit No. 4535 ET oo ah the Fast Track Initiative catalytic fund iyo dawladaha Finland, Italy, Netherland iyo United Kingdom.

© 2011 wasaarad waxbarashada ee jamhuuriyada Dimoqraadiga Federaalka Itoobiya. Xuquuqda buuggani way u dhawsan tahay wasarada waxbarade ee JDFI. Buugga ama qayb ka mid ah buugga lama guurin karo lama daabici karo lamana baahin karo, iyada oo la adeegsanayo qalabyada eletirooniksa iyadoo ogolaansho qoraal ah aan laga haysanin wasaaradda waxbarashada ama liisan ka saamaxaya xeerka qodobka No. 4/0/2004 ee xuquuqda daabaca oo ah maqaal ay jumhuriyada Dimoqraaidiga Fedaraalka Itoobiya.

Wasaaradda waxbarashadu waxay u mahad naqaysaa shakhsiyaadka iyo kooxaha si toos ah iyo si dadban uga qayb qaatay daabicista iyo soo saaridda buuggan.

Kuwa haysta ogolaashaha qoraalka laakiin lagu eedeeyo inay gaf ka galeen xuquuqda buugga. Waa in ay la xidhiidhaan xafiis waynaha wasaaradda Waxbarashada ee ku taala Arata kiilo, Adiss Ababa, Itoobiya.

***Waxaa Soo saray oo daabacday***

STAR EDUCATIONAL BOOKS DISTRIBUTORS Pvt. Ltd.

24/4800, Bharat Ram Road, Daryaganj,

New Delhi – 110002, INDIA

**iyo**

ASTER NEGA PUBLISHING ENTERPRISE

P.O. Box 21073

ADDIS ABABA, ETHIOPIA

*Under GEQIP Contract No. ET-MoE/GEQIP/IDA/ICB/G-07/09-B.*

ISBN 978-99944-2-120-6

# Tusmada Buuga


## CUTUBKA 1AAD

**DUNIDAN AYNU KU NOOL AHAY** 1

1.1 QAARADAHA .......................................... 2

1.2 DADYAWGA DUNIDA .......................................... 19

1.3 HAB-NOLOLEEDKA IYO BAAHSANAANTA DADKA .......................................... 31

1.4 KACAANKII WARSHADAHA IYO SAAMAYNTIISII . 45

## CUTUBKA 2AAD

**QUWADAHA WAX KA BADALA DHULKA OOGADIISA SARE** 63

2.1 QUWADAHA GUDAHA IYO SAAMAYNTOODA NOLOSHA AADMIGA .......................................... 64

2.2 QUWADAHA DIBADA IYO SAAMAYNTOODA NOLOSHA AADMIGA .......................................... 78

2.3 CABBIRKA FOGAANTA IYO BEDKA KHARIIRADA KORKEEDA .......................................... 93

## CUTUBKA 3AAD


### SAAMEYNTA AADAMUHU KU LEEYAHAY GEYIGA 105

3.1 XIDHIIDHKA AADMIGU LA LEEYAHAY KHEYRAADKA DABIICIGA ........ 106

3.2 SABABAHA IYO SAAMEYNTA KULULAAN SHAHA DUNIDA ........ 124


## CUTUBKA 4AAD


### ARIMAHA DADWAYNAHA 133

4.1 ARIMAHA LA XIDHIIDHA DADWEYNAHA ........ 134

4.2 XUQUUQDA AADMIGA IYO KA BADBAADIDA SHILALKA ........ 148

4.3 BARNAAMIJYADA ISKAASHI ........ 153

4.4 CAALAMIYAYNTA ........ 154

# CUTUBKA 1

# DUNIDAN AYNU KU NOOL AHAY



## Ujeedooyinka Cutubka

***Marka uu cutubkani dhamaado kadib ardaydu waa inay:***

- sharaxaan muuqaalada ugu muhiimsan ee qaaradaha iyo halka ay dhacaan;
- aqoon u yeeshaan qaybaha kala duwan ee dunida iyo luuqadahaba.
- garwaaqsadaan ilbaxnimooyinkii hore
- falanqeeyaan sababaha kala duwan ee dhaliya kala duwanaanshaha baahsanaanta dadka;
- aqoon u yeeshaan meelaha ay dadku isku cufan yihiin iyo meelaha ay dadku teel-teelka yihiin ee dunida.
- sharaxaan curashada kacaankii warshadaha iyo saamayntiisii.
- Sharaxaan Taariikhdii Halgankii ay dadyawga Afrikaanku kaga soo horjeesteen Gumeystayaasha.

## Tusmooyinka ugu Muhiimsan


**1.1** QAARADAHA

**1.2** DADYAWGA DUNIDA

**1.3** BAAHSANAANTA IYO HAB-NOLOLEEDKA DADKA

**1.4** KACAANKII WARSHADAHA IYO SAAMAYNTIISII

- *Gunaanadka Cutubka*
- *Layliska Guud*

# 1.1 QAARADAHA

***Waa maxay qaaraduhu? Waa maxay farqiga u dhexeeya qaaradaha iyo dhulka? Boqolkiiba waa imisa dhulka qaybtiisa berriga ahi?***

***Waa maxay kheyraadyada kala duwan ee uu aadmigu ka helo berriga iyo qayb-biyoodka?***

## Ereyada Furaha u ah Casharka

- Wareeg
- Midab
- Shaxan goobeed
- koonka
- Khariirada
- Qaarad
- Badweyn
- Qaababka
- Buur
- berriga
- Dulaha
- Taag
- Bannaan
- Saxanka

## *Bal ka fikir waxa aad ka taqaanid*

- *Qiyaas, maskax ahaan in aad tahay. Dalmar ama Dalmareen ka tagay qaarad oo tagay tu kale si aad u soo baratid waxyaabo ku saabsan dhulka .maxaa laga yaabaa in aad ka baratay dhulka?*
- *Sidee baynu galoobka (koonka) iyo atlaskaba (waa buug aad u wayn oo ka waramaya dunida iyo waxa laga helo) wax uga baran karnaa dhulka?*

### *Koonku Muxuu Tilmaamayaa/Muujinayaa?*

- *Koonku Waa dhulka muuqaalkiisa oo yar. Sida dhulka oo kale ayuu koonku yahay Walax goobo ah ama wareeg, Wareegu waa goobo sida Kubbada oo kale*




**Jaantuska 1.1: Koonka**

- *Koonku wuxu ku tusaa qaybaha dhulka oo kala ah Berri iyo Biyo dhulka waxaa ugu wayn qayb-biyoodka loo yaqaanno badwaynta. Fiiri koonka waa maxay midabka loo adeegsaday ee ku tusaya badwaynada?*
- *Koonku sidoo kale wuxuu ku tusaa qayb-dhuleedka wayn ee berriga oo loo yaqaano qaaradaha.*
- *Mida kale oo aad u muhiim ah oo ka mid ah agabka aad u adeegsan kartiin inaad baratiin waxyaabaha ku saabsan dhulka oo la yiraahdo Atlas. Atlasku waa buug lagu soo ururiyay khariirado gaar ah oo kamid ah sawirada ama qaybo ka mid ah oogada dhulka sare ee siman.*

***Waa maxay qaaraduhu? Waa maxay farqiga u dhexeeya qaaradaha iyo waddamada? Waa imisa boqolkiiba dhulka qaybtiisa berriga ahi?***

***Waa maxay khayraadyada kala duwan ee ay Aadmigu ka helaan berriga iyo qayb-biyoodkaba?***

Macnaha qaarad waa qaybdhuleedka berri ee lagu kor nool yahay " Dhulku markii loo eego sawirada laga qaaday hawada sare waa "Meere Biyood " in ka badan 70% oogada dhulka waxay ka kooban tahay qayb-biyood, gaar ahaan badaha waa wayn iyo baddaha yar yar. 1/3 (saddex meelood hal meel) oo ka mid ah waa berri.

## Berriga oo loo qaybiyo qaarado

Waxaa jira todoba qaaradood (7) oo kala ah: Aasiya, Afrika, Ameerikada Waqooyi, Ameerikada  Koonfureed, Anta-aartika, Yurub iyo Awstreeliya. Aasiya waa qaarada ugu wayn, mida ugu yarina waa Awstreeliya. Afrika waa qaarada labaad ee ugu wayn, waxaana ku xeeran qayb-biyoodyada  waa weyn ee kala ah: Badwaynta Hindiya oo ka xigta dhinaca koonfur bari, Badwaynta Atlaantika oo ka xigta Galbeed, iyo Badwaynta Anta-Aartiga oo ka xigta Koonfur iyo weliba Badda Midhitireeniyanka oo Waqooyi ka xigta , Badda Cas oo Waqooyi bari ka xigta. Afrika waxay leedahay webiyo iyo harooyin waawayn webiga Niil waa webiga ugu dheer iyo Harada ugu wayn oo ah Fiktooriya.

Aasiya waa qaarada Dunida, ugu wayn waxayna xad la leedahay qaarada Yurub oo Galbeed ka xigta iyo badwaynta Baasifiga oo dhinaca Bari ka xigta iyo dhul berri ah oo Jasiirado ah oo ka xiga Koonfur Bari. Magaca Aasiya waa mid uu macnihiisu yahay "dhulkii ama berigii falaaraha cadceeda" Aasiya waxaa ku taala buurta ugu dheer dunida oo ah Eferesti (Everest). Qaaradaha kale waxay u

muuqdaan kuwo isu eg marka laga reebo, Awstreeliya oo ah mid ka kooban hal dal oo keliya. Tusaale: waa Awstreeliya laftigeeda.

Magaca "Ameerika" waxaa markii ugu horaysay adeegsaday 1507kii nin ku xeel dheeraa cilmiga khariiradaha oo la odhan jiray Maartin Waldsiimiler, kadib markii uu bad – mareenkii Talyaaniga ahaa ee la odhan jiray Ameerigo Fasbuusi (Amerigo Vespucci) uu ku magacaabay "Dunida cusub". Koonfurta Ameerika, sidoo kale, waxaa loogu yeedhaa laatiin Ameerika, laatiin waxaa loo yaqaanaa oo ay astaan u tahay dadyowga luuqadahoodu ka soo jeedaan laatiinka.(Isbayn, Boortaqiiska iyo Faransiiska).

Waqooyiga iyo Koonfurta Ameerika waxay dhacaan inta u dhaxaysa baddaha waawayn ee Atlaantika iyo Baasifiga. waxayna labada qaaradood iskaga xidhan yihiin ama xadka u dhexeeya uu yahay badhtamaha Ameerika. webiyada ugu waawayn waxaa ka mid ah webiga Mississibbi oo ku yaalla Waqooyiga Ameerika iyo webiga Amaasoon oo ku yaala koonfurta Ameerika . Webiga Amaasoon waxaa ku xeeran, kaymaha shareeran ee kulaalayaasha dunida ugu wayn.

Dhulka qaybihiisa berriga ah ee ugu waawayn ayaa loo yaqaanaa qaarado, kuwaasoo iyaguna u sii kala baxa waddamo. Tusaale Afrika waa qaaradda labaad ee ugu wayn dunida, waxayna usii kala baxdaa waddamo badan . Itoobiya sida dalalka kale, ayay iyaduna u sii kala baxdaa ismaamul deegaamo.


### Isku day su'aalahan

1 *Ma ka fakari kartaa sababta dal wayn loogu sii kala qaybin karo is-maamulo ama gobollo?*

2 *Magacaw ismaamul goblleedyada kala duwan ee dastuuriga ah ee Jamhuuriyada Dimaqraadiga Federalka Itoobiya ?*

## Qayb-biyoodka Oogada dhulka

Qiyaastii 2/3 (saddex meelood laba meel) oo kamid ah dhulka waa biyo intooda badan biyahaasi waa badwayno. Badwayntu waa bededka ugu waawayn ee qayb-biyoodka oogada dhulka. Waxaana jira Afar badwayn, waxayna kala yihiin badwaynta Baasifiga, Atlaantika, Hindiya iyo Aartiga. Badwaynta Baasifigu waa tan ugu wada wayn iyo badwaynta Aartiga oo ah ta ugu yar. Waxaa kale oo jira noocyo kale oo ka mid ah oogooyinka biyaha sida: Badaha, haraha iyo webiyada.




Jaantuska 1.2: dhulka, badwaynada iyo qaaradaha


Shaxan-goobeedka Jaantuska 1.3 ee hoos ku xusan waxaa loo yaqaanaa shaxan goobeed. shaxan goobeed waxaa loo isticmaalaa in uu muujiyo qaybaha uu shey dhamaantii ka kooban yahay. Shaxankan guud ahaan waa goobo u taagan wadarta bedka dhulka goobadaas oo loo sii kala qaybiyay todoba (7) gobol oo gobol kastaa u taagan yahay qaarad, gobolka ugu wayni waa qaarada Aasiya.



## Hawl-galka 1.1

1 Waa Imisa qaybta dhulka berriga ahi?

2 Waa kaalinta imisaad koonfurta Ameerika?




Jaantuska 1.3: Shaxan goobeed

# 1.1.1 waa maxay muuqaalada ugu waawayn ee qaab-dhismeedka dhulku?

***Maxaa idiinka Muuqda deegaankiina? Qaab--dhismeedka dhuleed ee deegaankiina bulsho, ma siman yahay? Ma jiraa dhul sare iyo dhul hoose?***

Tusaalaha ugu fiican ee habka barashada muuqaalada kala duwan ee dhulka, waxaa inoo noqon kara iyada oo aynu safar toos ah kaga gudubno waddankeenan Itoobiya. Bal hada u fiirsada sheekadan yar ee ku saabsan safarkii ay Cabdisalaam iyo qoyskoodu kaga gudbeen Qabri dahare oo ku taala ama dhacda koonfurta Bari ee Itoobiya ilaa Humeera oo ku taala waqooyiga dalka sheekaduna waxay u dhacday sidan:

Amintu waxay ahayd xilli gu'ah sannadkii 2001dii Taariikhda Itoobiya, Cabdi Salaam iyo qoyskoodu wuxuu safarkoodu ka bilaabmay magaalada Qabridahare oo ka tirsan Dawlada Deegaanka Soomaalida Subaxnimo Isniin ah Bishuna tahay 1 dii Bisha Shanaad ee Dir. Qalabka ay wateen waxaa ka mid ahaa:

- *Laba shandadood oo waawayn*
- *Khariirado sida: Khariidadaha (Deegaankeena, Itoobiya, Afrika).*

Markii uu bilaabmay safarkoodu waxay sii mareen Magaalo madaxda Dawlada Deegaanka Soomaalida ee Jigjiga, waxayna uga sii gudbeen Magaalooyinka kala ah: Diri dhabe, Adhis Ababa, Debre Maarqoos, Debre Taaboor, Goondhar iyo ugu dambayn Humeera oo ahayd bar-dhamaadka uu safarkoodu ku ekaa, isla markaana fadhiisinkoodu ahaa, si ay halkaas uga samaystaan beer-xilliyeed wayn oo ay qotaan (fashaan).

Hadaba, intii ay safarka ku soo jireen bilow ilaa iyo dhamaad waxay fursad u heleen daawashada muuqaalada kala duwan ee dhuleed, waxayna indhahooda ku arkeen waxyaabaha la yaabka leh ee uu waddanka Itoobiya, Caanka ku yahay sida:

- *Bannaanada (Bannanka)*
- *Buuraha*
- *Togogga*
- *Webiyada*
- *Kaymaha*
- *Dhul-beereedyada i.w.m*

## Qaababka Muuqaaleed Ee Berriga


Inta aynaan dib u jaleecin safarkii Cabdi Salaam iyo qoyskooda, ka hor, Waxaa muhiim ah in aad ogaataan qaababka samays ee muuqaalada kala duwan ee uu

berrigu leeyahay. Qaababka muuqaaleed ee berriga waxaa ka mid ah:- Buuraha, Bannaanada, Taagaga, Dulaha sare ee siman i.w.m.

Taagagu waa kuwo ka hooseeya oo ka joog yar buuraha, isla markaana ka degaandeg yar. Buuralaydu waxay leeyihiin joog ka sareeya Taagaga, waxayna ugu yaraan kor u kacaan ilaa 610 mitir oo ka sareeya bededka ku xeeran. Nooca kale ee ka midka ah qaababka muuqaal ee berriga, waa Bannaanada aadka u waawayn ee ku dhawaad oogada siman leh.

Qaababka muuqaal ee kale, waxaa ka mid ah dulaha sare ee siman iyo gotaamada (saxanka). Dulaha sare ee siman waa kuwo uu joogoodu ka sareeyo berriga kale ee ku xeeran, waxaana ka soo horjeeda oo lidkooda ah gotaamada ama biyo qabatinada, oo ah qaab-dhuleed godan oo ay ku xeeran yihiin berri ka joog sareeya. Hadda waxa aynu dib u jaleecaynaa sheekadii ku saabsanayd safarkii Cabdi Salaam iyo qoyskiisa, kadib marka aad akhridaan, fiiriya wadadii ay mareen sida ka muuqata jaantuska 1.4 ee bogga 7aad

Qabri-dahare waa magaalo ku taala ama ka mid ah deegaanka Soomaalida Itoobiya, waxayna dhacdaa dhinaca koonfur Bari ee Itoobiya. Guud ahaana, dhulka ku xeeran waa dhul aad u joog hooseeya oo ban ah isla markaana bedkiisu wayn yahay oo siman. Qiyaas ahaana deegaanka Soomaalida Itoobiya intiisa badani waa bannaano ama dhul joog hoose ah. Fiiri khariiradan hoos ku xusan ee jaantuska 1.4 kadibna tilmaama magaalooyinka kale ee deegaankeena ee laga helo bannaanada ama dhulka jooga hoose ah.




**Jaantuska 1.4: Khariirada Itoobiya oo muujinaysa safarkii C/Slaam iyo qoyskiisu meelihii ay sii mareen**



## Hawl-galka 1.2

1 Maxaa ka mid ahaa muuqaalada kala duwan ee berriga ah ee ay ka gudbeen intii ay safarka ku jireen C/Salaam iyo qoyskoodu ?

2 Muxuu ahaa Juqraafi ahaan isbedelada ay arkeen intii ay safarka ku jireen ?

3 Tax ama qor magacayda gobolada ay ka gudbeen mudadii safarka ay ku jireen?

4 maxaynu ku magacaabi karnaa webiga ugu wayn ee ay cabdisalaam iyo qoyskiisu kaga gudbeen safarkoodii?

## 1.1.2 Qaab-dhismeedka guud ee qaaradaha: Dhulka jooga sare iyo jooga hoose leh

**Shaxda 1.1: Meelaha ugu sareeya iyo meelaha ugu hooseeya ee jooga qaaradaha**

| Qaaradaha | Bedka. Km | Wadarta cufka ee % | Meesha ugu saraysa | Meesha ugu hoosaysa |
|---|---|---|---|---|
| Afrika | 30,300,293 | 21 | Buurta kilimanjaro 5895m(Taansaniya) | Harada Assal (Jabuuti) |
| Anta-aartika | 13,726,947 | 9 | 5,139m | Heerka Badda |
| Aasiya | 48,393,963 | 30 | Buurta Everest 8848m (Nepal) | Badda meydka -392 mitir (Israaiil iyo Joordan) |
| Awstreeliya | 8,290,558 | 5 | Buurta Kosclusko 2230(new south wales) | Harada Eyre -12m (koonfurta Awstreeliya) |
| Yurub | 13,986,280 | 7 | Buurta Elbrus 5633m (Russia) | BAdda kaasbiyanka -28m (Ruushka) |
| Waqooyiga Ameerika | 24,436,555 | 16 | Buurta Mickinley 6193m (Alska) | Dooxada Dhimatay 85m(Kalifoorniya) |
| Koonfurta Ameerika | 17,767,331 | 10 | Buurta Aconcasuna 7022M(Argentina) | Saalina 30M (Arjantiin) |



## Hawl-galka 1.3

1 waa tee qaarada ugu jooga hooseysa?
2 Qaaradee baa leh, Boqolkiiba inta ugu yar ee wadarta cufka berriga?
3 Waddankee baa qaarada Afrika leh, dhulka ugu jooga hooseeya?
4 Ma jiraa xidhiidh ka dhexeeya Itoobiya iyo Jabuuti?
5 Waa kee dalka ka tirsan koonfurta Ameerika ee laga helo dhulka jooga sare iyo kan hooseba leh?
6 Qaaraddee baa leh dhulka ugu joogga sareysa iyo dhulka ugu jooga hoosaysa labadaba?

## 1.1.3 Webiyada Iyo Haraha Dunida

***Maxay tahay waxtarka ay inoo leeyihiin wabiyadu?***

***Qor magacyada laba wabi oo ku yaala Itoobiya kuwaas oo dhawaanahan laga dhamaystiray biyo – xidheen laga dhaliyo quwada korontada?***

***Qor magacyada webiyada ee looga faaiidaysto dhalinta quwada korontada dalkan Itoobiya wakhtigan xaadirka?***

***Waa maxay faaiidooyinka kale ee ay Itoobiya ka filayso biyo xidheenadan?***



**Jaantuska 1.5: Biyo xidheenka Takese**



Jaantuska 1.6: Biyo xidheenka Gilgal Gibe

Webiyadu waxay maalin walba qaadaan imisaatan tan oo carrada-nafaqaysan ah, isla markaana ku reebaan meelaha bannaan ama dooxooyinka ay biyuhu ku dhamaadaan waxayna saamayn ku yeeshaan keenista carrada tayaysan iyo qaadisteedaba, dhinaca gaadiidka mara biyaha waa kuwo looga faaiidaysan karo.

Waxaa kale oo intaas u dheer webiyada, iyada oo run ahaantii sida la wada ogsoon yahay ilbaxnimooyinkii hore ee dunidu ay ahaayeen kuwo ka bilaabmay dooxooyinka ama agagaaraha webiyada sida webiga Niil oo ah webiga ugu dheer dunida. Webiga Niil wuxuu ka soo bilaabmaa dalalka Bariga Afrika ee ku xeeran Harada Fiktooriya iyo Itoobiya oo ah, dalka ugu biyaha badan ee  uu webiga Niil ka helo biyaha, wuxuuna ku dhamaadaa waqooyiga Afrika siiba dalka Masar.

Webiga Niil la'aantiis dalka Masar wuxuu u muuqan lahaa meel aanay cidina ku noolayn. Sidaa awgeed waa sababta loogu yeedho dalka Masar "Deeqda Niil"

**Shaxda 1.2: webiyada ugu waawayn dunida**

| Webiga | Qaarada | Dhererka ( km ) |
|---|---|---|
| Niil | Afrika | 6671 |
| Amaasoon | k/Ameerika | 2676 |
| Mississibi | W/Ameerika ( USA) | 6051 |
| Yaangtze | Aasiya ( shiinaha ) | 4989 |
| Amur | Aasiya ( Russia ) | 4667 |
| Koongo | Afrika | 4374 |

## Haraha

***Maxaa looga faaiidaystaa haraha? maxayse kaga duwan yihiin baddaha yaryar iyo kuwa waawayn?***

***Magacaw harada ugu wayn dalka Itoobiya?***

Haraha: Haruhu waa qayb-biyood ka mid ah oogada dhulka oo ka go’an berriga. waxay noqon karaan kuwo dabiici ah iyo kuwo dad-samee ah. Haraha dad-sameega ahi waa kuwa laga sameeyay biyo xidheenada, waxaa jira boqolaal harooyin dabiici ah. Itoobiya waxay ka mid tahay waddamada Afrika ee leh tirada ugu badan ee haraha dabiiciga ah , harada Daana ayaa ugu wayn. Badda kaasbiyanka ayaa ah harada ugu wayn dunida in kasta oo ay milix leedahay laguna daray badaha. Harooyinka dabiiciga ah badankoodu waa kuwo milix leh.

Halka kuwo kalena ay yhiin kuwo macaan (aan milix lahayn), tusaalaha ugu fiican haraha biyaha macaan waa haraha waawayn ee waqooyiga Ameerika xuduudka u dhaxeeya Kanada iyo Maraykanka, haraha dabiiciga ah waxaa loo adeegsan karaa sida: kaluumaysiga, gaadiidka iyo waraabka beeraha. Marka aynu u nimaadno haraha dad sameega ah, waxaa intooda badan loo adeegsadaa dhalinta quwada korontada iyo keydinta biyaha. Harooyinka waawayn ee waqooyiga Ameerika waa harooyin biyo macaan . Waxaana loo adeegsadaa sida: kaluumaysiga, biyaha macaan ee la cabo iyo gaadiidka biyaha.

**Shaxda 1.3: haraha ugu waa wayn dunida**

| Haraha | Waddanka | Bedka ( $km^2$ ) |
|---|---|---|
| Kaasbiyanka | Ruushka | 440 298 |
| Subeeriyoor | USA – kanada | 82 416 |
| Fiktooriya | Bariga Afrika | 67 857 |
| Bada Aral | Kasakhistaan | 63 195 |
| Haaron | USA – Kanada | 59 596 |
| Mishigaan | USA | 58 016 |
| Malaawi | Malaawi | 36 778 |
| Taanganiika | Bariga Afrika | 32 891 |
| Giriit biir | Kanada | 30 199 |

*EMPDA, Atlaska Dugsiyada Sare ee Itoobiya, Shirkada daabacaada ee macmillan 1984*.

### Xusuus: Ahmiyada deegaameed

Badda Aral waa mid ka mid ah, baddaha yaryar ee dunida, waxayna kaga duwan tahay baddaha kale, waxaa ku xeeran berri. Biyaha Badda Aral waxaa saami wayn ku leh mugeeda, biyaha uga yimaada deegaamada berriga ah ee ku xeeran.

Haddaba biyihii Badda uga imanayay degaamada ku xeeran ayaa laga soo bilaabo sannadihii 1960dii, dalalka Aral ay ka dhaxayso waxay uga faaiidaysteen dhinacyada waraabka beeraha. Arintaas oo dhalisay in biyihii uga imaan jiray Badda Aralka deegaamada berriga ah ee ku xeeran ay waydo ama khasaarto 75% ka mid ah saamigii mugeeda.

Sidaa darteed sannadkii 1992 kii shanta Jamhuuriyadood ee Badhtamaha Aasiya ee kala ah:- Usbekistaan, Kasaakhistaan, Turkimanistaan, Taajikistaan iyo Kirgistaan, waxay heshiis Caalami ah ku kala saxeexdeen sidii loo badbaadin lahaa biyihii Bada Aral uga iman jiray berriga ku xeeran.

Haddaba wakhtigan xaadirka ah biyihii waxay toos ugu soo qulqulaan Badda Aralka, In kastoo ay wakhti badan ku qaadan doonto ayaa waxa ay ahmiyadu tahay in la iska kaashado, dadaalo badanna loo galo sidii dib loogu soo celin lahaa Baddan baaxadeedii iyo mugeedii ay asalka u lahayd.

### Kashaqeeya idinka oo fiiro gaara siinaya

1 *Weligiin ma daawateen filimka uu Telefishinka Itoobiya uu ka sameeyay shimbiraha kala duwan ee ku nool agagaarka dooxada Rifti harooyinka ku yaala iyo harada Daana?*

2 *Wakhtigan xaadirka ah harada Haramaanyo (harar) way sii gudhaysaa wakhtiba wakhtiga ka sii dambeeya, maxaa sababay gudhitaankaas? intaad koox-koox u falanqaysaan qora sababaha aad hesheen (isla garateen)*



### Hawl-galka 1.4

1 Xagee baa laga helaa webiga ugu dheer dunida ?

2 Magacaw harada ugu wayn Afrika?

3 Waa kee webiga waqooyiga Ameerika ugu dheer?

## Duulimaadkii Kooxda Ciyaaraha fudud ee Itoobiya

Bishii Abril 2009 kooxda ciyaaraha fudud ee dalkeena Itoobiya oo lagu martiqaaday in ay ka qayb-galaan 5000 mitir, 10000 mitir iyo Maaratoonka oo loo kala saaray laba qaaradood mudo laba bilood gudahood ah. Koox ka kooban geesiyaasha qarankeena ee ka muuqda heer caalami sida : Hayle Gabresellasse, Qananisa iyo Gabre-igsaabiheer Gabre maadhin.

Iyadoo loo eegayo shaxda isku aadka kooxaha loogu qabnayo tartanka qaarada yurub (Baarliin) iyo waqooyiga Ameerika (Loos aanjalis) siday u kala horeeyaan. Kooxdan oo dhinaca gaadiidka ay ka taageerayaan, loona xushay qaar ka mid ah diyaaradaha shirkada diyaaradaha Itoobiya oo kuwa kale looga xishay sumcadooda. Diyaaradu socdaalkeedii u horeeyay waxay u kacday Baarliin iyadoo sii maraysay Qaahira iyo Rooma, socdaalkeedii labaad waxay ka sii ambaqaaday Baarliin siina martay Landhan ilaa Niyuuyoork iyo Loos-Anjelis kooxda ciyaartooyga dalkeenu sidii looga bartay ayay guulo dhaxal gal ah ka soo hooyeen.

Kadib markii ay ku guulaysteen safarkoodii kooxdu waxay dib ugu soo laabteen Addis Ababa 30 kii juun 2009 kii.

### Hawl-galka 1.5



Ka jawaaba su'aalahan idinka oo

Ka raadinaya kariirada aduunka korkeeda

1 Tilmaama baddaha ay ka gudbeen laga bilaabo Baarliin ilaa iyo Niyuu yoork ilaa Loos -Anjalis?


2 Qor magacyada qaaradaha magaalooyinka soo socda

| | | | |
|---|---|---|---|
| B | Qaahira | J | Loos-Anjalis |
| T | Rooma | X | Baarliin |

3 Tilmaan badwaynta ay laba jeer ka gudbeen kooxda ciyaartooyga dalkeenu?

4 Qaaradee baa martigelisay koobkii kubbada cagta Aduunka markii . Ugu horaysay sanadka 2010 ?

| | | | |
|---|---|---|---|
| B | Aasiya | J | Laatin Ameerika |
| T | Afrika | X | Yurub |




**Jaantuska 1.7: khariirada Aduunka: ( khadkii duulimaad ee ay mareen kooxda cayaartooyga qaranku laga bilaabo Yurub ilaa waqooyiga Ameerika )**



**Jaantuska 1.8: kooxda cayaaraha fudud ee Itoobiya**

# Sheeko gaaban

## Deegaanka Buuralayda ah

### Dadka ku nool agagaarka buurta Eferesti (Tilmaame Buur)

Himalaya waa labada erey ee kala ah "Hima" oo macnaheedu yahay "Baraf" iyo "alaya" oo macnaheedu yahay "Hoyga" markaa Himalaya waxay noqonaysaa "Hoygii barafka".

Himalaaya waa silsilada buuralayda ah ee dhereran Bariga ilaa Galbeedka ku dhawaad 32,187 mitir xuduudaha waqooyiga Hindiya, Galbeedka Baakiistaan,iyo Afgaanistaan.



Jaantuska 1.9: Himalaya

Ingiriiska ayaa mudo badan sahamin ka waday, kana bilaabay 1830kii iyaga oo xog ururin ku sameeyay u kuur gelida figyada dhaadheer. Magaca sahamiyihii ugu horeeyay wuxuu ahaa mudanne Joorji Efferesti, Efferesti waa buurta ugu figta dheer waxaana loogu magacdaray ninkii sahamiyay ee ugu horeeyay ee la odhan jiray Efferesti.

### Sherbaas (the sherpas)

Sherbaas waa dadyawga reer Tibeet, waxay ku nool yihiin waqooyiga-bari ee dalka Nebaal. Waa dadyowga taagaga ku dhaqda riyaha, idaha iyo  Geel laba kurusle oo aad muhiim ugu ah oo laga helo dhogor laga samaysto dhar , saan laga samaysto kabo, caano, subag,  iyo hilib. Xoolo dhaqatada Sherbas waxay ku raacaan xoolaha jooga sare ilaa 5480 mitir, xilliga xagaagii waxa ay ka beertaan oo ka bixi kara meelaha joogoodu dhan yahay 4267 mitir geedgaabka, siiba badarka iyo baradhaha meelaha joogoodu dhan yahay 3048 mitirna, waxaa ka baxa qamadiga.

Sherbaas waa dadyow si xoogan oo fiican ula qabsaday meelaha jooga sare leh, waa kuwo had iyo jeer fuulitaanka buuraha la qabsaday  maadaama ay ku dhasheen oo ay ku dhaqan yihiin, waxay xirfado u leeyihiin samaynta waxyaabaha dhoobada ka samaysan , jiheeyaha iyo qalab lagu fuulo buuraha. dad badan oo naftoodii ku waayay safarka Himalaaya ayaa  jira. Safar kasta oo Himalaaya

waxay door bidaan dadyawga sherbaas inay la socdaan Sherbaas waxay leeyihiin rag xoog leh oo buuraha kora, waxayna qaadi karaan 27-40 kg oo meelaha heerka hoose leh iyo 24 kg oo ah markay sare u fuulayaan.

## Xeryaha la dego (fadhiisimada) Buuraha Himalaaya dushooda

Qolyaha u go'ay hawlahani ma maarayn karayaan inay safraan keligood. Waxay u baahan yihiin cid u qaada agabyada ay u baahan yihiin marka ay fuulayaan buuraha Himalaaya. Himalaaya majiraan wadooyin la dhex mari karo, wadiiqooyin dhuudhuuban mooyee. Dhamaan saadka ama qalabka waxaa lagu qaadaa (raraa) dad iyo xayawaanba.

Xeryaha ku yaal buurta dusheeda waxaa qasab ah waxyaabaha uu u baahan yahay in laga dhiso ama sameeyo heerarka kala duwan ee fuulida buurta, Agabka lagu seexdo, shooladaha, teendho, cunno iyo qalabka kale ee buuro – fuulayaashu u baahan yihiin oo ay qasab tahay in la keeno xeryahaas. Xerada ugu hoosaysa waa mida ugu wayn ta noqon doonta ee qof kastaa uu baahidiisa taxadar ahaaneed ka qaadan karo. Xerada ugu saraysa waxaa qasab ah ilaa xad oo ay ku filan tahay in ka yar laba ama saddex qof oo keliya. Samaynta xeryahani waxay qaadanaysaa maalmo badan oo aalaaba si adag lagu fuulayo.

## Xaqiiqooyinka dhabta ah Ee Marka la fuulayo Buurta Efferesti

Fuulitaanka Buurta Efferesti waa mid aad u dhib badan, dhibaatooyinka ugu badan ee lagala kulmo ma aha oo keliya sibxasho iyo ka soo dhicitaan, waxaa intaas u dheer qabow xad-dhaaf ah oo leh hawo qalalan oo nolosha dadka u daran, maxaa yeelay xaalada goobtaas joogeedu sareeyo oo aan kuu saamaxayn inaad si caadi ah u neefsatid qabowga badan iyo hawada qalalan awgeed.

Sannadkii 1953 kii ayaa la soo saaray qalabka Ogsajiinta ee la xambaarto ee loo adeegsado ama loo isticmaalo meelaha ay Ogsajiintu ku yar tahay ama ka jirin, sida buurtan Efferesti korkeeda ama figteeda.

Meelaha aadka u qabow qofku qalabkan Ogsajiinta la'aantii ma neefsan karo. Tusaale: meelaha joogoodu ka sareeyo 7942 mitir, hawada Ogsajiinta ee laga helo ayaa ah 1/3 (saddex dalool hal meel) marka la barbardhigo Ogsajiinta laga helo agagaaraha heerka badda.

*Tixraac:* Wiliyam O.Dhooglas oo sannadkii 1957 kii sahamiyay buuralayda Himalaaya.

## Sheeko gaaban

### Meesha ugu jooga hooseysa Dunida (Badda loo yaqaano "Dead Sea" ama Badda meydka)

Waxay dhacdaa dooxada wayn ee Rifti, waxayna u dhaxaysaa Israaiil iyo Urdun. Baddani ma aha oo keliya meesha ugu hoosaysa oogada biyaha dunida ee waata ugu milixda badan, sidoo kale biyaheedu waxay sideed (8) jeer ka miliix badan yihiin biyaha Badwaynta. Webiga Urdun waa kan biyaha ugu badan u keena, uumiga biyuhu si dhaqso ah ayay u galaan hawada qalalan ee goobtaaas, waxayna milixdu ku ururtaa dacalada ama cidhifyada badda maydka (Dead Sea). Waxayna ka kooban tahay xaddi badan oo macdanno ah oo ay ka mid yihin cusbada caadiga ah, badda meydka (yam hamilash in Hebraw) oo macnaheedu yahay "milixda badda "waana 75 km dhererkeedu iyo ballaceeda oo dhan 6 ilaa 18 km mana laha meel biyuhu ka baxaan, milixda aadka u saraysa ee ay ka kooban tahay ayaa ka dhigtay mid ayna suuro gal ahayn nolosha xayawaanka iyo dhirta. Badda maydka (Dead Sea) waxay heerka badda ka hoosaysaa 400 mitir, waxaana lagu qiyaasaa malaayiin sanno ka hor markii ay dhulka beriga ah ee carabta iyo kala baxeen (go'een) qaarada Afrika oo ay ka samaysantay dooxada wayn ee Rifti



Jaantuska 1.10: Badda meydka

### Cimilada

Badda loo yaqaano "Dead Sea" (Badda Maydka) celcelis ahaan sannadkii waxay heshaa roob ka yar 100mm iyo celceliska heerkulka xagaagii oo u dhexeeya $32^{o}C$, ilaa $39^{o}C$.

## Dalxiiska

Badda maydku waxay leedahay soo jiidasho dhinaca dalxiisayaasha ka imanayay agagaaraha badda Midhitireeniyanka kumanaan sanno iyo dadyaw kala duwan oo ka soo kala jeeda qaybaha kale ee dunida, sidoo kale waxaa soo jiita abuurkeeda, macaadinteeda sida aadka ah u xoogan iyo sida ayna u lahayn noole laga helo dhexdeeda. Wakhtigan xaadirka ahna agagaaraha badda meydka (Dead Sea) adeegyada dalxiisku waa kuwo aad u muuqda, badda dul sabaynteedu waa mid laga dareemayo wakhti nololeed . wakhti yar marka aad gashaan biyaha, jidhkiinu si dabiici ah ayay u dulsabaynayaan dusha sare ee biyaha, maxaa yeelay, milixda ama macdanta sare ee ay ka kooban tahay biyaheedu, waxaana ku raaxaysta jidhka siiba kala goysyada jidhka dadka waxaad si caadi ah u arkaysaa dadyaw maraya agagaaraha xeebta iyaga oo wajiyadooda marsaday dhoobo waxayna aaminsan yihiin inay dhoobadani leedahay qaar ka mid ah daawada maqaarku u baahan yahay. Badda meydka (Dead Sea) waxay noqotay mid ahmiyad wayn ugu fadhida caafimaadka xarun daawaynna u noqotay dadyaw badan oo ay ugu wacan tahay dabeecadaheeda isku midka ah, markii aad safraysid badda meydka ah oo aad baabuur ka qaadatid magaalo madaxda Urdun ee Camaan waxay kugu qaadanaysaa hal saac

Laga bilaabo Camaan waxaa la soconayaa qiyaastii 50 ilaa 60 km oo raf ah marka laga yimaado Qudus waxay kugu qaadanaysaa 40 minit.

### Ka shaqeeya idinka oo fiiro gaara siinaya

1. *Waa maxay qalabka wax lagu qaado marka la fuulayo buurta?*
2. *Sidee bay dadyawaga sherbaas ugu kaalmeeyaan dadka doonaya inay fuulaan buurta Efferesti?*
3. *Ka raadi khariirada dunida korkeeda halka ay Qudus kaga taallo?*

### Isku day su'aashan

- *Go' aansada sida aad uga faaiidaysan lahaydeen cimilada hadii aad qorshaysan lahaydeen in aad booqataan Badda Maydka (Dead Sea) iyo buurta Efferesti?*

## SU'AALAHA LAYLISKA 1.1

Weedhahan tii sax ah ku qor calaamada saxda ee "✓" weedha aan saxda ahayna ku qor ereyada sax ka dhigaya ee dhamaystiraya weedhahan soo socda:-

1 Badwayntu waa meelaha ugu biyaha wayn ee dhulka korkiisa

2 Itoobiya waxaa laga helaa qaybta galbeedka Afrika

3 Farqiga u dhexeeya meelaha ugu sareeya iyo meelaha ugu hooseeya waxaa loogu yeedhaa joogga

4 Afrika waa qaarada saddexaad ee ugu wayn dunida.

5 Atlasku waa khariirado badan oo la soo ururiyay.

6 Misisiibi waa webiga ugu dheer Aasiya.

7 Oogada ugu wayn ee berriga waxaa loo yaqaanaa buur.

8 Oogo (dul) waa mid sare oo siman, taas oo si sare uga kacsan berriga ku xeeran.

# 1.2 DADYAWGA DUNIDA

## 1.2.1 Luuqadaha ugu waawayn dunida

I ***Isku day su'aalahan:***

- *ma sheegi kartaa magacyada qaar ka mid ah luuqadaha ugu waawayn ee lagaga hadlo Itoobiya?*
- *Imisa luuqadood baad ku hadli kartaa?*

II ***Ereyada Furaha u ah casharka***

- *Isgaadhsiin*
- *Afka hooyo*
- *Laba luuqadood ku hadle*

## ujeeddada Akhriskaaga


***Markaad akhrido qaybtan, isku day hadii aad ka jawaabi karto su'aalahan soo socda:***

1. Waa luuqadee ta ugu balaadhan ee ay ku hadlaan dadyawga dunidu?
2. Maxay tahay sababta luuqada af Ingiriisigu u noqotay mid caalami ah?

Dunida waxaa ku dhaqan dadyaw aad u kala duwan, dadyawgaas oo ku hadla luuqado kala duwan, iyada oo laga duulayo daraasadaha la sameeyay dhawaanahan waxaa jira qiyaastii 6000 oo luuqadood oo dunida lagaga hadlo.

**Shaxda 1.4: Luuqadaha ugu waawayn Dunida**

| Shanta luuqadood ee ay dadka ugu tirada badani ku hadlaan qiyaas ahaan: | | |
|---|---|---|
| 1 | Shiinaha ( Chinese ) ( mandarin ) | 1.2 Bilyan |
| 2 | Carabi | 422 Milyan |
| 3 | Hindi | 366 Milyan |
| 4 | Ingiriisi | 341Milyan |
| 5 | Isbaanish | 322 - 358 Milyan |




**Jaantuska 1.11: Waddamada ku hadla Afka Ingiriisiga ee dunida**

## Luuqadaha caalamiga ah

Maanta luuqada af-Ingiriisku waa tan loo adeegsado isticmaalka isgaadhsiinta casriga ah, islamarkaasna loogu isticmaalka badan yahay dunida, sidoo kale waa luuqada rasmiga ah ee dalalkii hore ee uu gumaysan jiray Ingiriisku.

Luuqada Faransiiskuna, waatan labaad ee loogu isticmaal badan yahay isgaadhsiin ahaan dunida. Afka Faransiiska waxaa laga isticmaalaa dalal badan oo Afrika ka tirsan kuwaas oo uu horay Faransiisku u gumaysan jiray. Isticmaalka luuqadaha kale waa kuwo xadidan. Isbaanishka waxaa lagaga hadlaa waddanka Isbayn iyo laatiin Ameerika, halka Carabigana loogaga hadlo Bariga dhexe iyo Waqooyiga Afrika.



### Hawl-galka 1.6

1 Tilmaan, adeegso khariirad, waddamada lagaga hadlo ee ay luuqadooda koowaad u yihiin Mandarin , Ingiriisiga Isbaanishka iyo Carabigu?

2 waa maxay sababta Ingiriisiga loogu Isticmaalo hababka muhiimka ah ee isgaadhsiinta caalamiga ah?

## Sheeko gaaban

Cali waa inan dhalinyaro ah oo Kikuyu ah, kana yimid Kiiniya wuxuu ku hadlaa saddex luuqadood oo kala ah Kikuyu, Sawaaxili iyo Ingriisi.

Kikuyu waa luuqadiisa dhalasho Sawaaxiliguna waa luuqada shaqo ee rasmiga ah dalka Kiiniya. Waxaana si balaadhan loogaga hadlaa dalalka ku dhereran xeebaha Bariga Afrika waana sababta uu Cali ugu hadlayo luuqada kisawaaxiliga sidoo kale Cali wuxuu ku hadli karaa Ingiriisiga, maxaa yeelay waa luuqada shaqo ee rasmiga ah sidoo kale Kiiniya. Qofka luuqad – badanaha ahi waa ka ku hadli kara in ka badan laba luuqadood.

### *Jawaabo gaagaaban ka bixi*

1 Cali ma laba luuqadoodle baa mise luuqado-badane?

2 Cali miyaad u malaynaysaa inuu dhibaato xaga isgaadhsiinta ah kala kulmayo hadii uu aado Maraykanka ama Ingiriiska?

3 Ma ka fakari kartaa qaar ka mid ah faaiidodarooyinka aqoonta ama ku hadalka hal luuqo oo keliya?

## 1.2.2 Ilbaxnimooyinkii Hore

### I *Isku day su'aashsan*

- *maxay tahay sababta aad ugu malaynaysid in ummad dadyawgii Hore ka mid ahi, inay ilbaxnimo ku horumariyaan biyaha agtooda?*

### II *Ereyada muhiimka ah*

- *Waraabka*
- *Biyo-xidheeno*
- *godadka (gacamo)*
- *Boqortooyo (dhaxal tooyo)*

### III *Ujeedada Akhriskaaga*

***Markaad akhrido qaybtan fiiri hadii aad ka jawaabi karto su'aa lahan soo socda:***

1 Waa maxay sababta uu webiga Niil aad muhiinka ugu yahay dalka Masar?

2 Waa maxay waxyaabihii ay lahaayeen Masaaridii hore?

### Ilbaxnimadii Hore Ee Masar

Sida ka muuqata ilbaxnimooyinkii hore ee dunidan aynu ku noolahay waxay ahaayeen kuwo intooda badan ka bilaabmay dooxooyinka webiyada. Beeralaydu waxay biyaha webiyada uga faaiidaysan jireen dhinaca waraabka dalagyada ay beeran jireen. sidaa darteed waa arrin iska dabiici ah inay dadku degaan meelaha biyaha leh sida: Agagaarka webiyada, haraha i.w.m.

Haddaba, dadyawgii hore ee degey agagaarka dooxooyinka webiyadu si wada jir ah ayay u samaysan jireen Moosaska ay beeraha ku waraabsan jireen iyo biyo-xidheenada ay biyaha ku keydsan jireen. Wax wada-qabsigaas iyo iskaashigaas ayaa u horseeday inay isku- filaansho xaga biyaha ka gaadhaan, waxayna fahmeen in wadajirku uu waxtar wayn u leeyahay wada noolaanshaha, kadib waxay ku guulaysteen ilbaxnimooyinkii hore ee ka bilaabmay dooxooyinka Webiyada ee xadaaradihii hore, inay guulo dhaxal gal ah ka soo hooyaan oo laga heli karo diiwaanada taariikhda ee dunida







**Jaantuska 1.12: Xarumihii Qadiimiga ahaa ee Xadaaradihii hore**

Ilbaxnimadii hore ee Masaaridu waxay ahayd, mid ka dhalatay agagaarka dooxada Webiga Niil, ilbaxnimadaas oo ahayd mid ka mid ah ilbaxnimooyinkii ugu horeeyay dunida. Ilbaxnimadan waxaa door wayn oo muhiim ah, ka qaatay webiga Niil oo ah webiga ugu dheer dunida, isla markaana soo mara dalal badan oo ku yaalla Bariga iyo Badhtamaha Afrika, hadaba webiga oo ay fatahaadiisu gaadhaysay berriga ku xeeran, halkaas oo carradii nafaqada lahayd ee uu webigu ka Keenayay meelaha fog uu soo dhigi jiray, Tani waxay ka caawisay beeralaydii Masaaridu inay tabcadaan dalagyo kala duwan. Dalka Masar wuxuu dhacaa ama ku yaallaa waqooyiga Bari ee Afrika.

***Bulshadii Reer Masar:*** Boqorkii reer Masar waxaa loo yaqaanay Fircoon, wuxuu ahaa keligii taliye, dhinaca Awoodana waxaa isaga ku xigay wadaado,kuwaas oo masuul ka ahaa goobaha ay ku  caabudi jireen Asnaamtii iyo dabaqada sare kuwaas oo iska lahaa dhulka masuulna ka ahaa canshuuraha dadka laga soo ururiyo. Boqorrada, wadaadada iyo dabaqada sare waxay ahaayeen kuwo laga tiro badan yahay, laakiinse Awood buuxda leh, dadka intiisa badan waxay ahaayeen dadka xorta ah (aan adoomo ahayn) Beeralayda iyo Adoomadaba.

***Diinta:*** Masaaridu Waxay aaminsanaayeen ilaahyo badan sidoo kale waxay aaminssanaayeen inay nololi jirto geerida kadib, waxay qalfoofka maydka marin jireen dawo ilaalisa, daryeelista jidhka maydka oo loo yaqaanay “Maamiis”. Markii uu fircoon dhintay waxaa lagu duugay (aasay) taallada wayn ee loo yaqaanno Ahraamta

***Guulihii Masaarida:*** Masaaridu waxay horumariyeen fartoodii loo yaqaanay "Hiirogliifikis". waxay hindiseen adeegsiga Tirsiga Taariikh sannadeedka taas oo ay sannadka u qaybiyeen 365 maalmood.



## Hawl-galka 1.7

1 Waa maxay Sababta Masaarida loogu yeedho "Deeqda Niil".

2 Waa maxay Sababta Faraaciinta loogu dhisay Ahraamta?

## Sheeko gaaban

### Shiinihii iyo Roomaankii Hore

#### Shiinihii Hore

Shiinuhu wuxuu ku yaallaa Bariga Aasiya, Shiinaha ilbaximadiisii hore waxay-ka bilaabantay wabiyada waawayn ee loo yaqaano webiga yaangista iyo Webiga Hurdiga (Jaalaha), marmarka qaarkood intii ka horaysay 1000 C.H, dadku waxay ku noolaayeen meelo ay si wadajir ah ugu hawlagelayeen xakamaynta webiga iyo waraabsiinta qaybaha kale ee dooxada. Boqoro ayaa soo xukumi jiray, qayb kamid ah qoyska boqortooyada ayaa mudo dheer sii waday hogaaminta Shiinaha sannado badan. Qoyskaas talada waddanka soo xukumayay mudada dheer waxaa loo yaqaanay dhaxaltooyo. Boqortooyooyin kala duwan ayaa Shiinaha soo hayay kumanaan sanno oo wakhtiyo kala duwan ah. Intii ay shiinuhu ku hoos jireen boqortooyooyinkan ayay ilbaxnimadoodii si wayn u horumariyeen waxayna horumariyeen farshaxanka iyo suugaanta mudo aad u dheer. Shiinuhu waxay soo saareen Bariis iyo shaah waxayna barteen oo ay soo saareen waxyaabo laga sameeyo dharka xariirta ah, waxay dhisteen gidaarka wayn ee aadka u dheer ee ay caanka ku yihiin shiinuhu ee loo yaqaano. Gidaarka wayn ee shiinaha (ku dhawaad 1500 mayl ama 1800 KM) cabsi ay ka qabeen deriskooda ka xigay dhinaca waqooyi oo ay ugu talogaleen inuu ka difaaco cadowgooda. Konfiyuushas wuxuu ahaa shiiniihii hore shaqsigii ugu xigmada badnaa, kaas oo ahaa mid si aad ah u doonayay horumarinta bulshada iyo maamul wanaaga.

## Guulihii ay shiinuhu gaadheen

Shiinuhu waxyaabihii ugu muhiimsanaa ee ay dunida ku soo kordhiyeen, wuxuu ahaa habka wax loo daabaco oo ay hindiseen mudo ku dhow 700 C.D. sidoo kale waxay horumariyeen hab-qoraal ay ka soo qaateen ama kasoo jeeday Aasiyada kale, qoraalkaas oo ahaa qoraal sawireed (logographic).

## Roomaankii Hore

Rooma waxay ka bilaabantay agagaarka webiga Tiber iyada oo ahayd magaalo ismaamusha. Waxaa aasaasay qabiil ka mid ah qabaailadii Talyaaniga ahaa ee loo yaqaanay Laatiinka. Kadib Laatiinkii ama Roomaankii waxay bilaabeen inay qabsadaan gacanka Talyaaniga 500C.H.

## Jamhuuriyadii Rooma

Roomaanku waxay samaysteen (aasaaseen) Jamhuuriyad intii lagu jiray 500 C.H. Markii ay Rooma noqotay Jamhuuriyada, ma lahayn Boqor ay si rasmi ah u doortaan laakiin markii ugu horaysay ayay u ogolaadeen dabaqada sare ee laandheeraha ahayd oo keliya inay codeeyaan. Dadkii masaakiinta ahaa ee beeralayda iyo shaqaalihii magaalada Rooma ma lahayn wax xuquuq ah. Dadkan masaakiinta ahaa waxaa loo yaqaanay Bilebiyaanis ama Bilebis, cabsashadooda uma gudbin karayn dawladooda. Inkasta oo ay Rooma Jamhuuriyad ahayd, hadana nidaam Dimoqraadiyadeed kuma dhaqmayn. Hase yeeshee si tartiib-tartiib ah ayay dadkii caadiga ahaa ama Bilebiyaaniskii ku qasbeen dabaqadii sare in ay u ogo laadaan xuquuqo badan.

## Dhismihii Imbiraadooriyadii Rooma

Rooma halkiibay ka sii waday dhaqankeedii dhul balaadhsiga. Roomaanku waxay ka adkaadeen magaaladii xooga waynayd ee Kaartayj oo ku taalay waqooyiga Afrika. Kadib Roomaankii waxay dhinaca waqooyi u riixeen oo ay qabsadeen Yurub inteeda badan. waxayna ahayd mid xoog badan ilaa iyo qarnigii 5$^{aad}$ C.D.

## Jabkii/Burburkii Rooma

Arrimo badan ayaa Keenay inay Rooma si tartiib tartiib ah u diciifto, kadibna burburto

1. Bilebiyaanisku waxay isku dayeen inay ku guulaystaan xuquuqo badan oo ay ka helaan dabaqada sare, tani waxay u horseeday in ay dagaalo khadhaadh dhexmaraan iyaga iyo dabaqada sare.

2 Taliyayaashii ciidamada iyo siyaasiyiintii roomaanku waxay bilaabeen dagaal uu midba midka kale kaga soo horjeedo. Agostas ayaa sanadkii 27 C.H noqday boqorkii ugu horeeyay waxaana soo af jarantay Jamhuuriyadii. Wixii xilligaa ka dambeeyay Rooma waxaa xukumayay boqoro, balse dhibaatooyinkii faraha badnaa ee Rooma halkoodii ayay ka sii socdeen.

3 Qabiiladii Barbaariyaanka oo si isdaba joog ah u weerarayay Boqortooyadii Rooma. Sannadkii 476 C.D qabiilo Jarmal ahaa ayaa ka soo horjeestay Boqorkii ugu dambeeyay ee Rooma, sidaa awgeedna soo afjaray imbiraadooriyadii Galbeedka Rooma.

## Guulihii Roomaanka

a ***Xeerkii Roomaanka:*** Roomaanku waxay horumariyeen xeer kaas oo saamayn ku yeeshay Nidaamyada sharciyeed ee Galbeedka Yurub

b ***Luuqada:*** Luuqada laatiinku waxay ahayd luuqada Roomaankii hore, waana halka ay ka soo jeedaan Luuqado badan sida: Faransiiska Isbaanishka, Boortuqiiska iyo Ruumaaniyaanka. sidoo kale ereyo badan oo Ingiriisiga ka mid ah oo ka soo jeeda laatiinka ayaa jira.



### Hawl-galka 1.8

1 Waa maxay sababta ay shiinuhu u dhiseen Gidaarka wayn?

2 Tax ama qor guulihii ugu waawaynaa ee ilbaxnimadii hore ee shiinaha

3 Sharax guulihii Roomaanku ay ka soo hooyeen luuqadooda

## 1.2.3 Beershiyaankii (Faarisiintii) iyo Giriigii Hore

### I *Isku day su'aalahan*

***Ma sheegi kartaa dalka ay Beershiyaankii hore ku noolaayeen? Magaceesee dalkaas maanta loo yaqaanaa?***

### II *Ereyada Furaha u ah Casharka*

- *Imbiraadooriyad*
- *Dimoqraadiyad*
- *Jamhuuriyad*
- *Dagaal-yahan*
- *Dawlad*

## III *Ujeeddada Akhriskaaga*

***Marka aad akhrido casharkan, hubi in aad ka jawaabi kartid suaalahan soo socda.***

1. Maxay ahaayeen qaar ka mid ah farqiyadii u dhexeeyay Atenis iyo Isbaarta?
2. Ayuu ahaa kii ugu dambayn qabsaday Magaalo-qarameedyadii Giriiga? Maxayse ahaayeen sababihii Giriigu sida fudud ugu jabeen?

## Imbiraadooriyadii Faarisiinta

Ku dhawaad 550C.H, Faarisiintu waxay degenaayeen dhulka jooga sare leh ee Bariga Mesoobataamiya oo ah halka maanta loo yaqaano dalka Iiraan. Taariikhdu markay ahayd 539 C.H ayaa waxaa dhul-balaadhsi imbiraadooriyadii ay ku midoobeen sameeyaa oo aasaasay Faarisiintu boqorkii Faarisiinta ee la odhan jiray boqor sayras. Intaas kadib waxay ku balaadhiyeen Boqortooyadoodii Hindiya oo ka xigtay xaga Bariga, Badda Ajiyaan oo ka xigtay xaga Galbeed iyo Masar inkasta oo ayna xuduud wadaagin, kaga beegnayd xaga koonfureed. Sidaa awgeed waxay Beershiyiintu aasaaseen lmbiraadooriyadii ugu waynayd ee aan weli lagu arkin dunidii hore.

## Guulihii Faarisiinta

### I *Dawladda:*

b Imbiraadooriyadii Faarisiintu waxay u qaybsanayd gobollo, gobol kasta waxaa xukumayay gudoomiye gobol.

t waxay dhiseen wadooyin isku xidha boqortooyada cidhif ilaa cidhif, isla markaana sahashay dhaqdhaqaaqyadooda ciidan iyo kuwa ganacsi.

### II *Diinta:*

Diinta Faarisiinta waxa loo yaqaanay SoorTaster taas oo ay aaminsanaayeen inay ka soo jeedo Nebigoodii sooraster. waxayna fikir ka haysteen shaydaanka, waxay aaminsanaayeen in nololi jirto geerida ka dib, kaas oo ay markii dambe ka dhaxleen diimo aaminsan inuu jiro ilaah keliya oo Awoodda iska leh.

## Giriigii Hore

Laga bilaabo ku dhawaad 600 C.H ilaa 350 C.H dadyawgii Giriiga ahaa waxay hormood ka ahaayeen Ilbaxnimooyinkii agagaarka Badda Midhitreeniyamka, Giriigii hore marna ma noqon waddan midaysan. Maxaa yeelay buuralaydooda oo waddanka ka dhigay kuwo kala qoqoban, waxayna u kala qaybsanaayeen maamulo yaryar oo badan oo xor ah kana jiray magaalooyinka. Magaalooyinka ugu muhiimsan waxaa ka mid ahaa Atenis iyo Isbaarta.

Reer Atenisku waxay ahaayeen kuwa ugu afkaarta iyo ganacsiga badnaa Giriiga. Atenisku waxa ay rumaysnaayeen Dimoqraadiyada ama "Maamul shacabku leeyahay"Lab kasta oo muwaadin reer Ateenis ah wuxuu xaq u lahaa inuu codeeyo iyo inuu ka hadli karo fagaarayaasha dadku isugu yimaadaan, si kastaba ha noqotee haweenka iyo Adoomadu kama qayb qaadanayn. Reer Isbaarta waxay ahaayeen dagaalyahamada Giriiga. Waxay aaminsanaayeen qaab milatari oo keli talisnimo ah. Dawladuna waxay maamulaysay dhamaan hab-nololeedka dadka. wiilasha reer Isbaarta waxaa guryahooda laga qaadi jiray markay todobo jirsadaan kadibna, waxay ku noolaan jireen xeryaha ciidamada halkaasoo ay ku baran jireen sidii ay u noqon lahaayeen Askar geesiyaal ah oo xoog badan leh.

### Waxyaabihii ay ku guulaysteen Giriigii Hore

Giriigu waxyaabihii ugu waawaynaa ee uu dunida ku soo kordhiyay waxaa ka mid ahaa laamaha Farshaxanka, cilmiga sayniska, Falsafada, suugaanta iyo Hab-masraxiyeedka. Laakiin arinta ugu wayn ee ay dunidu ka dhaxashay waxay ahayd Fikrada Dimoqraadiyada "Maamulka uu shacabku iska leeyahay"



### Hawl-galka 1.9

1. Halkee buu ahaa hoygii ay degenaayeen Faarisiintu ku dhawaad 550 C.H? wakhtigan xaadirka ah se dadka ka soo jeeda faarisiintii magacooda sheeg?
2. Waa maxay sababta ay Girugii hore ugu qaybsanaayeen ismaamul magaaleedyo? waa kuwee labadii ugu muhiimsanaa ismaamul-magaaleedyadii?
3. Maxaad u malaynaysaa waxyaabihii ugu waawaynaa ee ay reer Atenis dunida ku soo kordhiyeen?

## 1.2.4 Ilbaxnimadii hore ee Indiyaankii Ameerika

### I *ka fikir waxaad ka taqaanid*

waa maxay sababta ay dadku tixraaca ugu sameeyaan dadkii ugu horeeyay ee deganaa Ameerika sida indiyaankii?

### II *Ereyada Furaha u ah casharka*

- *Taariikh*
- *Qabsasho*
- *Seko (canshuur)*
- *Hab-qodaalka Meegaar (Saf-safka)*

### III *Ujeeddada Akhriskaaga*

***Markii aad akhrido qaybtan xulka ah fiiri ama isku day inaad ka jawaabi kartid su'aalahan soo socda:***

1. Magacaw qaar ka mid ah guulihii lndiyaankii reer Maaya
2. Maxaa ka mid ahaa waxyaabihii ay Ameerikaan indiyaanku ku soo kordhiyeen dhinaca Beeraha?

## Ilbaxnimadii Hore ee Ameerikaan Indiyaankii

Qaar ka mid ah Indiyaankii Ameerika waxaa ka mid ahaa:- Meksiko Badhtamaha iyo Koonfurta Ameerika ayaa horumariyay ilbaxnimo ay iska lahaayeen

### Ilbaxinimadii Reer Maaya

Ilbaxnimadii Maaya waxay ka tis-qaaday Badhtamaha Ameerika iyo koonfurta Meksiko laga bilaabo 300 C.D ilaa 900 C.D. Reer maaya waxay dhiseen magaalooyin waawayn kuwaas oo noqday xarumo diimeed. Beeralayda reer Maaya waxay ka shaqayn jireen Bustaano waawayn oo ku xeernaa magaalooyinka, waxay tabacan jireen Galleyda ama Arabikhida, Atarka, Qajida, Afakaadhaha iyo Babaayga. Reer Maaya waxay hindiseen qoraal, hab-tirooyin iyo tirsi-taariikh sannadeed ku dhawaad 900 C.D. Reer Maaya sidii ay ku burbureen iyo sababihii dhaliyay xog lagama hayo.

## Ilbaxinimadii Reer Astek

Ilbaxnimada kale ee qadiimiga ahayd ee Ameerika, waxay ahayd tii reer Astek. waxay ku noolaayeen Meksiko oo ay ka aas'aaseen magaalo madaxdoodii loo yaqaanay Tinojitlaan (Tenochtitlan) oo ahayd Jasiirad ku taalla harada Tekis koko (Texcoco).

Dagaal-yahamadii reer Asteek waxa ay qabsadeen dadyawgii kale ee ay deriska ahaayeen, waxayna ku qasbeen dadku inay bixiyaan canshuuro. Reer Asteek waxa ay horumar ku gaadheen canshuurlhii ay ka qaadayeen dadkii deganaa dhulkii ay qabsadeen. Boqarku wuxuu xukumayay dhamaan dhulka ay degaan reer Asteek iyo bulshadoodii lahayd dhawrka dabaqadood. Reer Asteek waxaay xoojiyeen cusbataallo dhakhaatiir leh. Dhakhaatiirtoodu waxay yaqaaneen in kabadan 1000 nooc oo daawo ah taasoo ay kasamayn jireen dhirta, waxay isticmaali jireen hab sawir qoraal fudud oo taariikh leh

## *Ilbaxnimadii Reer Inka*

Reer Inka waxay degeen dooxada Endhis ee ku taal dalka Beeru. Ku dhawaad 1200C.D. Waxay Magaalo madax ka dhigteen kaasko. Dadka reer Inka intooda badan waxay ahaayeen beeralay kuwaasoo beeran jiray Galleyda iyo dalagyada kale. Reer Inka intii ay ku jireen dhul-balaadhsiga iyo dagaalada waxay aas'aaseen Imbiraadooriyad. Reer Inka waxay si aad u saraysa u xoojiyeen nidaam dawli ah oo habaysan waxayna horumariyeen isgaadhsiinta iyo gaadiidka si la isugu xidho imbiraadooriyada. Horumarka ay ka gaadheen xaga beeraha waxaa ka mid ahaa; Hab-waraab adag iyo habka layn laynka (saf-safka) qodaalka.

## *Guulihii Indiyaanka*

Waxyaabihii ugu muhiimsanaa ee ay guulaha ka soo hooyeen waxay ahaayeen, dhinaca Beeraha; iyaga oo ahaa kuwii ugu horeeyay ee beerta; Galleyda, Baradhaha, Timaatimka, Geed-miroodka laga tuujiyo dheecaanka loo isticmaalo sharaabka fudud, Dubada Afokaadhaha, iyo Digirta. Waxaa kale oo ay ahaayeen dadkii ugu horeeyay ee daahfurka ku sameeyay Buuriga ama Tubaakada iyo waxyaabaha laga sameeyo nacnaca.



## Hawl-galka 1.10

1 Faahfaaihin ka bixi dadyawgii kala ahaa maaya, Astek iyo inka waxyaabihii ay ku soo kordhiyeen dunida ee dhinaca dhul beereedyada Beeraha?

2 khariirada korkeeda ka tilmaan, goobaha soo socda:-

- *Badhtamaha Ameerika.*
- *Koonfurta Ameerika .*
- *Meksika iyo Beeruu.*

# 1.3 HAB-NOLOLEEDKA IYO BAAHSANAANTA DADKA

### Ereyada Furaha u ah Casharka

- Filiqsanaanta dadka
- Cufnaanta dadka
- Hab-nololeedka
- Arimaha dhinaca xun iyo dhinaca fiican
- Diin
- Dad samee
- Arimo Duleed
- Koox isku dhaqan ah
- Budhistaha

## 1.3.1 Baahsanaanta dadwaynaha ee Dunida

### I *Isku day su'aalahan*

- *waa intee wadarta tirada dadka ee wakhtigan xaadirka ah dunida?*
- *Intee lagu qiyaasaa boqolkiiba dhulka ay degan yihiin dalalka soo koraya?*

### II *Ujeedada Akhriskaaga*


***markaad akhrido cashirkan, isku day inaad ka jawaabi karto su'aalahan soo socda***

1 Sheeg meelaha dunida ka mid ka ah ee ay dadku ku filiqsanyihiin iyo meelaha ay ku cufanyihiin

2 Qaaradee baa ugu saraysa tirada dadka ee Aduunka? waayo?

lnkasta oo ay dadka Dunida ku nooli ka badan yihiin 6 Bilyan oo qof, baahsanaantoodu waa midaan sinnayn ama aan is le'ekayn. lntooda ugu badan waxay ku xoonsan yihiin 1/3 (saddex meelood hal meel) oo ka tagaya meelaha ugu waawayn ee aan la degi karin (fiiri Jaantuska 1.13)

Tirada dadka ee ,degen dhulka oogadiisa berriga ah





**Jaantuska 1.13: is bar-bardhigida dadka iyo meelaha kale ee dhulka oogadiisa ah**

Markii aad fiiriso jaantuskan sare 10% oo keliya ayay dadku dhulka oogadiisa sare ka degen yihiin saamiyo kala duwan.


Markii ay taariikhdu ahayd 2000 kala badhow badhka wayn ee tirada dadka dunidu waxay ku noolyihiin Bariga iyo koonfurta Aasiya, Shiinaha waxaa deganaa 1.3 Bilyan oo qof iyo Hindiya oo 1 Bilyan ah oo ka mid ah kuwa ugu tirada dadka badan. Yurub iyo waddamadii laysku odhan jiray Midawga Soofiyeeti oo ka kooban 14%, Waqooyiga iyo Koonfurta Ameerika oo iyagna ah 14%, Afrika oo haysata 13% iyo Jasiiradaha Baasifiga oo lagu qiyaaso 1% tirada dadka dunida. Tani waxay ku tusaysaa inayna baahsanaanta tirada dadka ee qaaraduhu si isku mid ah ahayn. Tani waxaa sababay kala duwanaanshaha baahsnaanta khayraadka dabiiciga ah iyo sinnaan la'aanta heerka horumarka dunida.

khariiradan soo sacota waxay ku tusinaysaa, baahsanaanta tirada dadka ee dhulka oogadiisa sare oo lagu astaynayo dhibco casaan ah.




**Jaantuska 1.14: Baahsanaanta dadwaynaha dunida**

Iyada oo lagu salaynayo khariiradan sare tilmaamida waddamada magacyadooda ama meelaha ay dadku u ku filiqsani yihiin iyo sida isku-cufnaanta ahba.




**Jaantuska 1.15: Noocyada Baahsanaanta dadwaynaha**

## Hawl-galka 1.11



1. waa maxay sababta ay Shiinaha, Hindiya iyo dooxada webiga Niilka ee Afrika ay u haystaan saamiga ugu badan ee dadwaynaha?
2. waa maxay sababta Saybeeriya. lamadegaan ka saxaaraha iyo meelaha kaymaha leh ay dadku ugu filiqsan yihiin?

3 Qaybtee bay dadwaynuhu ku cufan yihiin Itoobiya?
4 Qaybtee bay dadwaynuhu filiqsan yihiin Itoobiya? Waayo?

## 1.3.2 Xaaladaha Sababa kala duwanaanshaha baahsanaanta dadwaynaha

***Waa maxay arimaha saamaynta ku leh baahsanaanta dadka deegaankiina iyo meelaha agagaarkooda ahba? ha u sharaxaan fasalka.***

waxaa jira sababo badan oo keena kala duwanaanshaha qaybaha tirada dadka ee ka muuqda Jaantuska 1.14 qaar ka mid ah sababahaasi waa kuwo niyadjab ku keena nolosha dadyawga goobahaas, Arimahani waa kuwa dhinaca xun marka laga eego dhaliya inay tirada dadku noqoto mid hoose sababaha kale waa kuwo dhiirigeliya in ay dadku ku noolaadaan meelahaas kuwani waa kuwa marka dhinaca fiican laga eego dhaliya inay tirada dadku noqoto mid aad u saraysa Dhinacyada xun (Taban) iyo fiican (Togan) labaduba waa arimaha u sii kala qaybin kara deegan ahaan arimo dabiici iyo arimo dad samee ahba, waa maxay arimaha dabiici iyo dad samee ee saamaynta ku leh baahsanaanta tirada dadka? Tax qaar ka mid ah?

### Xaaladaha Saamaynta Ku leh cufnaanta hoose ee dadwaynaha (Dhinaca xun)

***Arrimo duleed:*** dadka ma soo jiitaan dabiici ahaan, meelaha leh ciimlada sida aadka ah u qabow, u kulul, u qalalan ama u qoyan midkoodna, meelaha joogga sare leh ma dhiirigeliyaan in dagaamo laga dhigto gaar ahaan meelaha leh laalaadyada sare ee buuraha dhinacyadooda ee ay saameeyeen qaraxyada foolkaane iyo dhulgariiradu. Kaymaha koonifaraska iyo kaymaha kulaalayaashu kolkii loo eego kuwa kale, waxay leeyihiin xoogaa dad ah oo meelahaa si joogta ah u degan. sidoo kale xoogaa (in yar) oo dad ah ayaa ku nool meelaha ay carradu nafaqo (huyuumas) ku filan lahayn ee beero falashada ku haboonayn ee ay aafeeyeen carro-guurka saaidka ah ee ay sababeen dhirxaalufka iyo daaqsinta xad-dhaafka ahi. Meelaha khayraadka dabiiciga ee aan lahayn, waxyaabaha ayka mid yihiin macdanta iyo Tamarta (shidaalka) oo ah meelaha aanay warshaduhu aad u houmarin. Degitaanku meelaha uu aad u yar yahay koritaankoodu oo ay ugu wacan tahay biyo ku filan la'aantu ama ay dhibaateeyeen cudurada iyo cayayaanka u daran beeraha sida: Ayaxa iyo dulinada kaleba.

***Arrimaha Bulsho (Dad-sameega ah):*** Waa meelaha geri go'anka ah ama meelaha ay dadku ka wadaan dhismayaasha iyo hawlaha gaadiidka la xidhiidha, oo intooda badan laga yaabo inay dadku si teel-teel ah u degan yihiin, siiba, meelaha xeebaha ka durugsan.

Arimaha dhaqaaluhuna waa kuwo sidoo kale sababa, inay cufnaanta dadku noqoto mid hoosaysa maxaa yeelay, dhaqaale yaraanta iyo la'aanta farsamooyinka casriga ah (Tignoolojiga) si looga guulaysto arimaha duleed (dabiici) ee aynu kor ku soo xusnay.

Go'aamada siyaasadeed ee ay ku dhaqmaan dawladaha qaarkood ayaa laga yaabaa inay iyaduna saamayn ku yeelato baahsanaanta dadka. Waana marka ay ku fashilmaan dawladuhu dhinacyada maal gelineed iyo samaynta deegaamo cusub oo leh fursado shaqo iyo adeegyo kaleba.

## Sheeko gaaban

### Dadyawga ku nool Baraflayda

Xageebay dunida kaga nool yihiin kooxahani? Adeegso Buug-tibaaxeedka yaala laybareeryadiina, idinka oo magacaabaya meelaha ay ku nool yihiin u soo jeediya fasalka.

Waa dadyawga degen meelaha xeebaha ah ee Giriinlaand Artikada waqooyiga Ameerika (oo ay ku jiraan kanada iyo Alaaska) iyo Waqooyiga Saybeeriya darafka ugu shisheeya Sidaa darteed, waata keentay inay noqdaan dadka ugu tirada yar ee ugu nolosha adag taas oo ay sababtay xaalada juqraafi ahaaneed ee qalafsan.

Waa dad aad u dib dhacsan oo ah kuwo hadba qaxa oo ku nool meelaha aadka u qabow iyo deegaamada dhibka badan ee gobolada aynu kor ku soo xusnay. lnta lagu jiro xilliga jiilaalka ee aadka u qabow, waxay dhinac degaan xeebaha badda, guryo baraf ka samaysan hoostooda, laakiin inta lagu jiro xilliga xagaaga ah ee gaaban waxay ku nool-yihiin meelaha xeebaha ka fog halkaas oo ay ka dhistaan Teendhooyin ka samaysan maqaarka xayawaanka iyo dhagxaan.



Jaantuska 1.16: Dadyawga ku nool Baraflayda oo dhisanaya guri baraf ka samaysan

Maadaama ayna beero falasho suuro gal ahayn, ayay ugaadhsiga xayawaanka Badda iyo Berrigu noqotay mida ugu muhiimsan degenaanshaha kooxahan, iyaga oo xayawaanka ka hela cunno, dhar,alaab l.w.m maanta in badan oo kooxahan, ka mid ahi waxay ka shaqeeyaan shaqo liidata oo aan lacag badnayn sida ka ganacsiga waxyaabo ay iibiyaan si ay cuno u diyaarsadaan.

## Hawl-galka 1.12




Idinka oo ku salaynaya daraasadan kor ku xusan ka Jawaaba suaalahan.

1 Sawir khariirada aduunka tilmaan halka, ay dhacaan Dadkan ku nool Baraflaydu?

2 Waa maxay arimaha dad samee iyo duleed ee saamaynta ku leh baahsanaanta Dadyowgan? magacaw 2 ka mid ah Dadka ku nool Baraflayda?

3 Waa maxay sababta aanay Dadyawgani beero u falan karin?

Arrimaha dhinaca fiican (Togan) waa kuwa sababa cufnaanta sare ee tirada dadka, arrimahan waxaa si wayn uga soo horjeeda (lidkooda ah), arrimaha dhinaca xun (Taban) oo aynu kor ku soo sharaxnay, waana kuwan aynu ku soo koobnay:- jaantuska 1.17.




**Jaantuska 1.17: arrimaha dhinaca fiican (togan) ee dhaliya cufnaanta sare ee tirada dadka**

## Sheeko gaaban

### Mumbay

***Qaaradee bay Mumbay ku taalaa?***

***Maxaad ka taqaanaa Mumbay?***

Mumbay waa Magaalo ku taaalla Galbeedka dalka Hindiya, waana Magaalo-Madaxda ismaamulka Maharashtrashtra. Waxay magaaladani leedahay deked aad muhiim uga ah dalkaasi Hindiya. Waxaana loo yaqaanay Bombay tan iyo intii aan magaca laga badalin sannadkii 1995kii. Mumbay waa xarunta hogaamisa: Arimaha maaliyadeed ee dalka Hindiya, sidoo kale waa xarunta hormoodka ganacsiga qaranka, warshadaha iyo gaadiidkaba.

Cimilada: Cimiladeedu waa nooca kulaalayaasha qoyan, waxay leedahay carrasan, waxyaabaha ay caanka ku tahay ee halbawlaha u ah waxsoosaarkeeda, waxaa ka mid ah cudbiga oo si aad ah uga baxa. Waana sababta keentay inay warshadaha dharku noqdaan warshadaha ugu caansan ee qaata shaqaalaha ugu badan. Intaas waxaa u dheer, waa dekeda loogu isticmaalka badan yahay dalka Hindiya marka loo eego, dekedaha kale ee dalka, dhinacyada dhoofinta iyo kala soo degidaba.



Jaantuska 1.18: Marin – biyoodka Mumbay

Sannadkii 2001 Mumbay waxay gaadhay heer aad u sareeya oo isku filaansho ah, sababta oo ah waxay leedahay tirada dad ka badan 11 milyan oo qof. kadib markii ay noqotay meesha ugu cufnaanta wayn tirada dadka ee Hindiya, tani waa sababta keentay soo jiidashada tiro badan oo dadyow ah oo ka kala yimid ismaamulada kale ee Hindiya .



## Hawl-galka 1.13

1 Waa maxay sababta ay Mumbay u noqotay mid ka mid ah meelaha ugu cufnaanta badan ee dadka dalka hindiya xataa dunida (adeegso xogta sare ku xusan)?

2 Isbar-bar dhig sheekada 1aad iyo sheekada 2aad una soo bandhig wixii aad heshid fasalka ?

3 Ka magacaw Jantuska 1.14 lix qaybood oo dunida ah oo leh cufnaanta tirada dadka ee sare ama hoose midkood? Laba ka mid ah meelahaas waxaa lagu soo sharaxay khariirada dusheeda mid kasta oo ka mid ah afarta gooboodee soo hadhay:

- b Caddee haddii ay cufnaanta dadku tahay mid sare ama mid hoose ?
- t Sheeg sababaha ay cufnaanta tirada dadku meel u sarayso meelna u hoosayso.

4 Waa maxay xaaladaha saamaynta wanaagsan iyo mida xun ku keenta cufnaanta dadka ee Itoobiya?

# 1.3.3 Hab-Nololeedka Qaybaha Kala Duwan ee Dunida

## I *Isku day su'aalahan*

Ma qeexi kartaa macnaha hab nololeed?

## II *Ujeeddada akhriskaaga*

*Marka aad akhrido casharkan iskuday inaad ka jawaabi kartid su'aalahan soo socda:*

1. Waa maxay hab-nololeed?
2. Maxay kala yhiin dhaqdhaqaaqyada nolol maalmeedka ka jira kulaalayaasha, kul-dhexaadka iyo dhulka qaboobaha ee dunida?
3. Dhul-goboleedkee baa ugu horumarsan? waayo?

***Hab-nololeedka:*** Waa hawl ama shaqo ay dadku ku kasbadaan dakhli soo gala oo u sahla nolosha. Waana sababta keentay inay bini-aadamku had iyo jeer ku dadaalaan sidii ay u dabooli lahaayeen baahidooda aasaasiga ah sida: Cunno, Hoy iyo Dharka. Waana sababta keentay in hab-nololeedka lagu saleeyo saddexda xaaladood ee dhul-goboleedyada soo socda, tusaale ahaan:-

Kulaalayaasha ama gobolada aadka u kulul sida: Qaarada Afrika iyo Koonfurta Ameerika oo ay ku nool yihiin dadyawga aanay dalalkoodu horumarsanayn ee ku dhaqma habka qodaal ee dib-u-dhacsan ee quud beerashada, habkaas oo cunada uga soo go'da aanay dhaafsiisnayn iyaga laf ahaantooda. Marka uu waxsoosaarku kordho ayaa la iib gayn karaa si loogu soo gato (iibsado) badeecado kale, tani waxay noqonaysaa talaabada ugu horaysa ee loo qaaday dhinaca horumarka.

Tabcashada quudku (quud maalmeedku) ma aha dhaqaale, maxaa yeelay waa af iyo gacan dhexdood. Laakiin dhaqaale si looga helo waxay u baahan tahay dadaalo waawayn. Inkasta oo maanta ay jiraan dalal badan oo ahmiyad wayn siiyay hawlaha la xidhiidha beeraha, oo dadku aad ugu dadaalayaan, hadana ay cunno yaraani haysato maxaa yeelay, hababka ay beeraha u tabcanayaan oo ah habab-duug ah. Tusaale ahaan, dalka Itoobiya in ka badan 80% (Boqolkiiba sideetan) dadku waxay ku tiirsan yihiin beeraha, hadana waxaa ilaa haatan haysata dhibaato dhinaca cunno yaraanta ah, isla markaana qasab kaga dhigtay

in uu dalku cunno dibada kala soo dego. Waxaana lidkeeda noqon kara oo aad uga duwan, dadka ku hawlan beeraha ee dalka Maraykanka oo ah 4.2%, isla markaana cunnada ugu badan dibada u dhoofiya. Waxaa kale oo xusid mudan oo iyaguna saamiyo sare leh waddamo badan oo ka tirsan Aasiya iyo laatiin Ameerika oo ku hawlan beeraha.

**Shaxda 1.5: shaqaalaha ku hawlan qaybaha kala duwan ee dhaqaalaha boqolkiiba qaar ka mid ah dalal la xushay.**

| Waddamada | Shaqaalaha ku hawlan % | | |
|---|---|---|---|
| | Beerha | Warshadaha | Adeega |
| Masar | 0.5 | 17.4 | 32.1 |
| Maraykanka | 4.2 | 34.2 | 61.6 |
| Jabaanka | 12.9 | 36.8 | 50.3 |
| Awstareeliya | 6.9 | 35 | 58.1 |
| Ingiriiska | 2.8 | 42.3 | 57.9 |
| Faransiiska | 11.6 | 39.2 | 49.2 |
| Talyaaniga | 7.5 | 48.8 | 43.7 |

*Ilo-xogeed: Webster midabka atlaska dunida ( 1977)*

Gobolka kul-dhexaadka ee dunidu waa ka ugu horumarka badan dunida, waxayna aad ugu horumareen dhamaan noocyada dhaqdhaqaaq ee dhaqaale sida (beeraha, macdanta , kaluumaysiga, warshadaha, ganacsiga, gaadiidka I.W.M) Waddamada ugu warshadaha waawayn ee gobolkan waxaa ka mid ah: Galbeedka iyo Badhtamaha Yurub, Maraykanka, Kanada Jabaanka, iyo Federeeshinka Ruushka. In badan oo ka mid ah waddamada soo koraya waxay kordhinayaan warshadahooda laakiin ilaa haatan, waxaa ka horaysa waddo dheer sidii ay u noqon lahaayeen kuwo ka xorooba inay gacanta kor u hayaan waddamada dhaqaalaha leh ee reer galbeedku.

Qiyaasta heer Wershadaynta, waddamada horumaray iyo dhaqaalalooda kobcay waa saamiga dadkooda shaqaynaya ee ku hawlan adeegyada dagaamada bilaa wax-soo saarka ahaa ee ay u bedeleen dagaamo wax-soo saar. Waxaa kale oo ay horumar ka gaadheen Isgaadhsiinta sida : Gaadiidka , Saxaafada iyo Telefishinka, Adeegyada xirfadleyaasha badan sida: Daawada iyo Sharciyada shaqaalaha u shaqeeya, dawlada , Bangiyada, Dukaanleyda i.w.m. Waxaa tusaale inoogu filan dalka Maraykanka oo shaqaalihiisa adeegayadu kor u dhaafeen 60 % (fiiri shaxda 1.5)

Dhul-goboleedka qaboobaha (cidhifyada barafka leh) gaar ahaan dhulka Tundraha oo ayna beerafalashadu suurogal ahayn cimilada aadka u qabow awgeed, waana ta keentay dadyawga ku nool ee degan gobolku in hab- nololeedkoodu noqdo mid ku xidhan ugaadhsiga , kaluumaysiga iyo dhaqashada adhiga (siiba riyaha)



**Hawl-galka 1.14**

Ka jawaab su'aalaha soo socda adigoo ka tixraacaya Shaxda 1.5

1 Waddankee baa ugu tiro badan shaqaalaha ku hawlan beeraha?

2 Waddankee baa ugu tiro badan shaqaalaha ku hawlan warshadaha?

## 1.3.4 Hab-nololeedka dadyawga qaybaha kala duwan ee dunida

Maanta qaybaha kala duwan ee ay dadku degan yihiin ee dunida, waxaa tiradooda lagu qyaasaa todoba (7) bilyan oo qof. Dunidu waxay leedahay deegaamo kala duwan oo badan. Deegaamadan waa kuwo ka dhashay xoogaga iyo isbedelka qaabsamayska dhulka berriga ah , cimilada, baadka iyo carrada. Hab – nololeedka dadkuna waa mid si aad ah in badan ula xidhiidha baahsanaanta cimilooyinka kala duwan iyo heerkooda Tignoolajiyadeed inay xaaladihii aadka u xumaa u bedelaan xaalado ku haboon hababka ay dadku u doonayaan inay u noolaadaan.

Dadka ugu badan dunida ee ku nool koonfurta Bari ee Aasiya, waddamada ka hooseeya saxaaraha Afrika, Laatiin Ameerika, Jasiiradaha ku yaalla Badwaynta Baasifiga,

- *Dadka Iskiimooska ilaa haatan waxaa haga hab nololeedkoodii qadiimiga ahaa ee ugaadhsiga iyo kaluumaysiga.*
- *Dadka Bigmiska ee laga helo dalka koongo waxa aaasaas u ah oo ay ku dhaqmaan qadhaabsiga midhaha iyo ugaarsiga xayawaanka duur-joogta ah.*
- *Dadka Bedawiyiinta ku nool lama degaanka Carbeed oo gebi ahaanba noloshoodu ku tiirsan tahay Geela.*
- *Dadka Aboorjiineska Awstreeliya oo iyaguna sidoo kale ku dhaqma hab nololeedka reer guuraanimada.*

- *Waxaa lidkooda ah dadyawga horumaray ee laga helo Yurub, Waqooyiga Ameerika, Bariga fog oo ka duwan oo ka casrisan waddamada laatin ameerika iyo jasiiradaha ku yaala badwaynta kuna talaabsaday hab-nololeed ka fiican dadyawga aynu kor ku soo xusnay.*

***Miyaad u malaynaysaa in dadyawga dunidu ay leeyihiin hab nololeed isku mid ah?***

Haddi aad sidoo kale malayn kartid sababee? fadlan falanqeeya inta aydaan qorin ka hor

- *Dhul seereyaasha loo diyaariyo daaqsin iyo warshado IWM noloshana raaxo u leh.*
- *Ka shaqaynta xafiisyada iyo warshadaha.*
- *Soo saarida in ka badan waxyaabaha ay isticmaali karaan sida:- Cunnada, Biyaha i.w.m.*
- *Isticmaalka noocyada kala duwan ee gaadiidka.*
- *Ku noolaamshaha guryo alaabo fiican lagu qalabeeyay.*
- *U isticmaalka korontada ujeedooyin kala duwan.*
- *U isticmaalka quwada ama awoodda laga dhaliyo ee korontada kuna shaqeeyaan mishiinada warshadaha soo saara badeecadaha, waxyaabaha lagu raaxaysto IWM.*
- *U isticmaalka cilmiga dhamaan adeegyada kala duwan iyo waxsoosaar.*

Sababaha ugu muhiimsan ee hab- nololeedyada kala duwan keena:

1. Abuuritaanka deegaamo laga heli karo sida: biyo ku filan, carro nafaqo leh, dhul siman, cimilo fiican I.W.M
2. Isticmaalka cilmiga iyo tignoolajiyada isbad-badalaya ama mar horeba qaab bedelkoodu ka jiro muuqaalka duleed ee dunida in badana Deegaanka wax ku soo kordhin kara caawinna kara.

***Tusaale:*** Isticmaalka khayraadka biyaha oo qiimo wayn ugu fadhiya beero falashada

## 1.3.5 Diimaha Waawayn Ee Dunida

### I *Isku day su'aalahan*

***Ma magacaabi kartaa qaar ka mid ah diimaha ugu waawayn ee lagaga dhaqmo Itoobiya?***

## II *Ujeeddada Akhriskaaga*

*Markaad akhrido casharkan ama qaybtan iskuday haddii aad ka jawaabi kartid su'aalahan:*

1 Waa maxay diin?

2 Waa diintee diinta ay dadka ugu badan ee dunidu rumaysan yihiin?

3 Waa maxay sababta ay dadku ugu dhaqmaan diinta?

Inkasta oo dadyaw badan diintu ay u tahay nidaam habaysan oo ay aaminsan yihiin, kuna dhaqmaan, tusaale ahaan xilliyada gaarka ah ee ay ka mid yihiin:- Xafladaha, munaasibadaha ciidaha, xus-diimeedyada i.w.m. Waxayna leeyihiin goobo (Macbadyo) ay ku caabudaan ilaahay sida: Masaajidka, kaniisadaha i.w.m.

Dadyawga kala duwan ee haysta diimaha kala duwan ee dunidu, waxaa kale oo ay ku kala duwan yihiin inuu jiro Ilaah keliya oo iska leh Awooda ugu saraysa caalamka oo dhanna abuuray. Dadyawga qaarkood waxay rumaysan yihiin Ilaahyo badan. Dadyawga qaarkoodna maba rumaysna oo waxay caabudaan waxyaabaha ay ka mid yihiin:- Cadceeda, Biyaha, Dabka, i.w.m.

Hadaba iyada oo ay sidaas u kala duwan yihiin, ayay hadana dadka intiisa ugu badani isku raacsan (waafaqsan) yihiin in ay jirto awood aad u wayn oo abuurtay caalamka dhamaantii noloshoodana saamayn wayn ku leh.


### *Waa maxay sababta ay dadku ugu dhaqmaan Diinta?*

Dadku waxay diin ugu dhaqmaan dhawr sababood. Qaar ka mid ah, waa kuwan soo socda:

- *Kuwa aaminsan (rumaysan) inay nololi jirto geerida kadib, dadkana la xisaabin doono si ay uga mid noqdaan kuwa nasiibka u hela Jannada.*
- *Waa qayb ka mid ah dhaxalka dhaqankooda, qabiilkooda ama qoyskooda*
- *Dad badan waxay aaminsan yihiin inay ku helayaan badbaado*
- *Waxay u keentaa dareen shaqsi ahaaneed oo buuxa siisana macnaha loo nool yahay .*
- *Ugu dambayn, waxay dad badan ay diintu ka dhigtay dad walaalo ah oo ehel ah,*

- *Imisa diimood ayaad ka taqaanaa dunida?*
- *Tax ama ku qor buuggaaga qorista diimahaas.*

Waxaa jira kumanaan diimood dunida. kuwa ugu waawayn, oo u habaysan waxay kala yihiin Kiristaanka, Islaamka , Yuhuuda, Hinduusamka, Buudhiisamka , iyo Shintooga oo qarniyo badan soo horumarayay. Khariidadan so socota. Waxay ku tusaysaa baahsanaanta diimaha ugu waawayn ee dunida.




**Jaantuska 1.19: Baahsanaanta kooxo – diimeedyada dunida**

Barashada diintu waxay qaabaysay noloshii dadka tan iyo waayadii hore. Yuhuuda Islaamka iyo gaar ahaan Masiixigu waxay saamayn wayn ku yeesheen samaysankii dhaqanka reer galbeedka. Saddexdaan caqiido gaar ahaan Islaamku wuxuu sidoo kale door wayn ka cayaaray oo muhiim ah, horumarinta dhaqanka Bariga dhexe. Dhaqamada Aasiya, waxaa qaabeeyay Budhiismka, Konfiyuushiyaaniisamka, Hunduusimka , Shintooga iyo Taawiisimka.



## Hawl-galka 1.15

Adiga oo ku salaynaya Jaantuska 1.19 ka jawaab su' aalahan soo socda:

1 Koox-diimeedkee buu ka muuqdaa dhaqanka dunidu?

2 Sharax faaiidooyinka dulqaadka diimuhu u leeyihiin Itoobiya iyo xataa dunidan guud ahaan?

# 1.4 KACAANKII WARSHADAHA IYO SAAMAYNTIISII

## 1.4.1 Bilowgii Kacaankii Warshadaha

### I *Isku day su'aalaha*

ka fikir noocyada mishiinada ee aad ku haysataan guryihiina . sidee bay noqon lahayd noloshiinu hadii aydaan haysan lahayn mishiinadaas?

### II *Ereyada furaha u ah casharka*

- *Wershad*
- *Mishiin*
- *soo saarid (hindisid)*
- *Ilaha quwada*

### III *Ujeeddada akhriskaaga*

***Marka aad akhrido casharka isku day inaad ka jawaabi kartid su'aalahan:***

1 Maxaa ka mid ahaa waxyaabihii ugu muhiimsanaa ee ay Ingiriisku soo saareen sannadihii 1700 'aadkii?

2 Maxay ahayd sababtii ugu waynayd ee loo soo saaray mishiinka uumiga ku shaqeeya xilligii kacaankii warshadaha?


Kacaankii warshaduhu wuxuu meesha ka saaray nidaamkii hore ee gacan maalka ahaa oo waxaa badalay mashiino (makiinado) casri ah oo ka waxsoo saar badan. Nidaamkii gacan ama muruq ku shaqayntu wuxuu ahaa mid aanuu wax soosaar kiisu dhaafsiisnayn shaqsiyaad, halka waxsoosaarka warshadu uu ka badan yahay. Soo if bixii niadaamka warshadeed, waa ta suurogelisay in uu waxsoosaarka badeecaduhu aad iyo aad u bato qiimahooduna noqdo mid aad u hooseeya (jaban).

Kacaankii warshaduhu wuxuu markii ugu horaysay ka bilaabmay dalka Ingiriiska Badhatamihii Qarnigii 18$^{aad}$, markii dambena wuxuu ku baahay Galbeedka Yurub iyo Waqooyiga Ameerika.

### Qaar ka mid ah waxyaabihii Ugu horeeyey ee la soo saaray

Soo if bixii wax soosaarka badeecadaha waxaa suurogeliyay, soo saaristii sancada mishiinada qaar ka mid ah kuwii ugu horeeyay ee cusbaa ee la soo saaray oo

ay warshadihii dharku ka dhex muuqdeen. Mishiinadan waa kuwii xawliga sare lahaa ee habkii wax soosaarka dharka ee qiimahiina hoos u dhigay (raqiis ka dhigay).




**Jaantuska 1.20: Wax soo Saarka Kacaankii Warshadaha**

## Ilaha quwada

Quwada biyuhu ma ahayn mid ku filan mishiinada culus ee mudada dheer sidaa darteed, muhandisiintu (soo saareyaashu) waxay raadinayeen habab cusub oo ay mishiinada ku socodsiiyaan. Sannadkii 1705 kii Toomas Niyuu kamin (Thomas New comen) ayaa soo saaray mishiin ku shaqeeya uumiga si uu biyaha banaanka ugu soo tuuro, kaas oo macadanta dhuxul dhagaxda ku shaqeeya. Sannadkii 1769 kii Jaymis Waat ayaa mishiinkii biyaha soo tuurayay ee Niyuu kamin aad uga sii horumariyay sameeyayna mishiinka uumiga ku shaqeeya ee casriga ah ee maanta laga isticmaalo dunida.

Miishiinka uumiga ku shaqeeya wuxuu ahaa waxyaabihii la soo saaray kii ugu muhiimsanaa xilligii kacaankii warshadaha. Markii ugu horaysay waxaa loo adeegsaday macadanta dhuxusha kadibna, warshaddaha soo saara dharka ugu dambayntii waxay keentay isha quwadda ugu muhiimsan ee ay sida balaadhan warshadaha kala duwani u isticmaalaan iyo soo if bixida qaabkoodaba.



## Hawl-galka 1.16

1 Xagee buu kacaankii warshaduhu ka bilaabmay markii ugu horaysay?

2 Maxay sancadii mishiinkii uumiga ee waat u noqotay muhiim xilligii kacaankii warshadaha ?

## 1.4.2 Raad-reebkii kacaanka warshadaha

### I *Isku day su'aalaha*

Miyaad malayn kartaa qaar ka mid ah raad- reebyadii ka caankii warshadaha?

### II *Ereyada furaha u ah casharka*

- *Maal-gelin*
- *Ururada shaqaalaha*
- *Alaab-ceyriin*
- *Waddaninimo*
- *Gumaysi*
- *Shaqo la'aan*

### III *Ujeeddada Akhriskaaga*

*Marka aad akhrido casharkan kadib, isku dey inaad ka jawaabtid su' aalahan soo socda:*

1 Kacaankii warshaduhu ma waxtar farabadan buu u Keenay dadka, mise dhibaatooyin badan?

2 Maxay ahaayeen ururadii shaqaaluhu?

3 Maxay ahayd sababtii ay reer yurub u gumaysteen Afrika?

Kacaankii warshadahu waxa uu lahaa natiijooyin wanaagsan iyo kuwo xunba. Waxyaabo badan oo la soo saaray oo waxaa jira badbaadiyay wakhti iyo lacagba. Xaddiga badeecad ee la soo saari jiray oo marba marka ka dambaysa kor usoo kacayay, badeecado iyaguna aad iyo aad u sii badanayay oo uu qiimahooduna hooseeyo. Waxaa sidoo kale horumar samaynayay waxyaabaha soo if baxayay ama la ogaanayay, hase yeeshee waxaa sidoo kale ku lamaanaa sameynta xun ee ka dhalatay curashadii kacaankii warshadaha.

## *dhibaatooyinkii shaqaale iyo Warshadayntii*

Kacaankii warshaduhu wuxuu Keenay nidaamkii hantigoosiga casriga ahaa ama warshadihii hantigoosiga. Maal – qabbeenkii dhexe iyo dabaqadii shaqaaluhu (muruq–maalku) waxay noqdeen labadii dabaqadood ee saldhiga u noqday bulshadii hantigoosiga ahayd.

Shaqaalhii (muruq-maalkii) warshadaha cusubi waxay si wayn uga imanaayeen baadiyaha (miyiga), beeralaydii dan-yarta ahayd waxay u soo guureen dhinaca magaalooyinka si ay uga helaan shaqooyin warshadaha. Shaqaaluhu (muruqmaalku) waxay ku ag noolaayeen warshadaha ay ka shaqaynayeen, tani waxay u horseeday, inay koraan magaalooyinka iyo caasimaduhu, hase yeeshee magaalooyinkan ugu horeeyay waxay noqdeen kuwo wasakhaysan, foolxun, oo ay iska buuxiyeen dad noloshoodu ay hoosayso.

Sannadihii ugu horeeyay kacaankii warshadaha, shaqaalihii waxaa soo food saaray dhibaatooyin farabadan:

- *Mushaarooyinkooda oo aad u hooseeyay*
- *Saacadaha shaqo oo aad u dhaadheeraa oo gaarayay 16 saac maalintiiba.*
- *Dumarka iyo caruurtu shaqada ay hayeen oo mushaarkoodu ka hooseeyay, aalaaba raga ayaa barabixin jiray.*
- *Xaaladaha shaqo oo aad u liitay.*
- *Shaqo la' aan.*

Dhibaatooyinkani waxay dhamaantood shaqaalihii ku qasbeen in ay bilaabaan halgan ay ku raadinayaan xuquuqdooda. Halgankii muruqmaalku ama shaqaaluhu wuxuu ka soo gudbay marxalado dhawr ah iyo qaabab kala duwan oo dhib badan, waxaa ka mid ahaa samaysankii ururkii shaqaalaha ee loo yaqaanay midowga ururada shaqaalaha. Waxayna baarlalmaanka dalkooda u soo bandhigeen baahidooda iyo iyaga oo ku hawlanaa la halganka siyaasadeed ee Maarkisiisamka kaasoo ahaa midka tusaale loo soo qaadan karo.

## Waddanininmada

Waddaninimadu waa dareenka daacadnimo ee ay dadku u hayaan waddankooda hooyo. Kacaankii warshaduhu wuxuu sii xoojiyay dareenkii waddaninimada,

dhamaan qaramadu (ummaduhu) waxay ka wada akhrisan karayeen jaraaido iyo majalado isku wada mid ah oo ay ka helayeen Barnaamijyo isku mid ah Raadyaha iyo Telefishinka.

Waxaa iyaguna horumar sameeyay oo la dhiirigeliyay gaadiidka, si ay isaga safraan waddanka oo dhan. Sidaas awgeed aragtidii ay dadku meel soke ka eegayeen ee ahayd bixintii canshuuraha oo loo bedelay kuwo ay dadku si heer qaran ah meelo durugsan wax uga eegaan. Waddaniyadu waxa ay qaramadii ka caawisay inay midoobaan sannadihii 1800' yadii run ahaantiina waxaa tusaale loo soo qaadan karaa midowgii Talyaaniga iyo Jarmalka. waddaniyadii maskaxda caafimaadka qabtay ee Talyaaniga iyo Jarmalku waxay aasaastay Midayntii ismaamul hoosaadyadoodii kala qoqobnaa 1800'dii.

## Gumeysi

Soo if bixii nidaamka warshadaha ee Yurub wuxuu siyaadiyay hantidii iyo awoodii qaramada reer Yurub, wuxuuna sidoo kale u horseeday in ay dalbadaan ama u baahdaan, waddamo ay gumaystaan.

## II *Soo if-bixii fikradaha cusub: Dimoqraadiyada, xornimo iyo is-bahaysiga*

### I *Isku day su'aalaha*

Ka fikir sidii aad ugu noolaan lahayd waddan ayna Dimoqraadiyad ka jirin.

### II *Ereyada furaha u ah casharka*

- *Demoqraadiyad*
- *Dooroshooyin*
- *Wadajirnimada*
- *Xuquuqaha*
- *Xornimada*

### III *Ujeeddada Akhriskaaga*

*Marka aad akhrido casharkan, isku day haddii aad ka jawaabi kartid su'aalahan:*

1 Maxay kula tahay faa'iidada Dimoqraadiyadu?

2 Miyayse kula tahay fikrada is-bahaysiga inay tahay mid waxtar u leh Itoobiya? Sidee?

Horumarinta warshadaha waxaa ku lammaanaa fikrado cusub sida: Dimqraadiyada, xoriyada, is-bahaysiga iyo wax-wadaagida waxay ahaayeen. Kuwo ahmiyad wayn soo kordhiyay.

Dimoqraadi waa erey Giriig ah oo macnihiisu yahay "Awooda maamulka ee uu shacabku iska leeyahay" Giriigii hore waxay ahaayeen kuwii ugu horeeyay ee horumariya nidaamka dimoqraadiyadeed ee dawladnimo. "Dhamaan muwaadiniinta reer Athens waxay ku kulmayeen, hal meel ah oo ay ku dejiyaan sharciga iyo go'aamada kale ee muhiimka ah. Qaabkan dimoqraadiyadeed ayaa loo yaqaanaa dimoqraadiyada tooska ah.

Qarhigii 19aad ayay dimoqraadiyadu ku faaftay yurub. Nidaamka dimoqraadiyadeed waa ka soo ururiya go'aan sameeyayaasha (Baarlamaanka) ee ay shacabku soo doorteen oo ay ugu codeeyeen daacadnimo iyo xaq ay u lahaayeen. Qof waliba wuxuu xaq u leeyahay in la doorto ama uu doorto. Xuquuqaha shaqsiyaadka waxaa ka mid ah, kuwa laga tirada badan yahay oo la ixtiraamo. Fikrada xornimadu aad ayay u faaftay, xornimadu waa aaminsanaanta xoriyada hadalka, ra'yi ka bixinta (cambaaraynta), si xor ah u cibaadaysiga iyo shacabka oo dabagal ku sameeya xukuumada lana xisaabtama.

Fikrada kale ee shaac baxday waxay ahayd is-bahaysiga (is-xulaaf aysiga). Isbahaysinimadu waa jiritaanka aragtiyada siyaasadeed ee kala duwan aaminsanaanta diimaha ama jinsiyad aha dadka ee kala duwan ee bulsho meel ku wada nool. waa xeerka (caqiidada) si wadajir ah ugu noolaan karaan bulshada kala duwan.

Is-bahaysiga (prularism) ama is-xulafaysiga siyaasadeed macnihiisu wuxuu yahay Jiritaanka Nidaamka xisabiyada badan, isla markaana ay xisbiyada yaryar ee laga cod badan yahay isu bahaystaan, xuquuqdoodana u soo dhacsadaan.



## Hawl-galka 1.17

1. Faahfaahiin ka bixi sidii uu kacaamkii warshaduhu gacan uga gaystay faafitaankii Dimoqraadiyada?
2. Ma kula tahay in fikirka isbahaysinimadu waxtar u leeyahay Itoobiya? sidee?

# Sheeko gaaban

## sababihii Xasaasiga Ahaa ee Dagaalkii koowaad iyo Dagaalkii labaad ee Dunida

| Dagaalkii I (1914 – 1918) | Dagaalkii II (1939 – 45) |
|---|---|
| 1 Waddaniyad:<br>Bilowgii qarnigii 19aad waddaniyadu waxay u horseeday muran iyo dagaalo dhexmaray dalalkii reer Yurub.Tani oo halis gelisay nabadii Dunida | 1 Gaashaan buurtii Dhexe (Talyaaniga, Jarmalka iyo Jabaanka) waddanlyad:<br>waddamadii Gaashaan buurta Dhexe iyaga laf ahaantoodu waxay isu haysteen Inay dadka ka sareeyaan oo loogu talo galay inay dadyawga kale xukumaan |
| 2 Gumeystenimo:<br>Dareenkii waddanliyadeed iyo doonistoodi alaabta cayriin iyo suuqyadu waxay dalalkii reer Yurub u horseeday inuu dalba dalka kale kula tartamo qabsashada waddamo la gumaysto. | 2 Gaashaan buurtii dhexe, Gumeystenimaddoodii:<br>Gaashaan buurtani waxay bilaabeen inay xuduudahoodii xoog ku durkiyaan. Kani waa ka ugu dambayntii u horseeday inuu qarxo dagaalki labaad ee Dunida sannadkii 1939 kii |
| 3 Ciidamayn:<br>dalalkii reer Yurub waxay si balaadhan u dhiseen ciidamadoodii waxayna soo saareen Hub cusub oo wax gumaada. Tani waxay u horseeday in ay dawladihii reer Yurub garwaaqsadaan dagaalku inuu yahay wax si dhaqso leh xal u keena. | 3 Gaashaan buurtii Dhexe, Milatarinimadoodii:<br>Gaashaanbuurtan waxay dhiseen milatari aad u balaaran waxay soo saareen hub cusub oo wax gumaada iyo xirfado dagaal, waxayna dadkoodii u diyaariyeen dagaal. |

## Hawl-galka 1.18



1 Faahfaahi sidii waddaniyadu ugu horseeday labadii dagaal wayne ee Dunida ee kala dhacay 1914 iyo 1939kii?

2 Waa maxay gumeystenimadu? Sidee bay Gaashaanbuurtii dhexe gumeysteni madoodii ugu horseeday inuu bilaabmo dagaalkii labaad ee dunida 1939 kii?

## 1.4.3 Dagaalkii koowaad ee Dunida

### I *Isku day su'aalaha*

Waa maxay sababta ay waddamadu midba midka kale uu ula dagaalamayay?

### II *Ereyada furaha u ah casharka*

- *Is-bahaysi*
- *Dhex-dhexaadnimo*
- *Shir-qool*
- *Gumeystenimo*
- *Ciidamayn*

### III *Ujeeddada Akhriskaaga*

*Marka aad akhridid casharkan isku day hadii aad ka jawaab kartid suaalahan soo aocda:*

1. Maxay ahayd sababtii soo dedejisay dagaalkii koowaad ee dunida?
2. Maxay kala ahaayeen labadii xulufo ee ay reer Yurub u kala qaybsameen 1914 kii?

Laga bilaabo 1900 ilaa 1914 kii yurub waxay u muuqatay wax dagaal qarka u saaran. Waxayna u kala qaybsameen laba kooxood oo cadow isu ah. Ingiriska,Faransiiska iyo Ruushku waxay isla ahaayeen hal dhinac waxaana loo yaqaanay saddex-geesoodka ENTENTE. Jarmalka, Talyaaniga iyo Awstariya-Hangeri iyaguna dhinaca kale ee ka soo hor-jeeday ayay ahaayeen ee loo yaqaanay Saddex-geesoodka ISBAHAYSIGA

Sannadkii 1914 kii muranno aad khatar u ah ayaa ka dhex qarxay Awstariya iyo Seerbiya oo ka tirsanaa gobolka Balkaniska loo yaqaano. Tani waxay ahayd sababtii uu nin waddaniyadu madax martay oo reer Seerbiya ahaa u dilay Aark dhiyuuk Ferdiinando Bishii juun 1914 kii.

Awsteriya waxay ku hanjabtay inay qabsan doonto Seerbiya oo ay masuuliyadii shirqoolkana dusha ka saartay, Seerbiyana waxay kaalmo weydiisatay Ruushka si uu u caawiyo, markii ay Awstariya ku dhawaaqday dagaal ka dhan ah Seerbiya,

Ruushkuna wuxuu u soo daadgureeyay kaalmo Seerbiya. Jarmalka oo isbahaysi la lahaa, Awstariya, ayaa ku dhawaaqay dagaal ka dhan ah Ruushka iyo Faransiiska.

Markii uu Jarmalku galay ee uu qabsaday dalka Beljimka oo ahaa dhexdhexaad, ayay lngiriiskuna ku soo biireen la dagaalanka Jarmalka. Sidaas darteed, shirqoolkii lagu dilay Aark dhiyuuk Ferdinaand ayaa noqday sababtii soo dedejisay Dagaalkii koowaad ee dunida

Laga bilaabo 1914 ilaa 1918 kii Yurub intooda badan waxay ku jireen dagaalka. lngiriiska, Faransiiska iyo Ruushka oo isku dhinac ahaa waxay la baxeen magaca isbaahaysiga quwadaha ama saddex-geesoodka Entete. Jarmal ka, Awsteriya-Hangariy iyo Turkiga oo isku dhinac ahaa waxaa loo yaqaanay quwadaha Dhexe.

1915 kii ayuu Talyaanigu ka baxay gaashaan buurtiisii hore ee quwadaha dhexe, wuxuuna ku biiray isbaahaysiga quwadaha. 1917 kii Maraykanka ayaa soo galay dagaalkii isaga oo taageeraya dhinacan lsbahaysiga Entete.

## Natiijooynkii Dagaalkii Koowaad ee Dunida

Aakhirkii dagaalku wuxuu soo af-jarmay 1918 kii waxayna guushu ku raacday waddamadii Isbahaysiga. Qaar ka mid ah natiijooyinkii ka dhashayna waxaa ka mid ahaa:

1 Ku dhawaad 10 milyan oo askar iyo malaayiin shacab ah ayaa ku naf waayay

2 Jarmalku wuxuu ku waayay dalalkii uu gumaysan jiray.

3 Jarmalku Wuxuu ogolaaday inuu bixiyo magdhawgii waxyeeladii soo gaadhay Isbahaysiga

4 Ururkii Jamciyada Leegada ayaa la aasaasay si uu u ilaaliyo Nabada Dunida

# 1.4.4 Dagaalkii Labaad Ee Dunida

### I *Isku day su'aalaha*

Isla falanqeeya waxyaabaha ku saabsam Dagaalkii Labaad ee Dunida ee aad maqasheen, Akhrideen ama aad ka aragteen Telefishanada?

### II *Ereyada furaha u ah casharka*

- *Dhexe*
- *Hilaaca*
- *Is-dhiibid*
- *Is-dil*


## III Ujeeddada Akhriskaaga

*Marka aad akhrido casharkan isku day, hadii aad ka jawaabi kartid su'aalahan:*

1. Waddamadee baa ka tirsanaa gaashaanbuurtii dhexe ee Aksiska?
2. Maxay ahaayeen sababihii ugu waawaynaa ee dhaliyay Dagaalkii labaad ee Dunida?

## Bilowgii Dagaalkii Labaad Ee Dunida

Sannadkii 1937 Naasigii Jarmalka, Faashiistihii Talyaaniga iyo Militarigii Jabaanku waxay samaysteen isbahaysiga la odhan Jiray gaashaan buurtii dhexe ee Rooma-Baarliin-Tokyo. Waadamadii gashaanbuurtani Waxay ku mashquuleen oo ay ka midaysnaayeen ciidamo iyo hub urursi.



Jaantuska 1.21: Hogaamiyihii Jarmalka ee Hitler

Bishii Sibteembar 1[deedii],1939 Hitler (Hogaamiyihii Jarmalka) wuxuu weeraray oo uu galay Boolaand, 3dii Sibteembar lngiriiska iyo Faransiiskuna waxay ku dhawaaqeen dagaal ka dhan ah Jarmalka. Sidaa awgeed Dagaalkii labaad ee Dunida ayaa bilaabmay. Xeeladihii uu Jarmalku adeegsanayay waxaa ka mid ahaa dagaalkii-hilaaca oo ay ku qabsadeen Boolaand todobaadyo yar gudahood. Bilo yar dabadeedna Jarmalku waxay qabsadeen Denmaark, Noorway, Neederlands, Beljimka,Faransiiska iyo Giriiga. Ingriiska oo keliya ayaa ka hadhay oo xor ka ahaa.

Kadib Jarmalku wuxuu isku dayay inuu Bambooyin la dhaco Ingiriiska oo ka talowsanaa Badda isla markaana dagaalku, goobaha uu ka dhacayay ka fogaa taasi waxay keentay inuu Ingiriisku ka soo qaybgalo dagaalka. Markii uu Jarmalku awoodi kari waayay inuu ku guulaysto dagaalkan, wuxuu u leexday ama ku jeestay Ruushka 1941 kii. Ciidamadii Jaemalku waxa ay gudaha u galeen Ruushka, kadib dagaalo aad u ba'an ciidamadii Jarmalku waxay qabsadeen oo ay gaadheen mag-aalada leningaraad oo 90km u jirta Moosko oo ah magaalo

madaxda Ruushka. Laakiin, nasiib darro ciidamadii Jarmalka waxaa ku habsaday oo laayay baraf, maxaa yeelay xilliga ayku soo beegmeen oo ahaa jiilaal uu Barafku dhaco iyaga oo aan ka diyaargaroobin.

Ka qayb qaadashada dagaalka ee dalka Maraykanku waxay ka dambaysay markii uu Jabaanku weeraray saldhigyadii Maraykanka ee Biiral Haarbal ee ku taallay Haawaay. Tani waxay ku qasabtay inuu Maraykanku soo galo dagaalka. Kuna dhawaaqo dagaal ka dhan ah gaashaan buurta dhexe waddamadii ka tirsanaa.

## Jabkii Gaashaan buurtii Dhexe

- ***Jabki Talyaaniga:*** *Ciidamadii maraykanka iyo Ingriiska ayaa weerar ku qaaday baabi'iyayna ciidamadii Jarmalka iyo Talyaaniga ee fadhigoodu ahaa waqooyiga Afrika. Kadibna xoogagii isbahaysigu waxay weerareen Talyaaniga oo ay ku qasbeen in uu 1943 dii iskaga baxo dagaalka.*
- ***Is-dhiibidii Jarmalka:*** *Xoogagii Ingiriiska iyo Maraykanka ayaa Jarmalka ka weeraray dhinaca galbeed, Ruushkuna dhinaca Bari. Bishii Abril 1945 kiina ciidamadii Ruushka ayaa qabsaday Baarliin oo ah magaalo madaxdu Jarmalka kadibna Hitler wuu is-dilay maalmo yar dabadeedna Jarmalkii wuu Is-dhiibay.*
- ***Is-dhiibidii Jabaanka:*** *Bishii Agoosto 1945 kii Maraykanku waxay ku duqeeyeen Atoomik Bambkii ugu horeeyay magaalooyin. ku yaalla dalka Jabaan oo kala ahaa: Hirooshiima iyo Nagaa saaki*
- ***Hirooshiima:*** *oo si cad u baaba'day maalmo yar dabadeedna Atoomik Bambkii Labaad ayaa lagu duqeeyay magaaladii kale ee Jabaanka ee Nagasaaki. Waxaana Jabaanka lagu qasbay inuu is dhiibo sannadkii 1945 kiina waxaa soo af-jarmay Dagaalkii Labaad ee Dunida guushuna ku raacday waddamadii isbahaysiga.*

## Qaar ka mid ah natiijooyinkii Dagaalkii Labaad ee Dunida

1. Dagaalka waxaa ku dhintay dad kor u dhaafaya 22 Malyan oo qof waxaana ku dhaawacmay 34 milyan oo qof
2. Waxaa soo if baxay quwado waawayn oo hor leh oo kala ah: Maraykanka iyo Ruushka.
3. Waxaa la sameeyay urur cusub oo caalami ah oo la yidhaahdo ururka Qaramada Midoobay oo ilaaliya Nabada Dunida.



## Hawl-galka 1.19

1 Magacaw laba natiijo oo ka mid ahaa Dagaalkii koowaad ee dunida?

2 Magacaw labadii urur caalami ee la Aasaasay dhamaadki dagaalkii koowaad iyo kii labaad ee dunida? Maxay ahaayeen ujeedooyinkoodu?

## 1.4.5 Iska –caabinti ay Afrikaanku kaga soo horjeesteen is balaadhintii Gumaystayaasha

### I *Isku dey su'aalaha*

***Ma maqashay dagaalkii Cadwa? Sheeg waxa aad ka taqaanid dagaalkan?***

### II *Ereyada furaha u ah casharka*

- *La wareegid*
- *Gumeysi*
- *Iska-caabin*
- *Jebin (Baabiin)*

### III *Ujeeddada Akhriskaaga*

*Marka aad akhrido casharkan isku dey, hadii aad ka jawaabi kartid su'aalahan:*

1 Maxay ahayd sababihii ay quwadihii reer Yurub u doonayeen inay Afrika ka dhigtaan dalal ay gumaystaan?

2 Maxay ahayd hawlgalkii ay dadyowga Afrikaanka ahi kaga Jawaabeen is balaadhintii gumeystayaashii reer Yurub?




**Jaantuska 1.22: Afirka Sannadkii 1914**

Kacaankii warshaduhu wuxuu kordhiyay hantidii iyo quwaddii qaramadii reer yurub. waxuuna sidoo kale u horseeday inay u baahdaan Alaabta cayrin ee ay

warshduhu u baahan yihiin iyo suuqyada loo iib gaynayo badeecadaha ay soo saaraan warshaduhu. Baahida alaabta ceyrin iyo suuqyadu waa ta u horseeday inay qaramadii reer Yurub qabsadaan dhulkii qaaradaha Afrika iyo Aasiya

sidaa awgeed 1914 kii marka laga reebo labada dal ee Itoobiya iyo laybeeriya, dhamaan dalalkii Afrika waxay ku hoos jireen xukunkii gumeysteyaasha reer yurub. Waxayna dadyawgii Afrikaanka ahaa xukunkii reer yurub kaga soo horjeesteen dagaal iska caabin ah in kasta oo ay aad diciif u ahaayeen inay iska caabiyaan waddamada gumeysteyaasha oo awoodoodu aad u badnayd.

Qaar kamid ah kuwa tusaale loo soo qaadan karo iska caabintii Afrika ay kaga soo horjeesteen gumaystayaasha waxaa ka mid ahaa:

***Kacdoonkii Ashaantiga:*** Qarnigii 19$^{aad}$ ayaa Boqortooyadii Ashaantiga uu xoogeedii aad u koray, dhulka maanta loo yaqaano Gaana, sannadkii 1874 kii dadyawgii Ashaantiga oo uu hogaaminayay boqor-koodii Birimfi (premphe) bilaabeen la halgankoodii ay kaga soo horjeedeen isbalaadhintii gumaystihii Ingiriiska. Dagaalo badan oo isdaba joog ahaa kadib Ingiriisku waxay qabsadeen Boqortooyadii Ashaantiga sannadkii 1869, sannadkii 1900 kii ayay Ashaantigii mar kale soo laba kacleeyay ka soo horjeedkoodii Ingiriisku. Laakiin hadana mar kale ayaa laga adkaaday. sannadkii 1901 dii Ashaantigii waxay ka mid noqdeen dalalkii uu gumaysanayay Ingiriisku ee Xeebta Dahabka kacdoonkii Samoori Tuure:-is –balaadhintii gumeystihii Faransiiska ee galbeedka Afrika wuxuu kala kulmay iska caabin xoogan oo uu hogaaminayay samoori Tuure. Samoore wuxuu mucaaraday damacii uu Faransiisku ku doonayay inuu Galbeedka Afrika ka dhiso Imbiraadooriyad. lsaga oo ugu horaynba la dagaalamay Faransiiska sannadkii 1883 kii markii ay degeen Bamaako (caasimada maanta ee dalka Maali) ee qarka wabiga Nayjar. isaga oo sii watay kacdoonkiisii uu kaga soo horjeeday Faransiiska ilaa iyo intii uu gacanta ku dhigaayay Faransiisku sannadku 1898 kii

***Dhaqdhaqaaqii Maji-maji:*** waxay ahaayeen dhaqdhaqaaqyadii wadaniyadeed ee lagaga soo horjeestay Maamulkii Jarmalka ee Afrikada Bari (Taansaaniyada maanta) 1905 ilaa 1907 dii. Mucaarididii siyaasadihii gumaysiga Jarmalka ee dhibka badnaa, dagaalyahamadii dhaqdhaqaaqii Maji-maji waxay weeraro ku qaadeen dhamaan Ajanabigii iyadaa oo Jarmalku laf ahaantiisuna isu diyaariyay dagaalo badan oo ay dhaqdhaqaaqu ku qaadeen sida: dagaalkii daawada, biyihii Sixirka lahaa ee loo yaqaanay maji-maji, kaas oo ahaa ka loogu Magacdaray dhaqdhaqaaqa. Dhaqdhaqaaqii halkii bay kasii wadeen halgankoodii tan iyo intii uu Jarmalku sida waxashnimada leh Cagta u mariyay dhaqdhaqaaqii Maji-maji sannadkii 1907 dii.

## *Cadwa:* Guushii Waynayd ee Kacdoonkii Lagaga Adkaaday Gumaystaha

Qarnigii 19aad Talyaanigu wuxuu go'aansaday inuu gumeysto dalka Itoobiya Itoobiya waxay si lamid ah go'aansatay inay iska difaacdo ilaashadaana xornimadooda ama madax bannaanidooda.Waxaana hogaaminayay Minilik II ,Itoobiyaanku waxay ka adkaadeen oo ay cagta mariyeen ciidamadii gumeystihii Talyaaniga sannadkii 1896 kii, dagaalkii ka dhacay goobta la yidhaahdo cadwa. Hadaba Guushii cadwa waxay ahayd minaaradii ay dalalkii Afrikaanka ahaa ku dhiiradeen Tusaale: Halgankii Daraawiishta ee uu hogaaminayay Sayid Maxamed Cabdile xasan ee 1896ki ilaa 1922kii ee uu kaga soo horjeeday gumaystayaashii ingiriiska iyo Talyaaniga. Sidaa darteed waxaa la odhan karaa Halgankii Sayid Maxamed Cabdile xasan wuxuu ahaa midhihii ka dhashay Guushii cadwa.



**Hawl-galka 1.20**

1 Khariirada korkeeda ka tilmaan dalalkii Afrikaanka ahaa ee ay kala gumaysanayeen Faransiiska iyo Ingiriisku?

2 Maxay ahayd sababtii ay Cadwa u guulaysteen kacdoonkii ay Itoobiyaanku kaga soo horjeesteen gumeystaha? isla falanqeeya Idinka oo koox-koox ah.

## 1.4.6 Halgankii ay Afrikaanku kaga soo horjeesteen Xukunkii Gumeystayaasha

### I *Isku dey su'aalaha: dal kalee*

***Bal qiyaas ama mallee inuu dalkaagu ku hoos jiro cid kale oo ku qabsaday. Maxaad samayn lahayd si aad dalkaaga uga xorayso?***

### II *Ereyada furaha ah casharka*

- *Xisbi Siyaasadeed*
- *Midab-takoor*

### III *Ujeeddada Akhriskaaga*

*Markaad akhrido casharkan, isku day hadii aad ka jawaabi kartid su'aalahan soosocda:*

1 Maxay ahayd sababtii ay Afrikaanku u samaysteen Xisbiyada siyaasadeed Mudadii lagu jiray gumaysiga?

2 Maxay ahayd sababtii ay hogaamiyeyaashii cadaanka ahaa ee Koonfurta Afrika u qabatimeen siyaasadii Midab-takoorka Madowga iyo Cadaanka?

Intii u dhaxaysay labadii dagaal wayne ee dunida dhexdoodii, Afrika waxay gashay halgan ay kaga soo horjeedo xukunkii gumaysteyaasha oo la soo baxay siyaasad cusub. Dhalintii wax baratay ee Afrikaanka ahayd waxay ku taamayeen Hogaamiyenimada dhaqdhaqaaqa iska caabineed. waxay samaysteen xisbiyo siyaasadeed oo ka shaqeeya sidii looga xoroobi lahaa reer yurub. Qaar ka mid ah xisbiyadii la sameeyay xilliga waa:

- ***Xiriirkii Dhalinyarada kikuuyada:*** *oo soo if baxay 1921 kii Kikuuyada Kiiniya dhexdeeda.*
- ***Xisbigii Dimoqraadiga Qaranka:*** *oo la sameeyay 1922 kii ee dalka Nayjeeriya.*
- ***Dalka Tuunisiya xisbigii Dastuurka Cusub*** *(Neo-Dastour party ) ayaa laga aasaasay oo uu hogaaminayay xabiib Burqiiba oo Faransiiska ku soo bartay Culuunta sharciga, Burqiibo xataa wuxuu hogaamiye ka noqday Tuniisiya Markii ay xorowday.*
- ***Xisbigii Wafdi:*** *wuxuu ahaa xisbi siyaasadeed oo ay aasaaseen dhalinyaradii waddaniyiinta ahayd ee Masaarida waxayna ahayd ujeeddadoodu. inay habeeyaan iskuna dubaridaan halgankii ay Masaaridu kaga soo hor-jeedeen Maamulkii lngiriiska*

## Golaha Qaranka Afrikaanka (ANC)

Sannadkii 1910 kii koonfurta Afrika waxaay ku guulaysatay inay lngiriiska ka qaadato madax bannaanideedii. laakiin Madax bannaanidii Cusbayd ee dalka Koonfurta Afrika, wuxuu ahaa mid taladii xukunku ay gacanta u gashay caddaankii tirada yaraa ee deganaa waddanka Caddaanku waa kuwo tiro yar oo degan waddanka koonfurta Afrika, laakiinse xukuma ayay dadka ugu badan wadanka oo ah dadka madow. Dawladii caddaanka ahayd ee Koonfur Afrika waxay ku dhaqmi jirtay siyaasad xun oo ku dhisan midab kala sooc ee loo yaqaano midab takoor. Dadyawga jinsiyadaha kala duwan kuma noolaan karayn meelo isku mid ah, dugsiyo isku mid ah ama makhaayado isku mid ah. Caddaanku waxay u qabatimeen siyaasadan si ay u xaqiijiyaan awoodooda siyaasadeed iyo dhaqaale ee ku soo haray gacmahooda. Kani wuxuu horumariyay una horseeday soo ifbixii Golaha Qaranka ee Afrikaanka (African National Congress) ee marka la soo gaabiyo loo yaqaanay (ANC) kaas oo hogaaminayay Halgankii dadka madow ee Afrikaanku kaga soo horjeedeen nidaam-kii midab-takoorka ahaa. Nidaamkani ugu dambayn wuxuu soo gabageboobay markii uu Nelson maandeela uu qabtay talada dalka sanadihii 1990'meeyadii.



## Hawl-galka 1.21

1 Isla falanqeeya idinka oo koox-koox ah kacdoonkii Afrikaanka ee intii u dhex-aysa labadii dagaal wayne ee dunida ? waxyaalihii cusbaa ee ka muuqday dhaqdhaqaaqyadii iska caabineed ee intii lagu jiray xilliyadan?

2 Maxay ahayd sababtii ay dadkii madowga ahaa ee koonfurta Afrika u samaysteen ururkii (ANC)? kumuuse ahaa hogaamiyihii ugu caansanaa ururka(ANC) ?

# GUNAANADKA CUTUBKA

- Waxaa jira Todoba qaaradood iyo Afar bad-wayn,
- Qaarada Aasiya waa ta ugu wayn halka ay qaarada Awstareeliya tahay mida ugu yar,
- 70% ka mid ah dhulka oogadiisa waxaa ku daboolan biyo iyo saddex meelood hal meel oo beri ah,
- Dadyawga dunidu waxay ku hadlaan luuqado kala duwan waxaana ugu caansanaa: Shiinaha, Carabiga Hindiga Ingiriiska,
- Dadyawgii hore sida masaaridii, Roomaankii, Giriigii, Shiinaha Beershiyaankii, Indiyaankii Ameerika iyo ilbaxnimooyinkoodii hore.
- Baahsanaanta dadwaynaha dunidu ma aha mid isku-dheelitiran, xaalado kala duwan awgeed.
- Deganaanshaha dadka ee dhul-goboleedyada kulaalayaasha, kul-dhexaadka iyo qaboobaha isku mid ma wada aha dhinacyada ka midka ah shaqaale iyo darajada ama heerka Horumarka. Gabolka kul-dhexaa-dka ayaana ah ka ugu horumarka badan saddexda dhul-goboleed,
- Dadyawga dunidu waxay ku dhaqmaan noocyo kala duwan oo diimo ah. kuwa ugu caansanna waxaa ka mid ah:- Kiristaanka Islaamka, yuhuuda, Hinduusamka, Buudhiisamka, konfiyuushiyaaniisamka, Taawiisiimka iyo Shintooga,
- Kacaankii warshaduhu wuxuu Kiiniya faaiidooyim badan, laakiin sidoo kale wuxuu yeeshay,saamayn dhinaca Taban (Xun) sida:- dad nolol hoose ku nool, caruur lagu shaqaysto, shaqola'aan iyo Gumeysinimo,
- Halgankii ay Afrikaanku kaga soo hor jeesteen gumaystayaashii reer yurub waxay lahaayeen marxalahooda iyo Hababkooda u gaarka ahaa.

# LAYLISKA GUUD EE CUTUBKA

## I *Sheeg Haddii ay weedhu tahay Run ama Been*

1 Baaxada dhuleed ee ay Afrika ku fadhido waa 17%
2 Suudaan iyo Masar waa labada dal'ee faa iidada ugu wayn ku qaba webiga Niil.
3 Sherbaas waa dadyawga ku nool waqooyiga Bari ee Afgaanistaan.
4 Fircoon wuxuu ahaa hogaamiyihii Masaaridii hore
5 Roomaanku waxay ahaayeen dadkii ugu horeeyay ee sameeya Jamhuuriyad.

## II *Isku-aadi (isku-aadi Joog-taxyada "B" iyo "T")*

| Joog-taxa "B" | | Joog-taxa "T" | |
|---|---|---|---|
| 1 | Laatiinka | B | Qabiiladii Talyaaniga ee helay Rooma |
| 2 | Boqor Sayras | T | Xeeladihii dagaal ee uu Jarmalku adeegsan ayay |
| 3 | Ilbaxnimadii Maaya | J | Maamulka ay dadku iska leeyihiin |
| 4 | Ilbaxnimadii lnkaas | X | Maamulka uu hal qof leeyahay |
| 5 | Kooxo jinsiyeed dad ah | KH | Aas'aasihii Imbiraadooriyadii Beershiya |
| 6 | Mumbay | D | Aasaasay Imbiraadooriyadii ugu waynayd ee Carabta |
| 7 | Thomas Newcome | R | Ilbaxnlmadii hore Ameerikaan Indiyaanka ee dalka Beeru (peru) |
| 8 | Dimuqraadiyad | S | Ilbaxnimadii hore ee Amerikaan Indiyaankii ee koonfurta Meksiko |
| 9 | Keli talisnimo | SH | Dadyaw dib-udhacsan oo qaxa oo dega xeebaha Greenland. |
| 10 | Dagaalka-hilaaca | DH | Dadyaw dib dhacsan oo dega Finlaand |
| | | C | Magaalo ku taal Galbeed ka Hindiya |
| | | G | Magaalo ku taalla koonfurta Giriiga |
| | | F | Soosaaristii Daynamada |
| | | Q | Soo saaridii mishiinka uumiga |

## III *Buuxi meelaha bannaan*

1 ____________ waa dhul-goboleedka ugu horumarsan dunida oo dhan.

2 ____________, ____________ iyo ____________ waa diimaha saamaynta ugu wayn ku yeeshay dhaqanka reer galbeedka.

3 Baahida ____________, ____________ iyo ____________ waa ta u horseeday reer yurub inay ku dhaqmaan Gumaysiga iyo Gumeystenimada .

4 Siyaasada isbahaysi macnaheedu waa jiritaanka nidaamka ____________.

5 Sababtii soo dedejisay qaraxii dagaalkii koowaad ee dunidu waxay ahayd ____________.

## IV *Ka dooro jawaabta saxda ah*

1 Dagaalkii labaad ee dunidu wuxuu bilaabmay markii uu Jarmalku qabsaday

B Beljimka
J Boolaand
T Giriiga
X Faransiiska

2 Waddanka keliya ee Galbeedka Yurub ee uuna Hitler qabsanin wuxuu ahaa

B Faransiiska
J Ruushka
T Giriiga
X Ingiriiska

3 Kuwan soo socda tee baa ahayd kacdoonkii gumaysi-diidka ahaa ee Gaana (Xeebta Dahabka)

B Kacdoonkii Ashaanti
J Dhaqdhaqaaqii maji-maji
T Samoori
X Fallaaxiintii

4 Xabiib Burqiiba Xisbigiisii waxaa loo yaqaanay

B Xiriirka Kikuuyada
J Wadaad
T Xisbiga Dastuurka cusub
X Wafdi

5 kuwan soo socda mid keebaan ka mid ahayn kooxdii Entente

B Ingiriiska
J Awstariya Hangari
T Faransiiska
X Ruushka

6 kacaankii warshaduhu wuxuu ugu horayn ka bilaabmay

B Jarmalka
J Maraykanka
T Shiinaha
X Ingiriiska

## V *Ka bixi Jawaabo Kooban*

1 Maxay ahayd sababtii uu kacaankii warshaduhu uga bilaabmay Ingiriiska ee aanu uga bilaabmin waddamada kale ee Yurub?

2 Soo koob arimaha duleed ee saamaynta ku leh Baahsanaanta dadka?

3 Sharax qaar ka mid ah guulihii ilbaxnimooyinkii hore ee dooxooyinka webiyada?

4 Sharax watarka webiyada?

# CUTUBKA 2

# XOOGAGA WAX KA BADALA DHULKA OOGADIISA SARE



## Ujeeddooyinka Cutubka

***Marka uu cutubkani dhamaado ardaydu waxa ay awoodi doonaan inay:***

- qeexaan xoogaga gudaha ee wax ka bedela (saamaynta ku leh) oogada sare ee dhulka,
- Caddeeyaan ama muujiyaan saamaynta xoogaga guduhu ku leeyihiin oogada sare ee dhulka iyo nolosha aadmigaba,
- Sharaxaan xoogaga dibada ama dusha sare ee oogada dhulka
- Garwaaqsadaan saamaynta caroguurka iyo bacaadsaarka ku leeyihiin oogada dhulka,
- Qeexaan cabbir qiyaaseedka,
- magacaabaan Hababka/Jidadka kala duwan ee lagu sharxo qiyaas cabbirka,
- Raadinta fogaanta iyo Bedka aan qaablaawaha ahayn ee khariira daha.

## Tusmada ugu muhiimsan

**2.1** XOOGAGA GUDAHA IYO SAAMAYNTOODA NOLOSHA AADMIGA

**2.2** XOOGAGA DUSHA IYO SAAMAYNTOODA NOLOSHA AADMIGA

**2.3** CABBIRAADA FOGAANTA IYO BEDKA KHARIIRADAHA KORKOODA

- *Gunaanadka Cutubka*
- *Layliska Guud ee Cutubka*

## Ereyada Furaha u ah casharka

- Dhulgariir
- Foolkaan
- Dildilaac
- Folkaane firfircoon
- Cabudh (Giigsan )
- Dooxada wayn ee RIfti
- Foolkaanaha Firfircoon
- Folkaanaha fadhiidka
- Laablaabka
- Quwadaha Gudaha
- Folkaanaha Suulay
- Cadaadis
- Cabirka Riktarka
- Meertada Dabka

# 2.1 XOOGAGA GUDAHA IYO SAAMAYN-TOODA NOLOSHA AADAMIGA

***Markii uu casharkani dhamaado waa inay ardaydu awoodi karkaan inay:***

- Sharaxaan quuladaha gudaha ee waxka badalaya oogadasare ee dhulka,
- Caddeeyaan ama muujiyaan saamaynta quwadaha gudaha dhulku ku yeeshaan oogada sare ee duhlka iyo` Nolosha aad migaba,
- Caddeeyaan ama muujiyaan saamaynta qwadaha gudaha dhulka ku yeeshaan oogada sare ee dhulka iyo Nolosha Aadmigaba.

## Isku dey su'aalaha:

1 Mataqaanaa inay dadyawgii hore ay ahaalyeen kuwo caabuda dhulgarur ka iyo oo qaraxa folkaanaha? sannado yar ookeliya kadib in aadinigu Aqoon u yeeshay sirta waxyaabaha dabiiciga ah ee noocan ah?

2 Mau fiirsateen saamaynta masiib ooyinkan dabiiciga ah qaybaha kala duulan ee saan Telefishanka ama aad dhegaysanaysaan Raadlyaha

## Ujeeddada Akhriskaaga

*Markii aad akhrido casharka, isku day inaad ka jawaabi kartid suaalahan soo socda:*

1 Sidee bay cabudhka (Giigsanaanta) iyo cadaadisku u sababaan xoogaga gudaha ee ka dhacaya dhulka lakabkiisa sare?

2 Xoogaga gudaha iyo quwadaha dibada ama dusha sare midkee baa ka ahmiyad badan wakhtigan xaadirka ah qaabka samayska beriga dhulka oogadiisa sare?

Quwadaha guduhu waxay ka yimaadaan gudaha dhulka. Qaarkood waa kuwo kale oo si dhaqso leh uga dhacay in ka badan Malaayiin sanno. Quwadahani waa kuwa sameeya muqaalada kala duwan ee ugu waawayn berriga sida:- Buuralayda, Dooxooyinka oogooyinka sare ee siman, Bannaanada 1.W.M waxaynu baari ama hubin doonaa sida ay Afarta dhacdo ee ugu waawayni uga dul dhacaan lakabka sare ee dhulka. waxayna kala yihiin:- Dhul-gariirka, Foolkaanaha, Laalaabka iyo Dil-dilaaca.

## 2.1.1 Dhul-gariirka

***Abidkaa Ma ku soo maray argagaxa dhul-gariirku? Miyaanad ka Maqlin ama daawanin Telefishinka saamayntooda? Maxaa ku dhacay waxyaabaha ku xeernaa?***

Dhul-gariirku waa ruxasho kedis ah oo ku timaada dhulka oogadiisa sare. Dhulgariirku wuxuu ka dhacaa xuduudaha dulaha dhaadheer. Markii uu dhul gariirku dhacayo, laga bilaabo xudunta gariirku wuxuu u faafaa qaab hirar ama mawjado ah dhamaan jihooyinka. wuxuuna sidii dhagax oo kale usoo tuuraa oogada biyaha kaas oo samaynaya hirar wareegsan oo is daba taxan.

### Sheeko gaaban

#### Dhul-gariirkii Kobe

Bishii Janaayo 17 keedii 1995kii dhul-gariir laxaadkiisu dhan yahay 7.5 qiyaasta Riktarka ayaa ku dhuftay Bartamaha dalka Jabaanka, agagaarka magaalada kobe, daqiiqado yar gudahood dhulgariirku wuxuu sababay dhul go noqday taagag in ka badan 6,400 qof ayaa ku dhimatay 250,000 kalena waxay noqdeen hoy la'aan. Qiyaastii 95,000 dhismayaal iyo guryo isugu jirana way ku dumeen (burbureen). Dhul-gariikii kobe wuxuu sidoo kale sababay dhaawac aad u wayn oo gaaray waddooyinkii waawaynaa iyo adeegyadii kala ee kobe iyo gobolkii ku xeernaaba. Dhaawaca waxaa lagu qiyaasay 120 Bilyan oo doolar. sawirkan soo socda wuxuu ku tusayaa qiyaastii 500 Mitir oo marin (Jid) wayn oo dumay dhinacyadiisii.



Dalka Jabaanku wuxuu ku yaallaa gobol aad iyo aad ay ka jirto degenaansho la, aan dhinaca Jiiyoolaji, ahaaned (xaga Samayska dhulka la xiriira) meeshaas oo Afarta dulood ee lisanku ku dhacay laga helo sida Dulaha Baasifiga, Dulaha yuurayshiya, Dulaha Waqooyiga Ameerika, iyo Dulaha Filibiin oo wadajir ah. Markii ay duluhu is riixaan iyadoo midba midka kale ka soo horjeedo, waxay sababaan falal dhul gariiro iyo qaraxyo foolkaane ka mid yihiin. Dhul-gariirada badankoodu waa kuwo ruxasho gaaban,. Sannadaha qaarkood si kastaba ha ahaatee, waxaa dhaca dhul gariiro isdaba joog ah. Dhul griirkii kobe ee 1995 kii wuxuu ka mid ahaa qiyaastii 1500 dhul-gariir oo garaacay ama ruxay sannadkaas dunida.

Qarniyadii hore ee la soo maray Jabaanku waxay horumariyeen guryaha oo ay si la yaab leh u dhiseen, si ay isaga caabiyaan dhulgariirka. kuwa ugu caansan Jabaanka waa guryo dhaqameedyada taariikhiga ah, oo ah midka ka samaysan alwaaxa ee qaab-dhismeedka xoogan leh. khatarta dhul gariirkana u adkaysankara waxay dhismahooda bilaabeen, si loo yareeyo khatarta sanadihii 1890 aadkii.

Inkasta oo xirfadaha dhismaha dhawr ka mid ah ay hadda ka jiraan dhisamyaal dhulgariirku aanuu ka soo gudbi Karin, dhismayaasha noocan ahi ma aha kuwo si balaadhan loo isticmaali karo. Dhismeyaal badan oo shub laga dhigay oo waxaa jira fooqaq dhaadheer ah. Injineerada (Muhandisiinta) iyo Culimada ku takhasustay dhulgariirku waxay si wada jir ah u qorsheeyaan dhismaha ka hor si aanuu u dumin xiliga uu dhacayo dhulgarirku, Waxayna ku xoojiyeen qalab uu dhismuhu isu taagi karo isla markii uu dhulgariirku yimaadana samaynaya dhaqdhaqaaq la mid ah.

Dhanka kalena, Koritaanka degdega ah ee tirada dadka magaalooyinka Jabaanka Dawlada Jabaanku waxay si joogto ah u dejisaa qorsheyaal u diyaar-garow. Dhinaca waxbarashada ee la xidhiidha dhulgariirka oo ah mid ahmiyad wayn ugu fadhida, islamarkaana ka caawinaysa sidii loo yarayn lahaa dhimashada iyo

dhaawaca uu sababayo dhul-gariirku. Dadkuna sidoo kale, waxay dhinacooda ka qaataan talaabooyin ay kaga hortagayaan iyaga oo ku sugan guryahooda iyo xafiisyada ay ka shaqeeyanba, si khatarta ama waxyeelada dhul-gariirka loo yareeyana dhamaan dadku waxay heegan u ahaanayaan sidii ay ubadka ama caruurta yaryar gacanta ugu hayn lahaayeen.

Burburka ka dhasha dhulgariirka waxyaabaha sababa waxay ku xidhan yihiin: Dhul-gariirka laxaadkiisa ama xaddiga ruxitaan ee halkaas ka dhacay inta uu le;eg yahay iyo dejinta qorshaha u diyaar-garow ee loogu tala galay ka hortaga masiibada dhul gariirka iyo qalabka loo adeegsaday xaga dhismaha. Dhul gariirku marka uu ku habsado meel, laxaadkiisa ama ruxashadiisu waa mid kala duwan isla meeshaas, maxaa yeelay waxaad arkaysaa goobo ruxashadu aad u yar tahay iyo goobo uu si wayn u ruxay oo laga dareemi karo meelo kumanaan kiiloo mitir u jirta.

Shantii Boqol ee sanno ee ugu dambaysay malaayiin dad ah ayaa ku dhimatay dhul gariiradii ka kala dhacay dacalada dunidan aynu ku noolahay. Hirarka ama mowjadaha dhul gariirku waxay sababaan inay dumaan dhismayaasha waawayni. Ruxitaanku sidoo kale waa quwadaha waawayn ee dhulka iyo cufafka dhagxaanta ama dhadhaabaha dibada u soo saara ee ay ka samaysmaan dhul go, taagag iyo buuro soo foorara.


Markii ay dhul gariiradu ka dhacaan baddaha waawayn hoostooda, hirarka waawayn ee badda ee ka samaysma ayaa loo yaqaanaa Sunaami, kuwaas oo ka samaysma xeebaha dhaadheer agagaarkooda waxayna xaadhaan waxyaabaha agaagaarka xeebaha laga helo nool iyo moodba waxayna sababaan ama dhaliyaan masiibooyinka daadadka iyo fatahaadaha halista ah ee dadka u geysta dhimashada iyo baabiinta hantidoodaba. Tusaale ahaan, Sunaami asalkeedu wuxuu ka soo jeedaa dhulgariirkii ay xuduntiisu (barta uu ka bilowday) ahayd meel u dhow Jasiirada Sumaatra ee dalka Indooniishiya Sannadkii 2007 taas oo saamaysay Toban waddan oo kale oo ku yaalla agagaaraha Badwaynta Hindiya. Waxaana ku dhimatay dad lagu qiyaasay 200 000 oo qof, khasaare aad u waynа u gaysatay hanti aad u balaadhan.

Dhulgariirada waxaa kale oo ka dhasha cuduro halis ah. Tusaale ahaan; waxay waxyeelo u geystaan Marinada biyihii ay dadku cabayeen, biyihii oo sumooba iyo adeegyadii caafimaadka sida: Cusbataaladii oo xataa dhismahoodii la waayo.

Sannad kasta waxaa dhaca boqolaal dhul gariir oo ka dhaca dacalada dunida, hase yeeshee aadamaha waxaa ka fakan (baxsan) kara in yar oo ka mid ah, kuwaasoo intooda badani ay samaysteen aalad ama qalab lagu ogaado dhul gariirka.

Dhul-gariirku wuxuu ka dhici karaa meel kasta oo dunida guudkeeda ah si kasta ha ahaatee, waxaa jira meelo uu dhul-gariirku caam yahay. Saddexda suun ee ugu waawayn waxa ka mid ah.

- *Agagaaraha xeebaha Badwaynta Baasifiga*
- *Bartamaha Badwaynta Atlaantika oo dhereran waqooyiga ilaa koonfurta*
- *Midka ka gudba qaaradaha Yurub iyo Aasiya laga bilaabo xeebaha galbeed ilaa xeebta bari Fiiri khariiradan hoose*




**Jaantuska 2.1: Baahsanaanta dhul-gariirada dunida**

Laxaadka dhul-gariirada waxaa lagu cabbiraa qiyaasta Riktarka. Ayada oo loo eegayo qiyaasta "0" waa ka ugu hooseeya iyo (12) oo ah ka ugu sareeya, Dhulgariirka lagu qiyaasay 9.0 wuxuu ahaa midkii dhacay sannadkii 2004 tii, meel u dhaw Jasiirada Sumaatra. waxayna sababtay Sunaami saamaysay 12 waddan ilaa xad Bariga Afrika, dishayna 225,000 qof shaxdan soo socota wuxuu ku tusayaa qaar ka mid ah dhulgariiradii ugu waawaynaa iyo xogta tiradii ku dhimatay laga soo bilaabo 1900.

**Shaxda 2.1: Dhul-gariirada ugu waawayn iyo xogta tirada dhimashada ee laga soo bilaabo 1900**

| Sannadkii | Meesha(Goobta) | Laxaadka Q.R | Tirada Dhimashada |
|---|---|---|---|
| 1906 | Faalbareeso (Jili) | 8.6 | 20.000 |
| 1920 | Qingzha (Shiinaha) | 8.6 | 200,000 |
| 1923 | Yokohaama (Jabaan) | 8.3 | 143,000 |
| 1927 | QIngzha (Shiinaha) | 8.3 | 200,000 |
| 1976 | Tangshan (Shiinaha ) | 8.0 | 255,000 |
| 1988 | Isbitaag (Armeeniya) | 7.0 | 55.000 |
| 1990 | Galbeedka Iiraan | 7.7 | 50.000 |
| 2001 | Galbeedka Hindiya | 7.9 | 30.000 |
| 2003 | Koonfur Bari Iiraan | 6.5 | 41.000 |
| 2009 | Bort aw prince (Hayti) | 7.0 | 300.000 |

waxaa jira kala duwanaansho waxyeelada dhul gariirada ka dhacaya meelaha miyiga iyo magaalooyinka ah.

Markii ay argagaxyadaasi ku habsadaan meelaha ay dadku isku cufan yihiin ee magaalooyinka iyo caasimadaha dhaawaca ama khasaaruhu si aad ah ayuu u saraynayaa. Laba ka mid ah dhul-gariirada ayaa ka dhacay Itoobiya dabayaaqadii qarnigii 20$^{aad}$ meel u dhaw Harada shaala (1960) iyo karakore (1961).

Dhul-gariirada lama hor istaagi karo, Laakiin dhaawacyada ay sababi karaan baa si wayn loo yarayn karaa Dhismayaal loo qorsheeyay loona dhisay badbaado ahaan, gaar ahaan meelaha miyiga, waa la xadidi karaa dhimashada hoosna loo dhigi karaa khasaaraha ay sababeen dhulgariiraddu.



**Hawl-galka 2.1**

1 Sharax saamaynta (khasaaraha nolosha aadmiga iyo Hantida) ee aad waayahan dambe ka akhrisatay joornaalada, ka maqashay Raadyaha ama ka daawatay Telefishinada ee dhul gariirka?

2 Adiga oo adeegsanay khariidadaha, Atlasyada tilmaan halka ay dhacaan goobaha shaxda sare lagu xusay?

3 Isla falanqeeya adiga iyo ardayda saaxiibadaa ah sida ay dadku gaar ahaan meelaha magaalooyinka ahi tahay inay isu diyaariyaan inta aanuu dhicin dhul gariirku.


## 2.1.2 Foolkaaneyaasha

Foolkaanuhu waa dhagax dab ah oo ka yimada lakabyada hoose ee dhulka halkaas oo uu ka soo firdhismo dhagaxa dhalaalay, dambas iyo gaasas hawooyin ah (Naqasyo). Dhagaxa dhalaalay waxaa loo yaqaanaa Maagma, Maagmuhu wuxuu ka yimaadaa gudaha hoose ee dhulka markii uu dhagaxa dhalaalay soo gaadho dhulka oogadiisa ayaa loo yaqaanaa laafa (dab-holac). Markii uu dab-holacu u soobaxayo oogada sare ee dhulka waa holac cas oo heerkulkiisu uu gaadho 1200$^{o}$C. Marmarka qaarkood waxaa jirta uu dab-hollacu (lava) uu ka adkaan badan yahay sameeyana dhadhaab shiileedka ama dhagaxa danabka leh.

Qaraxyada foolkaanuhu mar marka qaarkood waa degan (xasiloon) yihiin laakiin mararka kale aad bay u sawaxan ama shanqadh wayn yihiin maagmaha aadka u socodka yari wuxuu ku soo baxaa sida webi dab ah.

Dhagaxaanta, (dhadhaabaha) siigada dambaska, uumiga iyo gaasaska kale ee kulul sidoo kale way qarxi karaan oo foolkaane ayay noqon karaan xawaaraha dab hollacu ama laafuhu kaas oo qulqulkiisu ku xidhan yahay cadadka ama xadiga laafaha, isku jirada kiimikaad iyo qaabka wadadiisa.

Janjeerka taagaga laafuhu wuxuu u qulquli karaa isaga oo jaraya xawaare dhan 50 kii km'ba hal saac.





Jaantuska 2.2: qarax foolkaane

Maagmaha qaraxa ku yimid oogada sare ee dhulka ayaa loo yaqaanaa dab-holac (laafa). Laafuhuna markii uu qaboobo ee uu adkaadana waxa uu noqadaa dhagax (dhadhaab) (fiiri jaantuska hoose) Foolkaanuhu wakhtiyo badan ayuu ku qarxi karaa. Markii uu dhagaxa dhalaalay bannaanka u soo baxo ee uu qaboobo si tartiib ah buuro iyo taagag ayaa ka samaysma. Sawiradan soo socda waxay tilmaamayaan:

- *Dabka-Cas-ee Cusub ee laafaha qulqulaya oo ah folkaanihii ka qarxay Jasiirada Riyuunyan (Reunion) oo ah halka xeebaha Afrika ee badwaynta Hindiya ku eg yihiin.*
- *Qulqulka laafaha dhalaalay ee kala roganta Haawaay.*




Jaantuska 2.3: laafaha

Buuralay badan ayaa ka samaysma natiijada ka dhalatay foolkaanaha qaab-toobineedka. folkaanahan dushiisa sare buuraha qaabkoodu uu janjeero ama godan yahay la moodo waxaa loo yaqaanaa bohol oo ay ka samaysan yihiin haddii roobku da'ana biyaha ku dul urura oo sammeeya haro waxaana loo yaqaanaa haro-boholeed.



Jaantuska 2.4: Haro- boholeedka  Wonji

Waxaa jira noocyo kala duwan oo folkaane ah. Waxayna ku kala duwanaan karaan qaababka iyo baaxaddaba. Foolkaanayaasha qaarkood xataa uma eka sida buuraha, Sequwaala oo Itoobiya ku taalaa iyo Fuji oo ku taal Jabaanka ayaa loo qaadan karaa tusaalaha ugu wanaagsan ee foolkaanaha-toobinka ah ee buuraha foolkaanaha. Marmarka qaarkoodna laafaha iyo gaballo yar yar oo dhagaxaan ah oo soo raacda foolkaanaha oo la moodo daad ayaa jira. Laafahaa iyo gaballadaas dhagaxaanta ahi waxayna seemeeyaan bannaano waawayn oo Siman oo loo yaqaano foolkaanaha oogada sare ee siman (dulaha).

Buurahaas ka dhashay ama ka samaysmay natiijada ka dhalatay falalka foolkaanaha waxaa loo kala saari karaa saddex kooxood oo kala ah

- *foolkaanaaha firfircoon,*
- *foolkaanaha fadhiidka ah,*
- *foolkaanaha suulay.*


Foolkaanaha qarxayay 500 sanno ee ugu dambaysay ayaa loo yaqaanaa foolkaanaha firfircoon. Foolkaanaha qarxay mudo aad u dheer, laakiinse mar kale ku qarxaya ayaa loo yaqaanaa foolkaanaha hurda. Foolkaanaha suulay ama sal guuray waa mid ku tusinaya inaanay jirin wax calaamada oo ku tusinaya in

uu mar kale qarxi doona. Joogaga kala saraynta ee qaarada Afrika waa kuwa laga helo Afrikada Bari ee silsiladaha kala duwan leh.

Kilimanjaaro waa buurta ugu dheer ee Afrika waana mid ka samaysan foolkaanaha hurda, iyo buurta Kiiniya oo ah buurta labaad ee Afrika ugu dheer oo ka samaysan foolkaanaha suulay.



Buurta kilimaanjaaro



Buurta Kiinya

Jaantuska 2.5: Buuraha Foolkaanaha ee bariga Afrika

Foolkaaneyaasha ku samaysmay oo kaliya meelaha qaarkood, Waxay ka samaysmeen oo sababay dhulka oo xaqiiqo ahaan ah kubbada aad u wayn oo qayb ahaan dhadhaabo ama dhagaxaan dhalaalay ku xeeran yhiin lakabka sare ee dhulka oo dhaadhaabo adke ah, dhulka lakabkiisa sare wuxuu u kala jajabay dulo xad-dhaaf ah.

Waana dulaha sida tartiibta ah u siibashada (sibiibaxashada) leh oo ku dul wareegsan qaybahaan dhagxaanta ama dhadhaabaha dhalaalay ee qotanka dheer ee gudaha dhulka foolkaaneyaashu aalaaba (sida badan) waxay sameeyaan (u qaabeeyaan) darfaha ama geeshaha dulaha.

Meelaha qaarkood, duluhu way kala tagaan. Laafahu waxay ka soo baxaan dildilaacyada u dhexeeya dulaha. Waxaa jira dilaacyo waawayn halkaas oo ay duluhu yihiin kuwo ku kala baxsan ama ku kala durugsan sida badwaynta Atlaantikada hoosteeda. Dab- hollac ama laafa aad u liita ayaa dilaacyadan ka soo baxa. Laafaha ku qaboobay ee ku adkaaday biyaha gudihiisa ayaa sagxad baddeed cusub sameeya. Meelaha qaarkood dulaha oo wada jira ayay qaraxyada Maagmuhu iyaga oo si toos ah u dhexmaraya dilaaca si ay foolkaane u sameeyaan.

Foolkaaneyaasha qaarkood waa kuwo ka dhaca berriga dushiisa. foolkaaneyaal badan oo waxaa jira iyaguna badwaynada hoostooda ka dhaca.

Foolkaaneyaashan qaarkood waxay ka dhacaan buuraha hoostooda ee biyaha leh.

Sida dhulgariirada , meelaha ay folkaanayaashu ay caadiga yiliin ee aga laga helo cidhifyada dunida sidoo kale waa kuwo xadaysan. Agagaaraha xeebaha badwaynta Baasifiga waxaa loo yaqaanaa "Silsiladii Dabka" jasiirado badan ayaa ku dhex samaysmay badhtamaha badwaynada  kuwaas oo ay ugu wacan tahay falalka foolkaaneed.

Waxaa Itoobiya ka jira buuro badan oo ah kuwa foolkaanaha. Sequwaala oo ku taalla koonfurta Addis Ababa oo tusaale loo qaadan karo buuraha foolkaanaha hurda ka smaysma. Ertiyaale oo gobolka Canfarta ah oo ka samaysantay foolkaanaha firfircoon, Waana goob soo jiidasho leh, miyaad taqaanaa naanaysta amxaariga ah "yemayanqelafaw issate gemora"? macnaheedu waxay tahay "foolkaanaha aan marnaba seexanin" fiiri sawirkan hoose.



Jaantuska 2.6: Har-dabeedka Ertiyaale oo Xili-habeen ah hol-caysa

**Shaxda 2.2: Shaxdan soo socota waxay muujinaysaa buuraha foolkaanaha ee Afrika**

| Buuraha | Halka laga helo | Joogga (mitir) |
|---|---|---|
| Kilimanjaaro | Waqooyi bari Tansaniya | 5895 |
| Buurta Kiiniya ( F/suulay) | Kiinya | 5199 |
| Fiiqa margherita | Uganda /J.D. Koongo | 5109 |
| Ras dashen | Itoobiya | 4620 |
| Buurta Meru(F/S) | Tansaaniya | 4565 |
| Buurta elgon | Uganda/Kiinya | 4321 |

Montserrat waa mid ka mid ah jasiiradaha yaryar ee ku yaalla badda kaariibiyanka. waana mid dhacda ama laga helo Bariga dalka Boorto Riiko (puerto Rico) oo 5400 km ka mid ah, Jasiiradan waxaa gumaysan jiray Ingiriiska wakhtiyadii la soo dhaafay loona yaqaanay mustac maradii Barafka, Aala sonkortka iyo cudbiga ayaa ah miraha ama dalagyada ugu muhiimsan ee ka baxa saddex iyo badh qarni oo uu fadhiid iska ahaa foolkaanahani kadib sanadkii 1995 kii ayaa taagaga loo yaqaano suufareeraayuu ka qarxay foolkaane oo ku tusinaya calaamadaha foolkaanaha firfircoon. Dadkii deganaana dhawr jeer ayaa laga daadguureeyay dhanka koontureed ee jasiirada. oo ay ku jirto magaalo madaxda Balimows.

## Sheeko gaaban

### Qaraxii foolkaanaha ee Montserrata



Qaraxyo tiro yar ayaa dhacay sannadkii 1996 kii oo ku qasbay in laga qaxo dhinaca koonfureed ee Jasiirada. Halkaas oo ay ku taallo Balimows. Qaraxyadii 1997 kii waxay sababeen dhimasho 1997 ilaa dhagxaan kululaaday, gaasas (naqas) iyo

dambas ka soo daatay taagaga Suufareera oo foolkaane ah, ugana sii gudbay Balimows intii uuna gaadhin badda ka hor. Dabkii qulqulayay wuxuu gooyay dhismeyaal badan. Qaraxyda waxaa intaas u dheeraa magaalooyin aasmay oo hoosta ka maray rasooyin dambas ah. Waana ta keentay in folkaanahani qaybta ugu wayn ee Montserrat ay noqoto meel aan la degi karin.

Horaantii 1998 kii dawladii Ingiriiska (oo gumaysan jirtay waagii hore iminka na ay u tahay Mustacmarad) ayaa shaaca ka qaaday inuu magaalo madaxda uga rari doonto qaybta waqooyi ee Jasiirada Montserra, taas oo uu folkaanuhu u kala soocay taagag silsilad ah oo hooseeya. Sannadkii 1999 kii tirada dadka ugu badan Jasiirada oo dhamayd 12771 ayaa uga qaxay Jasiiradaha deriska la ah Isla falan qeeya sida uu u saameeyay dadyawgii ku ag noolaa folkaanaha.

Marka ay foolkanayaashu samaysmaan marmarka qaarkood waxay leeyihiin faaiidooyin. Agagaarka meelaha uu folkaanuhu ka dhaco aalaaba waxay hodan ku noqdaan macdanta uu soo tuuro, haro-boholeedyada waxay leeyihiin soo jiidasho fiican oo dhinaca dalxiiska ah, biyaha kulul ee gobolka foolkaanaha ka jira sidoo kale waa goob ahmiyad u leh xaga caafimaadka.

***Waxaa jira tusaaleyaal badan oo biyaha kulul oo laga helo Itoobiya, Ma ka jiraan biyaha kulul deegaankiina?***




**Hawl-galka 2.2**

1 Adiga oo adeegsanaya carro ka samee muunad foolkaane oo leh har baholeed?
2 Adiga oo adeegsanaya khariirada Afrikada Bari ee Atlaska ka tilmaan halka ay dhacaan buuraha ku xusan shaxda sare?
3 Foolkaaneyaashu ma khasaare kaliya uunbaa? maxay kala yihiin waxtarkooda ay u leeyhiin qaybaha kala duwan ee dunida?

## 2.1.3 Laa-laabka

Waa dhaqdhaqaaqa kor iyo hoos u socda. Soo qaado loox warqadda dul dhig miiska dushiisa. Markii aad gacanta ku cadaadiso gacanta kale ku riix. Lidka jahada maxaa ku dhacaya? wuu laalaabmayaa ama kor bay u tuuro tuuraynayaan. Kani waa sida uu lakabka sare ee dhulku u laalaabmay. quwadaha gudaha ee dhulku waxay lakabka sare ee dhulka u riixaan xaga sare ama xaga hoose.

Jaantusyadan soo socda waxay ku tusinayaan qaloocsamida lakabyada dhadhaababaha ee lakabka sare ee dhulka . kani waxa uu dhacay malaayiin sanno in ka badan kahor.





**Jaantuska 2.7: Laalaabka**

***Dhagaxa ama dhadhaababaha noocee ah ayay kula tahay in uu si fudud u qalooc samayo?***

Waa dhadhaab macdaneedka. Marxaladihii ugu horeeyay ee samaysanka lakab ee dhulka waxaa jiray carro-guur joogto ahaa oo ay sababeen biyaha soconaya oogada sare waxyaalaha ay soo xaaqeen ku qubaan baddaha waawayn. In ka badan malaayiin sanno waxyaalaha ay tuulayeen ee adkaaday kana samaysmeen dhadhaab ama dhagax macdaneedku. Maxaa yeelay cadaadiska iyo kulka kaga imaanayay gudaha dhadhaababaha oo ku qasbay inay u laalaabmaan xaga sare kana samaysmaan buuraha laalaabku. In badan oo fiiqyada ugu dhaadheer dhamaan qaaradaha markii laga reebo Afrika, waa buuraha laalaabka.

Khariiradan soo socota waxay ku tusaysaa baahsanaanta buuraha laalaabka ee dunida





**Jaantuska 2.8: Baahsanaanta buuraha Laalaabka**

## 2.1.4 Dildilaaca

Waxaad sare ku soo aragtay in markii lakabka dhadhaabaha dhinac loo riixo, ay laalaabmaan. quwadaha guduhu sidoo kale waxay saameeyaan lakabka si uu u sameeyo dilaac dheer oo qoto dheer. Dildilaaca waxaa laga yaabaa marmarka qaarkood in uu noqdo dhawr sidoo kale barbarro ah.


Markii ay quwadaha guduhu dusha u soo baxaan, waxaa lakabka dushiisa ka jjira Cabudh ama giigsanaan hadiise quwadu ama xoogu xaga hoose u kacana waxaa jira cadaadis. Waana ta keenta in uu dildilaacu dhaco . Haddii dilaacyadu (tararku) ay barbarro yihiin dhulka u dhexeeya waxaa lagu qasbayaa in uu hoos u dego ama kor u dalacmo midkood. Markii qaybta dhexe hoos u quusto muuqaalka ka samaysmayaa waa dooxo, markiise ay kor u soo kacaan buuro ayaa ka samaysama fiiri jaantuskan.




**Jaantuska 2.9: Dooxada Rifti iyo buuraha siisilada**

Dooxada Rifti waxay ka samaysantay markii lakabka ugu wada sareeya dhulku uu kala durkay. Wuxuuna ka dhici karaa baddaha waawayn iyo berriga labadaba

Dooxada noocan ahi badanaa waa mid aad u ciriiri ah, oo leh dhinacyo janjeera iyo sagxad siman. Bannaanka ama wixii ka baxsan dooxada Rifti, oogooyin sare oo siman ayaa ku samaysmay. Dooxooyinka faraha badan ee Rifti ee dunida waddankeena ka gudubta ee loo yaqaano dooxada waynee Rifti, waxayna kala baxsan tahay laga soo bilaabo dalka Suuriya oo ku yaalla Aasiya, kana soo gudubta badda cas iyo bariga Afrika ilaa iyo dalka Mosaambiig oo ay ku dhamaato dherekeeduna gaadhsiisan yahay 7200 km (fiiri khariirada Jaantuska 2.10).




**Jaantuska 2.10: Dooxada wayn ee Rifti**

Nidaamka dooxada waynee Rifti ee dalkeenan Itoobiya waxay ka gudubtaa laga bilaabo Waqooyi Bari ilaa Koonfur Galbeed. Waxayna u samaysaa qaabka qaac (qiiq) saaraha oo kale . Dooxada Rifti gudaheeda waxaa jira, foolkaaneyaal firfircoon, biyo kulul iyo harooyin.

Markii dhulka u dhexeeya labada dildilaac ee barbarada ahi ay kor u soo riixmaan. Waxaa ka samaysma buuraha sekedda ah. Qaybo badan oo dunida ah oo buuraha sekedda ah laga helo oo lagu xidhiidhiyo buuraha laalaabka ah baa jira. Dhulka oogada sare leh ee dalkeenan Itoobiya ayaa inoo noqon kara tusaalaha ugu fiican ee loo qaadan karo buuraha sekedda ah.



### Hawl-galka 2.3

1 Adiga oo adeegsanaya sanduuqyo warqado ah ama looxaan seked ah ka samee muunada Dooxada Rifti iyo buuraha sekeda ah?

2 Khariirada gacan ku samays ah oo ah ta Itoobiya ku sawira Dooxada Rifti. tilmaama webiyada ugu waawayn iyo harooyinka laga helo dooxada gudaheeda?

## 2.2 XOOGAGA DIBADA IYO SAAMAYN-TOODA NOLOSHA AADMIGA

***Marka uu casharkni dhamaado kadib ardaydu waxay awood u yeelan doonaan inay:***

- Sharaxaan quwadaha dibada ee wax ka badala oogada sare ee dhulka,
- Garwaaqsadaan saamaynta carroguurka iyo tuulimaadka ee oogada sare ee berriga ku keenaan.

### Isku day su'aa laha an soo docda

1 Saameyn intee la'eg ayuu roob da'u ku leeyahay samaysanka togaga iyo wabiyada?

2 Miyaad u kuur gasheen deegaankiina sida uu carro- guurku meelihii beeraha ku haboonaa ugu bedelo meelo aanay waxba ka bixi karin?

3 Talaabooyin noocee ah ayay dadku ka qaadan karayaan si ay dhulka uga Ilaaliyaan. carro guurka?

## Ereyada Furaha u ah casharka

- Burburin
- Raritaan
- Carro-guur
- B/burinduleed
- Istaalaktayt
- Isha wabiga
- Kala firirsanayaal
- Dhul faafka biyaha
- Bacaadsaar
- Burburi kiimikaad
- Staalakmayt
- Afka wabiga
- bannaanka fatahaada
- Biyo shubka sare
- Biyo shubka dhexe
- Biyo shubka Hoose
- Bacaad
- Waadi

## Ujeeddada Akhriiskaaga

***Marka aad qaybtan (casharkan) akhrido, isku day inaad ka jawaabto su'aalahan soo socda:***

1. Sidee bay u dhacdaa habka burburintu? ma ku muujin kartaa muuqaal iyo qoraal faah faahsan?
2. Sharax saddaxda shaqo (hawlood) ee biyaha qulqulaya?
3. Waa maxay muuqaalada ugu muhiimsan ee ka samaysma sida caadiga ah meelaha lama – degaanka ah?
4. Maxay kala yihiin faaiidooyinka iyo khasaaraha quwsadaha dibadu u leeyihiin nolosha aadmiga?

Xoogaga dibadu waa kuwa ka dhaqdhaqaaqa oogada sare ee dhulka ee ka timaada xaga sare. Taariikhdii hore ee dhulka, oogadiisu waxay ahayd, mid ka badan siman ahaanshaha . Laakiin waxaa ugu wacan xoogaga dibada oo qaababka beriga ah ee aynu ku arkayno haatan. Xoogagan ka hooseeya dhulka ka sareeya waxaa ka dhaca caro guur, meelaha ka hooseeyana waxaa ka dhaca bacaadsaar.

Raritaanka dhagxaantu waxay dhacdaa markii natiijadu ay noqoto burburinta iyo hababka carro guurka. Burburintu ama cimilowgu waa kala firdhinta ama jajabinta, sida tartiib tartiibta ah ee dhagaxaanta, kaas oo ay dahaarka ka qaadeen jawiga (cimilo gooreedka) halka ay dhacaan waxaad ku arki dhagxaan duug ah.

Carro guur waxaa laga wadaa ama looga jeedaa kala daadashada dhagxaanta kaas oo ay dahaarka ka qaadeen biyaha soconayaa, iyo barafka guura. Tuulimaa

dkuna wuxuu dhacaa markii qurubyada dhagxaanta la soo xaaqay meel cusub lagu ururiyo


## 2.2.1 Burbur cimilowga (Weathering)

Burbur cimlowgu waa hab kaas oo dhagaxa asalkiisii loo sii kala jajabiyo gaballo yaryar, kulka ka imanaya cadceedu wuxuu dhagaxa ku samaynayaa in uu faaxo una dildilaaco gabal gabal Barafku sidoo kale dhagaxa wuu jajabiyaa. Biyuhuna dildilaacaas ayay ka galaan fariistaanna (barafoobid). Barafku wuu faaxiyaa markii uu dhagaxu barafoobo ee u burburo, dhirta xididadeedu sidoo kale waxay ka dulbaxaan dhagxaanta dushooda wayna dilaaciyaan biyaha roobku way kala jabin karaan ama nuugi karaan dhagxaanta qaarkood waxayna isu badalaan dareere. Biyaha roobku waxay u badali karaan dhagxaanta dhooqo. Hal mar ayay dhagxaantu u burburayaan gaballo yar yar, oo intooda badan. Carro guurku qaadaan biyaha , dabaylaha iyo barafka ayagoo u qaadaya gaballo yar yar burrint dabadeed.

Bur burinta ama cimlowga waxa loo kala saaraa karaa burbur duleed iyo burbur kiimikaad

### I Burbur duleed

- ***Isbedelka Heerkulka:*** *Gobolada kulul ee qalalan, waxaa ka jira farqi aad u wayn oo u dhexeeya heerkulka duhurkii iyo saqda dhexe. Dhagxaantu markii ay kululaadaan saacadaha dharaarnimo habeenkina qabaw ayay noqdaan, tani waata sida dhaqsaha leh ee ay kululaanshaha iyo qaboobitaankuba ay ka dhigaan in dusha sare ee dhagaxu dilaaco ama qoloftu ka dhacdo. Burburinta duleed sidoo kale waxay ka dhacdaa meelaha degaandega ah ee kor ama hoos u janjeerka leh. halkaasoo gaballada jajabay ay hoos ugu dagaan (dhacaan) degaandegyada, kuna ururaan hoosta.*




*Dhagax dilaacay oo gabal – gabal u burburay*

**Jaantuska 2.11: Burburinta uu sababto Heerkulka (T°)**


- ***Falka Dharabka:*** *Markii ay biyuhu fadhiistaan mugoodu wuu kordhaa. sidaa darteed, markii ay biyuhu ka galaan dilaacyada way barafoobaan, awoodii dilaacuna way sii balaadhataa.*

*Markaa, falalka arabku waa kuwa keena dilaaca ama kala go'a ugu dambayna dhagax u burburo gaballo yar yar. Falalka dhedadu waxay sida caadiga ah dhacan xiliga jiilaalka gobalada kul –dhexaadka ah iyo buuraha dhaadheer qaarkood sannadka oo dhan. Tusaale buuralayda himalaaya.*




**Jaantuska 2.12: Burburinta dharabka**

- ***falalka dhirta iyo xayawaanka:*** *xiddada dlirtu waxay dhexgeli karaan dildilaacyada dhagxaanta. Markii ay xididadaani koraan ee ay waynaadaan, waxay ku qasbaan in uu dilaaciinoqdo mid ka sii balaadhan oo ugu dambayna dhagaxii burburo qaarka mid ah xayawaan dhagaxii xayawaanada qaarkood sidoo kale waxay godad ka qotaan dhagxaanta dhexdooda. xaalada nidaam ee dhagaxuna waxay noqonaysaa mid cimilow ama burburintu haleeshay dhagaxuna uu u kala jajabo gaballo ama qurubyo yar yar.*





**Jaantuska 2.13: Burburinta dhirta**

*Waxyaabaha kale ee burburinta duleed ka qayb qaata waxa ka mid ah dabaylaha iyo biyaha soconaya waxayna ku xidhan tahay baaxada toga ama janjeedhka, Daadadka biyuhu waxay qaadaan dhagaxa caadiga ah iyo dhagax-dixeedyada waxayna isku lisaan gaballo yar yar ciiduna waa natiijada ka dhalata carroguurka ugu badan ee ay biyaha soconayaa dhaliyaan.*

## II Burbur kiimikeed

Burbrinta kiimikeed si duleed looma arki karo. Qaar ka mid ah dhagxaanta sida dhagaxa- dhannaan waa kuwo ku milma biyaha. Biyaha roobka waxaa nuuga Kaarboon laba ogsaydhka markii ay ku soo dhacaan (da'aan) hawada dhexdeeda markii ay roobabku ku da'aan dhagaxa dhanaan dushiisa waxay u bedelaan Kaalshiyam Bikaarboonayt, kaas oo milmi kara.

Webiyada dhulka hoostiisa ee dhexmara dhagaxa dhanaan waxay xaaqi karaan dhagaxa sameeyaana godad dhulka hoostiisa ah . markii qaar ka mid ah milanada Kaalshiyam Bikaarboonayt ku dhibcaan (tifiqmaan) saqafka godka, laakiin qayb ka mid ah halkaas ayay ku dhagaan, wakhtigaa ay soo daadanayaan kaalshiyam Bikaarboonaytku waxay ku keydsantaa saqafka iyo sagxada godka labadaba. Midka sare waxaa loo yaqaanaa Istaalaktayt meesha midka hoosana loo yaqaano istaalagmayt. Istaalaktaytka iyo Istaalagmaytka koritaanka dhererkoodu waa mid socda marmar ka qaarkoodna si wadajir ah ay ay u sameeyaan tiirar dabiici ah ama dhidibo. Muuqaalka dabiici ee sida aad ka u quruxda badan ayay tani bixisaa (ina siisaa) tusaalaha u wanaagsan waa godka suufi cumar oo ku yaalla gobolka Baali ee Deegaanka Oromada.




*Istaalaktayt iyo istaalagmayt*



*Godka suufi cumar*

**Jaantuska 2.14: Godadka dhagaxa- dhanaan**



## Hawl-galka 2.4

Hel sawirada taalada Aksum, Laalibeela dhagaxa hewn ee kaniisadaha iyo Qasriga Goondhar. Waa noocee burburinta firfircoon ee dhismayaasha taariikhiga ah haysta? Isla falan qeeya maxaad ku qiyaasi lahaydeen isbadalada qarniyada badan ee goobahaas taariikhiga ah?.

## 2.2.2 Carro-guurka

Carro-guurku waa raritaanka dhagaxa iyo waxyaabaha carrada ah oo u dhaca habab ama nidaamyo dabiici ah oo asal ahaan ay alkuman biyaha soconaya,baraf guurka , hirarka (mawjadaha) iyo dabayluhu. Carro – guurka raritaanada waxyaalaha ku dhagaxoobay kadib habka bururinta oo u kala jajabisay dhagaxa asalkiisii qurubyo yar yar iyo gabballo la qaadi karo. Carroguurka dhulka oogadiisa sare, waa mid si joogto ah uga jirta oo dhagaxa u qorta qaaabab cusub qaababka qaaraduhuna waa kuwo si joogto ah isu bedbedalaya markii ay mawjadaha badda iyo hirkooduba ay jarayaan dhulkii hore halka ay bacaadka wabiyaduna abuurayaan dhismayaal kor u kacsan oo dhul cusub ah.

### Carro-guurka ay biyaha qulqulaya keenaan

Weligaa ma aragtay webi fatahaya gaar ahaan xiliga roobku da' ayo? waa maxay sababta uu webiga biyihiisu u noqdo maariinka? biyuhu waxay isu bedelaan midabka maariinka , sababta oo ah waxaa ka buuxda dhoobo. Biyaha soconaya ee ka soo daadanaya taagaga dhinacyadooda ee sita wasakhda wakhtiyada badan biyaha qulqulaya waxa ay qaadi karaan dhagaxaanta iyo wasakhda aadka u badan ee ay ka soo jaraan dhulka sameeyana kanaalada

Webiyadu way ka sii waynaadaan markii ay ku soo biiraan togagu. togagan waxaa loo yaqaanaa ku darayaal. Miyaadan ku fikirin inuu dhulka oogadiisa uu carro guurku si wayn u bedeli karo? Culimadu waxay aaminsan yihiin in mudooyin aad u farbadan carro-guurku uu qaadi karo dhamaan buuraha oo ku dari doona badda.

Quwadaha dibada dhexdooda, biyaha soconaya waa kuwa ugu wayn waxaalaha keena carro-guurka wuxuu leeyahay quwad xoog badan oo uu ku xaaqo dhulka kuna bedeli karo qaabka muuqaalka kala duwan ee dhulka. biyaha soconayaa


waxay raraan jayga iyo carrada ay ka qaadaan meelaha sare, qaaditaanka ama daadguraynta oo ugu dambaynna uu ku soo tuulo ama bacaadsaaro.

Meelaha jooga hoose leh. guud ahaan webiyadu waxay sameeyaan saddex waxyaalood carro-guurka, raritaanka iyo tuulimaadka (bacaadsaarka)

Meelaha uu webigu dhex qulqulo ayaa loo yaqaanaa saxanka biyo mareenka. Biyo mareenadaas oo gaarsiisnaan kara kumanaan kiiloo mitir oo laba jibbaaran. Baaxada webiguna waxay ku xidhan tahay baaxada saxankiisa iyo xeeradiisa iyo cadadka roob ee ku da'ay saxanka.

Biyaha soconaya waxay ka soo qulqulaan meelaha sare una qulqulaan meelaha hoose ee dhereran biyo dhacyadiisa. ilaha wabigu waa meesha uu socodka ka soo bilaabo. Kani wuxuu noqon karaa durdur, roobabka adag ( culus) ama biyaha barafka dhalaalay. Afka webigu waa meesha uu ku dhamaado webigu meeshaas oo ah badanaa bad, har ama dhulka biyuhu jiifsadaan . Biya shubka wabiga waynee laga bilaabo isha ilaa Afka webiga waxaa loo kala qaybin karaa saddex qaybood oo kala ah:

- *Biyo shubka sare,*
- *Biyo shubka dhexe,*
- *Biya-shubka hoose.*




Jaantuska 2.15: saddexda qaybood ee webiga

Webiga biyo shub kiisa sare ama marxaladiisa ugu horaynta wuxuu leeyahay xawaare iyo xoog uu ku maro dhulka. Miyaad ku noonshahay bannaan ama meelo taagag leh? ma jiraan togag iyo webiyo kaa ag dhaw? Maxaa dhaca markii ay roobabku da 'aan? Miyaad u kuur gashay biyo soconaya ama qulqulaya? Waxay ku xidhan tahay degaandeg janjeedhka, quwada biyaha ee kala duwan.

Degaandega janjeedhka dushiisa biyuhu si degdeg aha ayay uga soo qulqulaan hoosta janjeedhka sidaas aawadeedna si xoogan ayay u xaaqaan, una qaadaan waxyaalo gabalgabal ah oo waawayn. Maxaa yeelay xawaaraha webigu qulqulayo oo u dhereran ilaa xad biya-shubka tooska ah, waxaana ka samaysma dooxo qaabka xarafka "V" leh oo ciriiri qoto dheer ah oo leh biyo shubyo dhaqso badan. Daraasadan soo soo socota waxa ku siinaysaa xog waranka laga qoray Biyo shubka sare ee webiga Abay.

## Sheeko Gaaban

### Carro-guurka biyo-shubka sare ee webiga Abaay ama Niilka Buluuga ah

***Ma xasuusan tahay isha webiga Abaay ama Niilka Buluuga ah? Halkee bayse ku la tahay inay isaga darsamaan webiga niilka cad si ay u sameeyaan webiga Niilka? waa baddee ta uu ku dhamaado?***

Abay waa biya-shubka ugu wayn ee wabiga Niil ee Afrika waxaana lagu qiyaasaa in 70% daadadka biyaha wabiga Niil inay uga imanayaan Sida la wada aaminsan yahay Biyaha webiga Abaay waxaa ay ka soo bilaabmaan kana soo qulqulaan agagaarka harada Daana oo heerka Badda ka saraysa 1800 mitir. Wuxuuna webigu uga qulqulaa banaanka harada ee dhanka bari ka xiga ugu horaynba kadibna agagaarka Buurta Birhaan ayuu sii maraa ugu dambayna dhanka galbeed. marka laga yimaado Harada Daana, webiga Abay wuxuu sameeyaa biyo shubka loo yaqaano Tis isaat. Muga iyo qaabka berriga kaas oo uu wabiga abay uu soo qulqulayay in ka badan malaayiin sanno ayaa sababtay in uu sameeyo dooxo aad u qoto dheer oo loo yaqaano waadiga Abaay (fiiri jaantus 2.17).

Abaay waxa uu leeyahay ku darayaalka ay ka mid yihiin Beshilo, Jema Muger, Guder, Didesa, Dabus iyo Beles. waana kuwa u keena biyaha ugu badan ee webiga Abaay. Abaay iyo ku dare yaalkiisu sannad walba carro aad u badan ayuu ka soo qaadaa dhulka jooga sare leh ee badhtamaha iyo Galbeedka Itoobiya.

Xiliyada uu roobku ka da'ayo Itoobiya carro guurka ugu culusi waa Daadadka sida xoogan uga soo qulqulaya degaandegyada janjeedhka ee dulaha ay roobab-xilluyeedka ka da'ayaan waa kuwa aasaasiga ah ee dhaliya dahaar ka qaadida dhulka. Dooxada ciriiriga ahi waata marka ugu horaysa samaysanta kadibna si tartiib tartiib ah ayay u kortaa oo noqotaa togag iyo webiyo.

Sida uu ku tusinayo sawirkan hoos ku xusan. Caroguurku waa mid ay saamayn wayn ku yeesheen dhaqdhaqaaqyada aadamuhu Degitaanada dhir-xaalufka, daaqsinta xad dhaafka ah ee xoolaha ay dhaqdaan, qodaalka beeraha ee aadka u liita.



Khariidada Itoobiya korkeeda ka tilmaan Abaay iyo ku darayaashiisa. Waa maxay faaiidooyinka iyo khasaaraha webiga Abaay ee uu u leeyahay Itoobiya? waa maxay faaiidada ugu wayn ee laga helo. Webiga Abay wakhtigan xaadirka ah? Isla falanqeeya adiga iyo ardayda saaxiibadaa ah.

Biyo shubka dhexe ama heerka qaangaadhka webiga, dooxadu waxay leedahay dabeecadahan; janjeedh aad u debecsan, webi qalqalooca oo ayisu muuqan karaan dhinacyadiisu iyo dooxo sagxadeedu balaadhan tahay, muga biyuhuna way kordhaan. Shaqada ugu muhiimsan ee habka raritaanka webigu waxay ka jirtaa biyo shubkan oo ah ka qaada walxaha ay ka mid yihin carada iyo jayga.

Biyo shubka hoose ama heerka ugu dambeeya ee webigu wuxuu u qulqulaa si tartiib-tartiib ah shaqadiisa ugu muhiimsan waa bacaadsaar. Xilliyada uu roobku da ayo , webiyadu waxay qaadaan biyo badan oo yimid biyo shubka sare iyo bacaadsaarka dhereran daamaha webiga , dhulkan waxaa loo yaqaanaa bannaanaada fatahaada waana carrosan wax bixin og, kuna haboon beeraha waxaana loo yaqaanaa Dhelta.

## Sheeko gaaban

### Biyo-shubka hoose ee bacaad-saarka wabiga Niilka

Sida ku xusan diiwaanada taariikhda Ilbaxnimadii hore ee masaaridu, waxay ka bilaabantay agagarka Dooxada webiga Niil,

Wabiga Niil-waa wabiga ugu dheer uguna caansan dunida. Wuxuu dhererka wabiga Niil dhanyahay 6695 km. Wabiga Niil labadiisa laamood ee kala ah Niilka Cad ee ka soo bilawda Harada Fiktooriya iyo Niilka Biluuga ee ka bilawda dhulka jooga sare ee Itoobiya gaar ahaan Harada Taana waxay ku kulmaan magaalada khartuum ee dalka Suudaan, halkaas oo uu ugu dambeyntii wabigu ku dhamaadaa badda Meedhiteraaniyaanka.

In kabadan 90% dadka reer Masar ayay nolashoodu ku tiirsantahay wabiga Niil oo ay dooxadiisu ku fadhido ku dhawaad 3% dhulka Masar. Dhulka ka shisheeya meelaha wax soosaarka  ku haboon waa lamadegaan. Sida webi kasta, ayuuy biyo shubka webiga Niil ee hoose uu yahay bacaadsaar, maxaa yeelay, xawaaraha oo aad u yaraaday, webigana ka dhigamid dhinac-dhinac u socda. Dalka Masar biyaha webiga Niil waxaa loo isticmaalaa dalagyada waraabka ku baxa sidoo kale wuxuu ka caawiyaa isha biyaha macaan ee ay iticmaalaan dadka iyo xooluhuba.

Qarniyo badan ayaa dooxada webiga Niil lagaga soo dhaqmayay waraabka, markii uu webigu buuxdhaafo ee ay biyhiisu gaadhaan daamihiisa, fatahaada biyuhu waxay tuulaan carro san ay biyuhu siteen. Biyaha ugu badan waxaa wabiga Niil u keena Niilka Buluuga ah oo ka yimaada dhulka jooga sare leh ee Itoobiya. Dhul-faafka webiga niil oo loo yaqaano Dhelta wuxuu gaadhsiisan yahay bed- dhan 250 $km^2$ wuxuuna ka samaysamay faro (faraaqyo) aad u tiro badan (fiiri jaantuska 2.19)

Waa maxay ujeeddada looga dhiso biyo xidheen wabiga agtiisa? Wuxuu si aad u wayn u xoojiyaa in ay biyuhu qulqulaan inta lagu jiro xilliga roob la'aanta iyo roobku da'ayaba, in uu biyaha keydiyo, sare u qaadida heerka waraabka, iyo ka dhalinta korontada. Biyo xidheeno dhawr ah ayaa laga ag dhisay wabiga Niil ee dalka Masar. Biyo xidheenkii ugu horeeyay ee laga dhiso Niil wuxuu aahaa Aswaan oo ku yaalla Masar sanadkii 1902 dii laakiin kadib sannadkii 1958kii

ayaa si fiican loo dhisay biyo xidheenka sare ee Aswaan waxaana lagu guulaystay qulqulkii biyaha in la xakameeyay bacaadsaarkii caradana la yareeyay. Biyo-xidheenkani waxaa uu qaahira ka xigaa dhinaca koonfureed fogaan dhan 955km. Wuxuuna awoodaa fidinta waraabka beeraha, sidoo kale waxaa loo adeegsadaa dhalinta Quwada korontada. Waxaa laga abuuray (sameeyay) haro gacan ku samays ah ta ugu wayn Afrika oo la yidhaahdo al-nasiir, biyo-xidheenka dushiisa loona isticmaalo kaluumaysiga. Biyo-shubyadiisa hoose iyo dhexe ee wabiga Niil waxaa sidoo kale loo adeegsadaa habab gaadiid ahaaneed

Biyo-xidheenka sare ee Aswaan wuxuu sidoo kale leeyahay saamayn dhinaca deegaanka ah, ka hor intaan la dhisin xidheenka, fatahaadihii sannadlaha ahaa waxay soo tuuli jireen carro nafaqo leh daamaha wabiga agtiisa ah. hadda, carradii waxaa lagu qabtay biyo-xidheenka ka sareeya. Beeralayda Masaarida waxaa si dhaqsa ah u soo foodsaaray dhibaatooyin dhinaca isticmaalka bacrimiyeyaasha aadka qaaliga u ah ee sidii loo xoojin lahaa nafaqada carrada dhulka Biyo xireenku sidoo kale wuxuu hor istaagay daadad sannadlihii milixda carada ka soo maydhayay. Sidoo kale wuxuu saamayn ku yeeshay aadamaha iyada oo ay korodhay cudurada sababa dhimashada ee ay dhaliyaan Dulinku (cayayaanka ku nool noolaha kale)

Sidee bay dadka reer Masar uga faaiidaystaan wabiga Niil?


## Qaar ka mid ah muuqaalada weheliya biyo-shubyada wabiyada Waawayn

***Biyodhac:*** wuxuu ka dhacaa meesha lakabyada dhagxaanta ee u adkaystay ama iska caabiya caro-guurka biyo shubyadii ka dul gudbayay dushooda dhagxaanta jilicsan dhinaca hoose ee toga waa kuwo si ka dhaqso badan dhagxaanta adag loo baabiin karo . sidaa darteed dhagxaanta ad-adagi waxay ku soo hadhaan oo ay ka laalaadaan dusha meelaha ay biyuhu maraan.




Jaantuska 2.16: Biyo-dhaca Awaash

***Waadi:*** waa dooxo dheer oo dhuuban oo leh gebiyo janjeera waxaa jira dalkeenan Itoobiya waadiyeyaal. kuwa ugu muhiimsan waxaa ka mid ah sida ka muqata khariiradan hoos ku xusaan, gaar ahaan meelaha Buluuga ah lagu midabeeyay.





Jaantuska 2.18: waadiyada Itoobiya



Jaantuska 2.17: Buundada (kaabada) webiga Abbay


***Dhul-faafka Biyaha:*** Bacaadka ama Dhoobada uu webigu keeno in badan waxyaabihii u sitay ka mida ka dhiso wabiga afkiisa. waxaa ka samaysma bannaan hoos u dhacsan oo loo yaqaano dhelta . markii uu bacaadsaarku (dhoobo saarku) socday . webiga waxaa lagu qasbay in la qaybiyo loona sii kala qaybiyo kanaalo dhawr ah kuwaan waxaa loo yaqaanaa faro (faraaqyo) tusaalaha ugu fiicanna waa dhul-faafka webiga Niil (Dhelta).




**Jaantuska 2.19: Dhelta (dhul-faafka Niil)**

## Carro-guurka Dabaylaha

Dabayshu waa mida ugu wayn ee sababta carro guurka lamadegaanka. Dabaylaha iyo biyaha qulqulaya waxay labadoodu ka midaysan yihiin falalka ay ka mid ka yihiin Carro-guurka, raritaanka iyo bacaad-saarka. Saamaynta dabaylaha waxay ugu daran tahay dhulka lama-degaanka ah oo ay ka rarto carrada jiriirat ah. Raritaanka dabayluha wuxuu masaafo aad u dheer u qaada qurubyo aad u af-dhuuban oo dhagaxaan ah. Waxay dabayluhu sababaan in ay camuudu meel isugu tagto (ururto) oo uu ka samaysmo bacaad qaabab kala duwan leh (fiiri jaantuska hoose).




**Jaantuska 2.20: Bacaadyada**



Jaantuska 2.21: Bacaadka lama-degaanka Gobaay(Gobi)

## Saamaynta xoogaga dibadu ay ku leeyihiin Nolosha Aadamaha


### Webiyada

1 Webiyada waawayn, gaar ahaan biya shubkooda hoose, waxaa loo isticmaalaa gaadiid ahaan. Webiga Rahiin oo ku yaal yurub, Yaangiste oo ku yaal Aasiya iyo Mississibi oo ku yaal Waqooyiga Ameerika waa tusaalayaal fiican

2 Webiyo badan waxaa loo isticmaali karaa biyo waraab ahaan Meelaha beeraha leh tusaale: wabiga Niil

3 Horumarinta quwada ( Awooda ) korontada biyaha laga dhaliyo tusaale:- Takese, Belas, Gibe.

Markii ay wabiyadu fatahaan waxay waxyeelo ba'an u geystaan dhul-beereedyo, Guryo, waddooyin I.W.M. Wakhtiyo kala duwanoo oo aan aad usii fogayn, waxay ahaayeen kuwo ay fatahaaduhu Itoobiya ay u keeneen khasaare aad u ba'an deegaanada qaarkood. 1999kii fatahaad ayaa ka dhacdaay magaalada DiriDhabe oo sababtay dhimashada dad aad u badan. Khariiradan soo socota waxay ku tusaysaa daadadkii ugu darnaa meelaha Itoobiya ay ka dhaceen.




Jaantuska 2.22: Meelaha ugu nugul fatahaada itoobiya


## Dabaysha

Dabayluhu waxay qaadaan qurubyada afka fiiqan ee ay ka qaadaan lama degaan ada kuna tuulaan badaha ama dhulka dushiisaba. Habaaskan ay soo ururiyeen ee ay keeneen dhulka dushiisa, waxa ay sameeyaan nooca carro ee loo yaqaano habaas ururay. Waxaa jira habaasyo ururay kuwa ugu balaaran waxay tuulan yihiin Waqooyiga Shiinaha, Yurub, Waqooyinga Ameerika iyo Koonfurta Ameerika.

Tuulimaadyada habaaska ururay waa kuwo carro nafaqaysan leh oo loo isticmaalo in lagu beero dalagyo.



*Buuraha gere alta (Tigraay)*



*Dhagaxa iskor-saaran ee Daakhato (Deegaanka Soomaalida*

Jaantuska 2.23: Hawlaha bur burinta iyo carro – guurka



## Hawl-galka 2.5


1 Deegaankiina ka soo hel meel, halkaas oo burburita duleed ay tahay mid firfircoon. Adiga oo ka Kiiniya dhagxaan tusaale ah oo ku jira nidaamkaas?
2 Samee khariirad yar oo ku tusinaysa dabeecadaha webi iyo biyo shubyadiisa kala duwan?
3 Adiga oo adeegsanaya khariidada Jaantuska 2.22 – wabiyadee loo malaynayaa inay qaybahooda hoose ay fatahaad leeyihiin ?
4 Sharax saamaynta xoogaga dibadu ku leeyihiin nolosha aadamiga ?

# 2.3 CABBIRKA FOGAANTA IYO BEDKA KHARIIRADA KORKEEDA

***Marka uu casharkani dhamaado kadib waa in ay ardaydu awoodi karaan in ay:***

- Qeexaan qiyaas-cabbir
- Magacaabaan hababka kala duwan ee lagu sharxi karo cabbir qiyaaseedka.
- Xiisaabiyaan isku bedelka qiyaas-cabbirka.
- Ka shaqeeyaan foogaanta dhulka (dhabta ah) iyo bedka qaabsameyaasha jaantusyada khariirad.

## Ereyada Furaha u ah casharka



- Cabbir qiyaaseedka
- Qiyaast Giraafka
- Isku-bedelka cabbir qiyaaseedka
- Khariidada cabir-qiyaaseedka yar
- Qiyaas-xariiqeed
- Daduubta-Cabbir qiyaaseed ka
- U taagan jajabka
- Q. cabbir wayn
- Is bar-bardhiga cabbir qiyaaseedyada
- Qaab-Same

## *Isku dey su'aalaha?*

1 Miyaad aragtay dalxiisayaal u adeegsanaya khariiradaha si ay u ogaadaan jihada , foogaanta iyo halka meeli ku taallo ee bar-dhamaadka safarkooda? weligaa ma la kulantay "muhandis" cabbiraya tiigta-dhuleed samaynayana khariiradaha dhulka mulkiilayaasha degaankiina?

2 Ma u kuurgasheen khariirada Itoobiya ee baaxadaha kala duwan, ee buugaagtiina daabacan bogga jaldiga khariidada? Ma fahanteen qiyaas cabbirada?

## Ujeeddada Akhriskaaga

***Markii aad akhridid casharkan isku day in aad ka jawaabi kartid su'aalahan soo socda:***

1. Qeex qiyaas cabbirka?
2. Maxay kala yihiin saddexda hab ee qiyaas cabbirka khariirada?
3. Sidee baad ugu bedeli karta hal nooc oo qiyaas cabbirka khariidada ah mid kale?
4. Ma is bar-bar dhigi kartaa Cabbir-qiyaaseedyada yar iyo Cabbir-qiyaaseedyada wayn?

Waa inaad eegtaan muuqaalka guud ee khariirada Itoobiya ee baaxadaha kala duwan leh. Waxaa laga yaabaa in aad heshaan khariirada Itoobiya ta ugu qiyaas-cabbirka yare ee ku taalla buugaagtiina daabacan, tusaale ahaan bogga 92 khariirada ka wayn ee kutaalla Atlaska iyo hadana mida ku taal ee aadka u wayn ee khariirada Gidaarka. Muxuu noqonayaa fogaanta dhulka ee xariiq toosan oo u dhaxaysa Addis Ababa iyo Maqalle ama Jigjiga? maxay noqonaysaa wadarta bedka guud ee dalkeenan Itoobiya? maxay kula tahay in ay noqonayso natiijada farqiga u dhexeeya adeegsiga khariirada baaxad yar iyo khariidad baaxad wayn? Maya, waxaa kuu suuroobi doonta in aad heshid natijooyin isku eg ama isku mid ah hadii aad adeegsatid qiyaas cabbirada lagugu siiyay khariiradaha.

Si aynu u sawirno khariirad meel ama Dunida oo dhan ah, bedka dhabta ah wuxuu leeyahay baaxad la yareeyay , in la geliyo warqada khariidada ama bogga Atlaska. Waxaynu ognahay sida ugu saxsan ee ugu badan bedka dhabta ah loo yaraynayo baaxada iyadoo la adeegsanayo qiyaas cabbirka .

Fasalkaagii 7aad , waxaad ku soo barateen warbixin sideyaasha. Mid ka mid ah warbixin sideeyaashaas waxaa weeyi qiyaas cabbirka kaas oo la'aantii ayna tixgelin yeelan karin sida dhabta ah khariiradi, laakiin mida gacan ku samayska ah mooyee.

## 2.3.1 Cabbir - Qiyaaseedka

### *Waa maxay cabbir qiyaaseedku?*

Qiyaas-cabbirku waa hababka u taagan fogaanta dhulka oo ay weheliso dhererka khariidada dusheedu. Qiyaas-cabbirku wuxuu ku tusaa saamiga u dhexeeya


fogaanta ama bedka dhulka ama warqada. waxaynu ku soo koobi karnaa sida soo socota.

$$\text{Qiyaas cabbirku} = \frac{\text{Dhererka warqada dusheeda}}{\text{Fogaanta dhulka dushiisa}} = \frac{F.KH}{F.Dh}$$

**Bartilmaamed**

Waa in la xasuusnaado in dhererka khariiradaha dushooda lagu sharxo milimitro ama sentimitiro midkood. Fogaanta dhulka badanaa waxaa lagu sheegaa kiiloomitir ama mitir.

Khariidada gacan ku samayska ah ee soo socota dhererka u dhexeeya baraha "C" Iyo "D" waxay isu jiraan 2 cm . fogaanta dhabta ah ee u dhexeeya labada barood. Oo ah 6 km . kadib saamiga ama qiyaas cabirka khariirada oo ah 2 cm: 6 km hada aynu fududayno qiimaha dhererka warqada dusheeda . markaas , 1km ee warqada dusheedaa ahi wuxuu u taagan yahay 3 km oo dhulka ah




Tusaale:

2 cm : 6 km

1 cm : 3 km



## Hawl-galka 2.6


1 Ka soo qaad dhererka u dhexeeya laba meelood oo khariidada dusheeda oo ah 6 cm iyo fogaanta dhulka dushiisa oo ah 70 km . muxuu noqon doonaa qiyaas cabbirka khariiradu?

2 Ka soo qaad fogaanta u dhaxaysa gurigiina iyo dugsigu in ay isu jiraan 2 km oo xariiq toosan ah. Markii aad doonaysid in aad ku muujiso ama ku tilmaantid khariirad fudud ama gacan ku samays ah isla laba barood oo u taagan gurigiina iyo dugsiga oo isku jira. Muxuu noqon doonaa qiyaas-cabbirka khariidadu?

## 2.3.2 Hababka lagu muujiyo cabbir - qiyaaseedka


Sidee baa qiyaas cabirka loogu muujiyaa khariirad ? waxaa loogu muujin karaa saddexdan hab ee kala duwan:

1. Weedh ahaan – tusaalaha aynu sare ku soo xusnay qiyaas-cabbir weedheedku waa hal sentimeter oo u dhigma saddex kiiloomitir
2. U taagan jajabka (T.J) – tusaalaha sare 1/300000 ama 1: 300000 waa saamiga u dhexeeya dhererka khariidada dhusheeda iyo fogaanta dhulka. sikasta ha ahaatee kuwa jajabka u taagan waxaa sida caadiga ah lagu sheegaa saami ahaan sidan 1:300000 kani waa tusaalaha qiyaas cabbirkan, waa inaad xusuusnaataan in halbeeg lagu cabbiro khariirada dusheedu uu la mid yahay ka oogada dhulka. taas waxay ka dhigan tahay 1cm oo oogada khariidada dusheeda ah oo u taagan 300 000 cm oo oogada dhulka ah.
3. Cabbirka giraafka (qiyaas- xariiqeed) waxaa lagu muujiyaa xariiqo ama gabaloo yar yar oo afar gees leh oo loo qayb qaybiyay boosas in is le’eg isu jira




**Jaantuska 2.24: qiyaas – cabbirka – Giraafka**

Cabbirka garaafku faaiidada ka badan kuwa kale ee uu leeyahay waa taas oo ay suurogal tahay in si toos ah loogu cabiro fogaamada iyada oo la deegsanayo mastarad ama xadhiga gelitaan la ‘aan xisaabeed




## 2.3.3 Isku-bedelka cabbir qiyaaseedka

Mar marka qaarkood waxay noqotaa lagama maarmaan in loo bedelo hal qaab oo qiyaas cabbirka khariidad qaab kale – weedh cabbir-qiyaaseed loo bedelo kuwa

u taagan jajabka ama cabbirka garaafka; T.J loo bedelo weedh cabbir -qiyaaseed ama cabbirka garafka: cabbirka garaafka oo loo bedelo T.J ama weedh cabbir-qiyaaseed.

a Sida qiyaas weedheed loogu bedelo T.J ?

Tusaale 1: 1 cm : 10 km

Markaa hore halbeega dhulka ee 10 km u bedel cm

$$1 \text{ km} = 100000 \text{ cm}$$

$$\frac{1 \text{ cm}}{\text{cm}} : \frac{10 \times 100{,}000 \text{ cm}}{\text{cm}}$$

T.J 1: 1,000,000

b Sida T.J loogu bedelo Q.W?

Tusaale 2: 1 : 300000

kani waxaa laga wadaa (la micano tahay) 1 cm oo oogada khariidada oo u taagan 300,000 cm oo oogada dhulka ah marka hore 300,000 cm u bedel km

$$\frac{300{,}000}{100{,}000} = 3 \text{ km} \Rightarrow 1 \text{ cm} = 3 \text{ km}$$


c Sida T.J iyo Q.W loogu bedelo cabbirka garaafka?

Tusaale 3: dhis cabbirka garaafka T.J – 1: 4000 000

Marka hore u bedel Q. W

$$1 \text{ cm} : \frac{40{,}00{,}000}{100{,}000} = 40 \text{ km} \Rightarrow 1 \text{ cm} : 40 \text{ km}$$

Adiga oo adeegsanaya mastarad u xariiq dherer kasta oo gaadhaya- 8 cm una kala qaybi afar qaybood sidaa hoos ku muujisan







## Hawl-galka 2.7

1 U bedel qiyaas weedheed kan T.J – hal sentimitir oo uu dhiganta Todoba kiiloomitir?

2 U bedel kuwa jajabka u taagan (T.J) Qiyaas weedheed hadii Q.C. khariiradu yahay 1:900?

## 2.3.4 Raadinta fogaanta dhuleed Ee khariirada




*Q. Cabbir 1 cm : 5 km*

Waxaa lagu waydiiyay in ad heshid fogaanta u dhaxaysa baraha “S”iyo “T ” Q.C. khariidadu waa 1 cm : 5 km dhererka u dhexeeya “S ” iyo “T ” waa 3 cm

*Xusuusnow:*

$$\text{fogaanta dhulka} = \frac{\text{dhererka oogada khariidada}}{\text{Qiyaas Cabbirka}}$$

$$\text{Markaa: fogaanta dhulka} = \frac{3 \text{ cm}}{1 \text{ cm}} \times 5 \text{ km} = 15 \text{ km}$$

fogaanta u dhaxaysa “S ” iyo “ T ” waa 15 km



### Hawl-galka 2.8


1 Dhererka u dhexeeya laba meelood oo khariidada dusheeda ah 10 cm Q.C khariidaduna yahay 1:2000 000 raadi fogaanta dhabta ah ee dhulka?

2 Ka qaado khariidad Atlaska kadibna cabbir dhererka u dhexeeya labo magaalo oo kasta. Raadi fogaantooda adiga oo adeegsanaya qiyaas cabbirka khariidada isku day inaad samayso layliyo badan oo la mid ah.

## 2.3.5 Raadinta bedka Qaab – same

Markii la xisaabinayo ama laga shaqaynayo bedka qaab-same , marka hore dhererada khariidada waa in loo bedelaa fogaamada dhulka.

b Raadi bedka qaab same dhisme dugsi marka hore, adeegso qiyaas cabbirka, u bedel dhererka 11 cm iyo ballaca 9 cm Fogaanta dhabta ah ee dhulka ( mitiro ahaan )




Fur furis

Dherer: $\dfrac{11\text{ cm}}{1\text{ cm}/7,000\text{ cm}} = \dfrac{11\text{ cm}}{1\text{ cm}} \times 7,000\text{ cm} = 77000\text{ cm} = 770\text{ mitir}$

Ballac: $\dfrac{9\text{ cm}}{1\text{ cm}/7,000\text{ cm}} = \dfrac{9\text{ cm}}{1\text{ cm}} \times 7,000\text{ cm} = 63000\text{ cm} = 630\text{ mitir}$

bedka dhabta ah ee Dugsigu waa 770 m x 630 m = 485100 $m^2$

t Raadi bedka kayn qaabkeedu sadex-xagal yahayn ugu horay adiga oo adeegsanaya qiyaas cabbirka, u bedela dhinacyada-joog 8 cm iyo salka 6 cm fogaanta dhabta ah ee dhulka (kiiloo mitir ahaan)


**Fur furis:**

Joog: $\dfrac{8\text{ cm}}{1\text{ cm}/40,000\text{ cm}} = \dfrac{8\text{ cm}}{1\text{ cm}} \times 40,000\text{ cm}$

$= \left(\dfrac{320,000\text{ cm}}{100,000\text{ cm}}\right)\text{km} = 3.2\text{ km}$

Salka: $\dfrac{6\text{ cm}}{1\text{ cm}/40,000\text{ cm}} = \dfrac{6\text{ cm}}{1\text{ cm}} \times 40,000\text{ cm}$

$= \left(\dfrac{240,000\text{ cm}}{100,000\text{ cm}}\right)\text{km} = 2.4\text{ km}$




Bedka sadex-xagalka waa ½ (JXS) bedka dhabta ee kaynta saddex- xaglka ahi waa ½ ( 2.3 km × 2.4 m ) = ½ (7.68 $km^2$) = 3.84 $km^2$

j Raadi bedka haro qaabkeedu goobo yahay, ugu horay qiyaas cabirka adeegso una bedel goobada uu gacankeedu yahay 12 cm fogaanta dhabta ah ee dhulka (halkana sidoo kale kiiloomitir jawaabta ku sheeg)

Fur furis

$$\text{Gacanka goobada} = \frac{12\text{ cm}}{1\text{ cm}/40{,}000\text{ cm}}$$

$$= \frac{12\text{ cm}}{1\text{ cm}} \times 40{,}000\text{ cm}$$

$$= \left(\frac{480{,}000\text{ cm}}{100{,}000\text{ cm}}\right)\text{km} = 4.8\text{ km}$$




Bedka goobo waa $A = \pi r^2$

$$\frac{22}{7} \times (4.8\text{ km})^2 = \frac{22}{7} \times 23.04\text{ km}^2 = 7.2\text{ km}^2$$

Bedka dhabta ee haradu waa 72.4 $\text{km}^2$



## Hawl-galka 2.9

1 Ka soo qaad in lagu siiyay khariidaada beer aad u wayn. Oo uu dhererkeedu yahay 8 cm balaceeduna 6 cm . haddii uu qiyaas cabbirka khariidadu yahay 1:5000 muxuu noqonayaa bedka dhulka ee beertu?

2 Khariidada dusheed dhererka iyo balaca Qaballee (xaafad) ayaa wuxuu le'egyahay dhererka iyo balaca bogga buuggaaga daabacan. Raadi haddaba bedka dhabta ah ee xaafada hadii qiyaas cabbirka khariidada lagu siiyay tahay 1:3000?

## 2.3.6 Isbar-bar Dhigida Qiyaas Cabbireedyada


Waxaa jira laba nooc oo khariidadaha qiyaas cabbirkoodu ku xiran yahay

1 ***Qiyaas Cabbirka khariirad wayn:*** waa midka bedka khariiradu aad u wayn yahay oo daboolaya ilaa xad bedka waddan yar wuxuuna ku tusaa faahfaahinta warbixino badan. Tusaale: Q.C.Kh: 1:20000.


2 ***Qiyaas Cabbirka khariirad yar:*** waa mida bedka khariidadu aad u yar yahay oo daboolaya ilaa xad bedka waddan wayn wuxuuna ku tusaa faahfaahin kayar ama warbixin yar . tusaale Q.C.Kh 1:20 000 000

Fiiri khariidadaha soo socda ee isbar bar dhigida qiyaas cabbirka


Khariidada sare ee ku saabsan Qaybta magaalada addis Ababa Q.C.kh yahay 1:20,000. waxay Kutusaysaa waddooyinka, Meelaha la dhisay ee kore. Dhismayaasha muhiimka ah




Khariirada badhtamaha waa mid sidoo kale ku saabsan Addis Ababa oo Q.C.yahay 1:2 000 000. waxay ku tusaysaa halka ay dhacdo magaaladu iyo magaalooyinka ku xeeran ee ta xiriira




Khariirada hoose waa mid qiyaas cabbrikeedu yahay 1: 20 000 000. Waxay ku tusaysaa halka ay dhacdo Addis Ababa magaalada caasimada ah oo lagu xiriiriyay baaxada wadanka




Jaantuska 2.25:

## Hawl-galka 2.10



1 Raadi buuga wayn ee atlaska hubi qiyaas cabbireedyada lagugu siiyay waddan isku mid ah ama qaarad boggaga kale duwan?

2 Ka soo qaado khariidada Itoobiya (Jaantuska 2.25) ee qiyaas cabbireedyada kala duwan ku tusinaya. Is barbar dhig xogtooda (faah faah intooda)?

# GUNAANADKA CUTUBKA

- Quwadaha ka yimaada gudaha dhulka waa kuwa masuuka ka ah samaysanka qaababka ugu waawayn ee berriga oogada sare ee dhulka.
- Dhul-gariirku wuxuu ka dhici karaa meel kasta oo dunida ah. Laakiin waxay caan ku yihiin qaybo yar.
- Dhul gariirada iyo foolkaaneyaashu labadaba dalkeenan itoobiya caan bay ka yihiin.
- Ugu badnaan dhamaam buuraha ugu dhaadheer ee qaaradaha kala duwan marka laga reebo buuraha dhaadheer ee Afrika waa kuwo ka samaysmay laalaabka.
- Dooxada Rifti waxay asal ahaanka samaysantay dildilaaca ee ma aha carro-guur webi.
- Guud ahaan carro-guurku waa meelaha hoose ee dhulka ka sareeya halka bacaadsaarku ku ka yahay meelaha ka yara kacsan.
- Caro-guurka ugu wayn ee webigu wuxuu ka dhacaa biyo- shubka sare, raritaankuna biyo shubka hoose ayuu ka dhacaa.
- Qiyaas cabir waa habab u taagan fogaanta dhulka oo ay weheliyaan dhererka oogada khariirada.
- Q.C. khariidad waxaa lagu sheegi karaa Q.weedheed, kuwo u taagan jajabka iyo cabirka garaafka.
- Markii la raadinayo fogaanta u dhaxaysa laba meelood ama la xisaabinayo bedka goob , marka hore dhererada oogada khariidada waa in loo bedelaa fogaanta dhulka.
- Khariirada Q.cabirka wayn waa ta bedka dhulka ay metalaysaa yar yahay oo ay ku tnsinayso in baaxada warqada ka wayn yahay, laakiin qiyaass caabirka khariirada uu yar yahay waa ta uu wayn yahay bedka fogaanta dhulka oo ku tusinaysa in baaxada warqadu ka yar tahay.

# LAYLISKA GUUD EE CUTUBKA

## I *Run ama been ku qor*

1 Waxaa jira had iyo jeer oo keliya quwadaha gudaha ee ka dhaqdhaqaaq lakabka sare ee dhuka.

2 Dhulgriirku waa god dhulka lakabkiisa sare ku dhex jira oo ay ka soo tuuraan laafaha.

3 Dhulka ku xeeran xeebaha B/waynta baasifiga waxaa loo yaqaanaa "silslada dabka"

4 Himalaya, Alibis, Rokis iyo Endhis waa tusaalaha ugu fiican ee buuraha laalaabka.

5 Adeegsiga cabbirka garaafka maaha mid ka faaiido badan labada nooc ee kale.

## II *Buuxi meelaha bannaan*

1 Laxaadka dhul gariirka waxaa lagu cabiraa qiyaasta ____________.

2 Hadii dhulka u dhexeeya labada dildilaac uu hoos u quuso waxaa ka samaysma ____________.

3 ____________ waa marka dhagxaanta ay u kala firdhaan ama burburaan ee ay ugu wacan tahay quwadaha duleed iyo kiimikaad

4 Folkaanaha Itoobiya waxaa loo yaqaanaa " Folkaanaha aan seexanin " waa ____________ ____________ ____________.

5 ____________ waa hababka u taagan fogaanta oogada dhulka oo ay weheliyaan dhererka oogada khariiradu

## III *Jawaabo kooban ka bixi*

1 Magacow sadex suun ee ugu waawayn ee caanka ah ee dhulgariirada ?

2 Sharax faaiidada folkaanaha?

3 Sharax muuqaalada ugu muhiimsan ee dooxada wayn ee Rifti ee ka timaada Waqooyi ee u socota Koonfur?


4 Faahfaahi sida ay dhuxul dhagaxdu u samaysanto?

5 Sharax dabeecadaha saddaxda biyo shub ee webiga Abay (Niilka buluuga ah) laga bilaabo ishiisa ilaa Afkiisa?

## IV *Hawl khariiradeed*

Tiradee baa ku jirta khariirada jaantuska 2.26 ee u taagan halka ay dhacaan muqaaladan muhiimka ah ee soo socda ee Itoobiya

- *Suufi cumar (godka dhagaxa dhanaan)*
- *Webiga Abay*
- *Eriyaale (folkaanaha firfircoon)*
- *Haraha dooxada Rift*
- *Biyo shubka hoose ee webiga Awash*
- *Buurta Sequwaala (folkaanaha hurda)*
- *Carro-guurka waa mid firfircoon oo ay dabayluhu dhaliyaan*
- *Tis issat (biyo dhaca ugu caansan).*




Jaantuska 2.26: Muuqaalada muhiimka ah ee Itoobiya

## VI *Gacan-ka-qabad Ficil ku Muujin*

1 Raadi Atlaska Itoobiya kana shaqee layliyada xisaabinta fogaanta dhulka ee u dhaxaysa laba magaalo?

2 cabbir baaxada gurigaaga sawirna khariirad warqad ah . kuna muuji Q. cabbir aad xulatay.

CUTUBKA 3

# SAAMEYNTA AADAMUHU KU LEEYAHAY GEYIGA



## Ujeedooyinka Cutubka

***Marka uu dhamaado cutubkani kadib ardaydu waxay a woodi doonaan in ay:***

- Sharaxaan sababaha dhaliya iyo natiijooyinka ama cawaaqibka ka dhasha dhibaataynta khayraadka dabiiciga ah;
- Aqoonsadaan wasakhaynada ugu waawayn iyo falalka ka hortegidooda;
- Garwaaqsadaan sababaha iyo saamaynada aduunyo kululaanshaha.

## Tusmooyinka ugu Muhiimsan

**3.1** XIDHIIDHKA UU AADMIGU LA LEEYAHAY KHEYRAADKA DABIICIGA

**3.2** SABABAHA IYO SAAMEYNTA KULULAANSHAHA DUNIDA

- *Gunaanadka Cutubka*
- *Layliska Guud ee cutubka*

# 3.1 XIDHIIDHKA AADAMIGU LA LEEYAHAY KHAYRAADKA DABIICIGA

## 3.1.1 Tamarta iyo Geyiga

**Ereyada Furaha u ah Casharka**

- Geyiga
- Kheyraadka Debiiciga
- Wasakhawga (diqawga)
- Dhir xaalufin
- Ubaxley
- Kululaanshaha Dunida
- Carro guurka
- Osoon
- Biio
- Xayawaan deegaan u gaar ah Ku nool
- Waxyeelaynta deegaan Ahaaneed
- Khayraadyka la cusboonaysiin karo
- Kheyraadka aan la cusboonaysiin karin

## HORDHACA

- *maxaad ka baratay barashada geyiga?*
- *waa maxay geyigu?*
- *sharaxaad ka bixi waxyaabaha muhiimka ah ee laga helo geyiga?*
- *dhirta iyo xayawaanku miyey isku haleeyaan (ku tiirsan yihiin) deegaanka kuxeeran?*
- *Fasalkii hore waxaynu ku soo baranay waxyaabaha laga helo deegaanka inagu xeeran, iyo xayawaanku waxyaabaha ay u baahan yihiin waxaa ka mid ah: biyaha , hawada, cunnada, ilayska cadceedda i.w.m.*

Nooluhu wuxuu ku tiirsan yahay deegaankiisa oo uu ka raadsado dhamaan baahidiisa, dhanka kalena, nooluhu wuxuu saamayn weyn ku keenaa xaaladaha deegaanka ku xeeran.

| Tusaale 1 | Tusaale 2 |
|---|---|
| Saamiga footoo sintasiska Waa saameya dhirta xaddiga ilays ee soo gaaraya korintaanka dhirta cagaaran. | xayawaanka duur joogta ah waxaa dhici karta inay gaajo u dhintaan hadii dhirtii ay caadiga ahayd ee ay quudanayeen diciifmaan (fashilmaan) sababaha qaarkood). |

- *laanta Baayoo-Juqraafiga – waa barashada waxyaalaha ku kala filiqsan ama ku kala baahsan ee dhirta iyo xayawaanka iyo xiriirka ay la leeyihiin deegaankooda oo loo yaqaano barashada geyiga.*
- *dhirta iyo xayawaanku waxay u nool yihiin kooxd.*
- *Laamaha Baayoo-Juqraafiga.*

Dhirtu sida Aadamiga iyo xayawaanada kale ayay u nool yihiin bulshooyin. Bulshooyinka dhamaan noocyada kala duwan ee dhirtu waa kuwo u sida: heerkulka, roobda'a, Nooca carrada, I.W.M.

Bulshada dhirtu waa isha koowad ee aas'aasiga ah ee ay quutaan bulshada xayawaanku kuwaas oo laga helo deegaamo kala duwan. Bulshada xayawaanka ah waxaa dhexdooda ka jirta is-quudasho.


Halkaasna waxaa loogu magacdaray isha labaad. Bulshooyinka dhirta iyo xayawaanku labaduba waxay sameeyaan biio. Biiooyinka kuwa ugu muhiimsan ee laga aqoonsan yahay dunda waxaa ka mid ah:


- *Bii'ada kaymaha,*
- *Bii'ada safaanaha,*
- *Bii'ada dhul-cawseedka*
- *Bii'ada lama-degaanka iyo*
- *Bii'ada Tundraha*

Geeduhu  waa, kuwa sida caadiga ah sameeya nolosha biiada kaymaha, biio kastaa waxay goaamisaa nolosha dhirtooda in ka badan nolosha xayawaankooda tani waa mid ka mid ah sababaha ugu muliimsan ee ay culimada ku takhasustay barashada geyigu biiooyinka ugu kala kooxeeyaan, una kala saaraan guuda ahaan Afar. Biio kasta waxaynu ka heli bulshooyin baad iyo xayawaan ah meel Kasta oo ka mid ah deegaanka.


bii'ada kaymaha caleemaha baadhan ee dhul badhaha


bii'ada dhul cawseedka loolasha dhexe


biiada lama degaanka


biiada Tundiraha

**Jaantuska 3.1: Muuqaalo (sawiro) u taagan bii'ooyinka kala duwan ee dunida**



## Hawl-galka 3.1

1 Qeex kelmadahan soo socda
   a Biio
   b Barashada geyiga
   c Culimada ku takhasustay barashada geyiga
   d Bulshada dhirta
2 Xagee baa laga helaa baadka kaymaha rooban ee dhulbadhaha?
3 Fiiri afarta jaantus ee biiooyinka adiga oo faahfaahinaya kala duwanaan shahooda?
4 Biio kastaa malaha nooc clmilo oo isku mid ah. Waayo ? si xog waran leh u faahfaahi.

### Bartilmaameed

Khayraadyada Dabiiciga ah waa kuwo dhamaantood lagama maarmaan u ah nolosha aadamiga iyo ilbaxnimada, taas oo u leh qiimayaal mid shaqsi ahaaneed iyo mid bulsho ahaaneedba. Khayraadyada dabiiciga ah waxaa ka mid ah: biyaha, carrada, hawada, baadka, xayawaanka iyo macadanta.



## Hawl-galka 3.2

1 Kuweebaa khayraadyada soo socda ah kuwa dib loo cusboonaysiin karo ee kheyraadyada: kaymaha, biyaha ku jira baliyada ama berkadaha, xayawaanka, gaaska dabiiciga ah dhadhaababaha macadanta birta, cufka hawada?

2 Sidee baynu dib ugu cusboonaysiin karnaa khayraadyada kadib marka aynu isticmaalo: faahfaahi adiga oo tusaaleyaal ka bixinaya.

Khayraadyada dabiiciga waxaa loo kala qaybiyaa laba qaybood oo aad u waawayn

i Khayraadyada la cusboonaysiin karo

ii Khayraadyada aan la cusboonaysiin karin

i ***Khayraayada la cusboonaysiin karo:*** waa kuwaan la yarayn karin ama aan la dhamayn karin , baadka iyo xayawaanka oo ah kuwo loo kooxayn karo wadanka ama deegaanka laga helo ee ay khayraadkani hoos tagaan. kheyraadyada kale ee dib loo cusboonaysiin karo waxaa ka mid ah: hawada iyo biyaha oo iyagu ah kuwo aan la yarayn karin ama aan la dhamayn karin loona yaqaano iskood isu cusboonaysiiyeyaal ama si ka fiican oo degan ka sii socda.


Farqiga ka dhexeeya kuwa la cusboonaysiin karo iyo kuwa aan la cusboonaysiin karin ee khayraadyadu waa kuwa la cusboonaysiin karo oo ah kuwo ku xiran meertooyin (Tusaale: ogsajiinta, kaarboonka iyo meertooyinka haydaroojiineed oo la barabixin karo)


ii ***Khayraadyada aan dib loo cusboonaysiin karin:*** waa waxayaalaha (Agabka) waxtarka leh ee laga helo gudaha lakabka ama qolofka sare ee dhulka, kheyraadyadan waxaa ka mid ah:

- *Shidaalka (batroolka, gaaska dabiiciga, dhuxul dhagaxda I.W.M)*
- *Macdanta biraha iyo walxaha bir-ma ahayaasha sida (camuuda, jayga salfar, birta, dahabka dhoobada ah I.W.M)*

Khayraadyada aan dib loo cusboonaysiin karin waa kheyraadyada xadaysan ee aan dib loo dhalin (abuuri) karin mark kale ee ay isticmaalaan bini-aadamku waqti qiyaasan (go’an).

Fiiri jaantuska soo socda si aad si qoto dheer ugu fahamtaan.




**Jaantuska 3.2: khayraadyada dib loo cusboonaysiin karo iyo kuwa aan dib loo cusboonaysiin karin**



## Hawl-galka 3.3

1 u kala saar mid kasta oo kamid ah khayraadyadan soo socda kuwo la cusboonaysiin karo iyo ku wo aan la cusboonaysiin karin

- ◊ Dheeman
- ◊ Geed rabadh iyo saliidba leh
- ◊ Carrada nafaqada leh
- ◊ Shimbiraha
- ◊ Dhagax
- ◊ Dhagaxa dhanaan
- ◊ Xayawaanka lama degaanka
- ◊ Kaluunka

2 *Isbedel*: wakhtigu ma ka qayb qaataa go'aaminta khayraad kasta in dib loo cusboonaysiiyo habka loo kala saaray?

3 Faahftaahi habka ugu fiican ee ay kula tahay in lagu daryeeli karo mid kasta khayraadyadan soo socda ka mid ah.

- b Batroolka
- j Hawada
- t Biyaha
- x Baadka

4 sheeg khayraadyada laga helo deegaankiina?

# 3.1.2 Saamaynta Aadamigu ku leeyahay kaymaha Dabiiciga ah

## Kaymaha


- *Waa maxay kaymuhu ?*
- *Dagaankiina ma laga helayaa (ma kajiraa) kaymo ?*
- *Maxaa loo adeegsadaa kaymaha ?*
- *maxaa ku dhici lahaa Aadamiga iyo xayawaan ka kaleba hadii ayna kaymuhu jiri lahayn?*
- *Maxaa ku dhici kara aadamiga iyo kayntaba haddii aanay jirin kaymuhu?*

***Kayn:*** waa goob aad u wayn oo ka mid ah berriga oo ay geedo ku shareeran (hagoogan) yihiin iyo dhir kaleba, sida caadiga ahna way ka wayn yhiin alwaaxa ama geedaha iyo dhirta laftigoodaba.

***Jiidda laga helo kaymaha:*** waa nooc ka mid ah dhirta dabiiciga ah oo laga helo deegaanka dabiiciga ah oo si wada jira u sameeya kaymaha geyiga. Ahmiyada ay kaymuhu u leeyihiin geyiga geedaha iyo dhirta kale (oo uu ku jiro cawsku) waxay ka baxaan biiada loo yaqaano Biiada kaymaha, dhamaantaoodna waa dhir cagaaran oo soo saari karta cunno ay ku samaysato habka loo yaqaano footoosintesis. Dhirtu iyada uun baa soo saarata cuntadeeda waxaana loo yaqaanaa soo saarayaal. Xayawaanku waxay u quutaan si toos ah dhirtaan waxaana loo yaqaanaa quutayaal. Tusaale: Dameer Farrowga, Sac , Ri , Golcasta

Niyaalaha, waaliyada, aboorka cayayaanka qolofta adag leh I.W.M xayawaanka quuta. quutayaasha koowaad waa heerka saddexaad ee quutayaasha Tusaale: -shimbiraha geedaha garaaca waxay quutaan cayayaanada qolofta leh waxaana loo yaqaanaa quutayaasha labaad. Xidhiidhkan ayaa loo yaqaanaa shebekeda cuntada (silsilada cuntada)

Xusuusnow: Marka ay quutayaashu dhintaan nooleyaal yaryar oo kale (baakteeriyada) ayaa qudhmiya hadhaagooda una barabixiyaan nafaqadoodi carrada. Waxyaabahan qudhmay waxay isu bedelaan oo adeegsada dhirta cagaaran. kaymuhu waxay dheelitiraan geyiga oo ka kooban soosaareyaasha iyo quutayaasha iyo soo saareyaasha labaduba midba midka kala ayuu calaamado saxda u yahay isu dheelitirka geyiga.




Jaantuska 3.3: shebekada cunada ee kaymaha geyiga

Aadamigu wuxuu maamuli karaa dhirta iyo xayawaanka labadaba isaga oo ay u yihiin waxtarkiisa, maxaa yeelay Aadamigu ma noolaan karayo dhirta iyo xayawaanka la'aantood. Wuxuu hoos tagaa si lamid ah xeerarka Abuuritaanka marka ay kuwa kale yihiin qaababka noolayaasha. dhibaatooyinka deegaankana waa mid uu sababay falalka aadmigu ku dhaqmayo waana kuwo gebi ahaanba saamayn kara geyiga oo khalkhalin kara isu dheelitirkii abuuraneyaasha.



## Hawl-galka 3.4

1 Habee kuwan soo socda adiga oo u eegaya booskooda ay kaga jiraan shebekada cuntada
   ◊ Caws libaax, bakayle , qalami
2 Ku qeex ereyo aad is ku leedahay
3 sharax sida xeerarka barashada geyiga loogu dabaqo aadmiga iyo xataa noolayaasha kalaba?
4 Sheeg saddex tusaale oo ku saabsan sida u aadmigu uu waxyeelo deegaankiisa?

Guud ahaan markii aynu magacawnay raadreebka aadmiga ee deegaanka dabiiciga ah oo guud ahaan ah iyo kaymaha oo gaar ahaan ah. Waa baabiinta (burburinta) saamayntaas oo loo tixgeliyay.

Sidaa awgeed carqalad kasta oo deegaanka ah oo leh go'aanka saamaynta geyiga dushiisa. si kastaba ha noqotee suurogal ma aha inaanay aadmigu fara gelin waxyaabaha aan dabiiciga (rabaaniga) ahayn ee ku dhex jira dhaqdhaqaaqyada dabiiciga ah ee deegaanka ka jira waxa saameeyay deegaan ka faaiidaysiga aadamaha ee joogtada ah.

Waxaana la aaminsanyahay inay ugu wacan tahay dhaqdhaaqaaqa aadamiga ee faragelinta tooska ah ku haya deegaanka oo ay ka dhalatay waxyeelaynta kharibaada deegaanku aadamiga faragelintiisu aad ayay u fara badan tahay waxaynu ku soo koobi karnaa sidan soo socota:

## Dhir-xaaluf

- *Waa maxay sababta ay dadku sida khaldan ugu adeegsadaan kaymaha?*
- *Waa maxay kaalinta kaymuhu ay ka qaataan geeyiga ?*
- *sheeg faaiidooyinka kaymaha ?*

Koriinka dhaqsaha ah ee tirada dadka iyo baahida walxaha dabiiciga ah ee cadaadiska kordhaya lagu hayo kheyraadka kaymaha ee aan weligood koraynin-dhibaatooyinka ugu badan ee halista ahi waa yaraanshaha goobihii ay kaynuhu ku hagoognaayeen. Tusaale ahaan: wakhtigan xaadirka ah goobihii dhirta lahaa ee dalkeenan Itoobiya wadartoodu waa 2.5 ilaa 3 % oo ka mid ah wadarta guud ee dhulka yaraynta iyo ka hortegida dhibaatooyinka dhulka kaymaha haysta, waxaan ka badan halista waddamada soo koraya halkaaso ay dadka intooda ugu badani ku dadaalayaan hawlaha beeraha.

Koriinka dhaqshaha ee tirada dadka waxay u baahan yihiin cadad aad u balaadhan oo waxsoo saar dalagyada cunada ah dalabkani waa baahida aan sina loo joojin karin ee loo qabo goobo badan oo dhulka kamid ah oo wax laga beerto. Baahida dhulbeereedyo badan oo la sameeyo waxay u hogaamisay in la banneeyo kaymaha si loo gu daro dhul beereedyo.

Waxaan dhibaatada dhir-xaalufku sababto tusale ugu soo qaadan karnaa dalka Buurkiina Faaso oo cadaadiska dadka iyo duunyada (xoolaha la dhaqdo) iyo waliba habka dhaqameedka qadiimiga ah ee beer qodaalku ay sababeen baaba' keymaha. Daaqsinta xad- dhaafka ah iyo beeritaanka saaidka ah ee dhulka waxay u horseeday baabiinta dheelitirkii carrada ee geyiahaaneed. Marka dhulka dhirta laga xaalufiyo ee ay xad- dhaafka noqoto daaqsiintu waxay daaha ka qaadi doontaa masiiba nabaadguur oo carrada ah.



Jaantuska 3.4: Waxyeelada ba'an ee dhir xaalufinta sababtay carro-guurka

## Sheeko gaaban

### Hab-qodaal-dhaqameedka iyo Jarida kaymaha Amasoon.

Saxanka webiga Amaasoon waa gobolka ugu kaymaha cufan dunida. Kaymaha saxanka Amaasoon waayahan dambeba waa kuwo ka sii daraya oo ay ugu wacan tahay arimo badan. Kaymahan waxa ka mid ah kaymaha rooban ee kulaalayaasha kale kuwaasoo u muuqda iyaguna sila mid ah kuwan. Caddad aad u wayn kaarboon laba ogsaydh ah ee ay siidaayaan warshaduhu, baabuurtu gubashada, mishiinada, warshadaha dhaliya quwadaha kulka I.W.M oo wasakheeya Gibilka. Si kastaba ha noqotee, goobihii ay ku hagoognaayeen iyo cufnaantii kaymahaan oo ka sii daraya wakhti ilaa wakhti oo ay ugu wacan tahay saamaynta Aadmiga oo ay sababeen danaha dhaqaale ee kala duwan midka ugu wayn ee sababa dhir xaalufka waa qodaalka is bedbedalaya ee ay dadyawgu caanka ku yihiin kuwaas oo ay habnololeedkoodu ku xiran yahay soo saarida geedo ubax badan , geedo xidido waa wayn, baradhaha macaan. Beeralaydu baddanaa qodaalka dalagyada waxay u adeegsadaan hababka , jeexjeexida iyo gubitaanka noocyada ay ka midka yihiin hab qodaalka qadiimiga ah oo baabiiya kaymihii ku hagoognaa iyo dahaar ka qaadida carrada oo keentay masiibo carro–guur. Sidoo kale waxay saamaysay gebi ahaanba geyigii, baabiinta dhamayska tiran ee kaymahaan marka laysku daro alwaax soo saarayaasha iyo miro ka gurashada ama goosashada sharci darada ah ee kayamaha oo u keeni doonta is bedel cimilo oo aan weli la arag.

Saamaynta daran ee isbedelka cimiladan wuxuu noqon karaa, Roob-aysiidh, fatahaad, duufaano, abaar, gaajo, hawo iyo biyo wasakhow I.W.M

## Sheeko gaaban

### Daaqsinta-xad – dhaafka, carro guurka iyo fiditaanka lamadegaanka ee Bariga AfriKa

Gobalka Bariga Afrika waa mid dhaca ama ku yaalla qaybta Bari ee Afrika gobolkan oo ka kooban sagaal waddan oo ay tirada dadkoodu dhan tahay qiyaas dhan 283 milyan oo qof. Waddamada agu badan waa kuwan laga helo gobolka saaxil kaas oo fidsan laga bilaabo Sinigaal oo dhinaca galbeed ah ilaa soomaaliya oo dhinaca bari ah . gobolkan oo laga helo dacalada koonfureed ee lamadegaanka Saxaaraha waana gobolka ugu wada nugu abaaraha ee dunida fiditaanka. Lamadegaannku waa qodobka ugu muhimsan ee deegaan ahaaneed ee ay dunidu is la wada aragtay.

Fidsanaanta waxyaabaha dabiiciga ah sababta iyo saamaynada lama – degaanoobidu waxay noqotay mid la qariyay oo khilaaf ka taagan yahay. Lama degaanoobidu waa hababka uu ku samaysmo lama degaanku lama – degaanoobida waxaa sababba oo sare u qaada koritaanka aadamiga iyo tirada badan ee xayawaanka kaas oo sababa mudada dheer ee sannadaha abaarta. Aragti ahaanta gobolka saaxil waa waddamada ugu dayacan (baylahda badan)waxaa ka mid ah: Itoobiya , Eriteriya , Jabuuti, Kiiniya , Soomaaliya, Suudaan.

Dalka Itoobiya waxaa lagu qiyaasaa 1.2 bilyan oo mitriktan oo carro ah inay nabaad guurto si sannadle ah laga soo bilaabo dhulka jooga sare leh gobollada ay 60 % ka qaadeen caradii dhul beereedyada. Kaymihii ku shareernaa goob lagu siiyay si toos ah iyo si dadbanba waxay ka tarjumaysaa heerka wax u dhimidda kheyraadka. Saamiga ugu wayn ee dhulka kaymaha leh hadii aan si kale u dhignana ka waxyeelayn yar khayraadk lidkeeduna waa la mid dhulka meelaha ay kaymihii ka soo yaraanayso oo ay ugu wacan tahay, ka faaaiidaysiga wax soo saar ee kaymaha oo ujeedooyin kala gedisan laga leeyahay. Dalkeenan Itoobiya waxa ay kaymuhu ku hagoognaayeen oo keliya 16% sanadkii 1950 kii hoosna ay u dhacday 3 % sanadihii 1990’ naadkii

### Raad-reebka Dhir-xaalufinta

dhirxaalufinta xad-dhaafka ahi wax ay keentaa:

- *Gabaabsiga xaabada/geedaha tamar (shidaal) ahaan loo isticmaalo.*
- *Qalalaan webiyada, togoga iyo durduraduba.*

- *Isbedelka dhinaca cimilada oo yar .*
- *Dhimitaanka iyo yaraanshaha noolayaasha (dhir iyo xayawaanka)*
- *Carro – guurka carrada ee sida aadka ah u daran kaas oo u bedelaya una horseedaya in uu hoos u dhaco dhulkii waxsoo sarka lahaa.*
- *Xayawaankii (duurjoogtii) oo ka carara sabadoodii.*

## 3.1.3 Wasakhowga Biyaha

***Maxay kala yihiin faaiidooyinka biyaha?***

***Waa maxay ujeedooyinka aad u isticmaashid biyaha?***

***Imisa litir oo biyo ah ayaad isticmaashaa maalikiiba?***

***Habkee bay biyuhu u wasakhoobaan?***

Biyuhu waa kheyraadka ugu qiimaha badan ee dhulka . Biyuhu waa dareere loo badeli karo kul noqda uumi iyo qabow. Biyuhu waxay muhiim u yihiin saddexdan ujeeddo ee aasaasiga ah:

- *Waxay laf-dhabar u yihiin nolosha dhulka dushiisa ka jirta, sida: dhirta laga helo deegaan ee sameeya baadka debiiciga ah (biiooyinka) iyo dalagyada. Iyo xayawaanka deegaan ku wada nool (dadkuna uu ka mid yahay)*
- *Biyuhu sida hawada oo kale ayay uumiga Atmosfeerka dhexdiisa dib u celiyaan oo kala firdhiyaan falaadhaha ka imaanaya qoraxda si heerkul lala qabsan karo.*
- *Qoyaanka Atmosfeerku (Gibilku) waa mid sidoo kale ahmiyad wayn ugu fadhiya meertada biyaha iyo ee.*

### Helitaanka Biyo Nadiif ah

- *Maxaa looga jeedaa biyo nadiif ah?*
- *Ma laga helaa dagaankiina biyo nadiif ah?*
- *Masaafo intee le'eg ayay bulshadu biyaha u doontaan habka isku bedelka si ay isugu dheeli tiraan tamarta badan ee kul laga bilaabo meelaha kulaaleyaasha ilaa meelaha cidhifyada?*
- *Ma jirtaa isu ekaansho ka dhexeeya biyaha nadiifta ah iyo kuwa aan nadiifta ahayn?*

**Bartilmaameed**

Xusuuso inta biyo ah ee aad isticmaashid maalintiiba . xaddiga ama cadadka biyo ee ay isticmaalaan dadku wuu kala duwan yahay min shaqsi ilaa shaqsi iyo min waddan ilaa waddan . xaddiga biyo ee la isticmaalay waxay ku xidhan tahay:

- *Helitaanka biyaha*
- *Siyaabaha loo heli karo biyaha*
- *Dakhli maalmeedka qof*
- *Dhaqanka*

Saadkeena biyuhu asal ahaan wuxuu ka yimid " Daray ( xareed ) " oo macnaheedu yahay in uu biyahani ka kooban yahay xoogaa macdano ah oo ah kuwa badbaadiya si loo cabo looguna beerto dalagyada. Sidaa darteed biyaha macaan waa biyo la cabi karo (nadiif ah) Biyaha nadiifta ah ee aynu isticmaalo runtii saafi ma aha.

## Sheeko gaaban

### Warshada sifaynta kiimikada ee Hindiya

Warshadaha sifaynta kiimikada waxay saamayn daran ku hayaan kheyraadka biyaha. Wasakhawga biyaha ee ay sababeen wasakhda kiimikaad oo ka dhiga biyaha kuwo aan ku haboonayn beeraha ( xoolo iyo dalagba ) iyo u adeegsiga warshadeed. Hadii ay biyuhu qaadaan suntan kiimikooyin ka ah ee loo isticmaalo ujeedoyin xaga waraabka ah walxihii sunta ahaa waxay geli karaan silsilada cuntada oo saamayn karta tirada dadka ee aadminimo. Tani waa naqshad caan ka ah dalka Hindiya. Warshadaha sifaynta ee kiillmikaad ee Hindiya, waxay sii daayaan hadhaaga kiimikaad oo ay ku daraan ( qubaan) biyaha webiga. Haddii biyuhu ay wasakhoobaan walxaha kiimikaad waxaa laga yaabaa inay galaan silsilada cuntada kadibana ay dilaan Aadamiga oo ay ku jiraan xayawaanka biyaha ku nool.

***Maxay kula tahay hadii hadhaaga kiimikada lagu shubo (qubo) biyaha wabiyada ay u saba baan cudurada iyo dhimashada dad badan?***

***Sidee baan ugu isticmaali karnaa biyaha wasakhoobay waraab ka beeraha?***



Jaantuska 3.5: biyo aan nadiif ahayn

Wasakhowga biyaha iyo daawaynta biyuhu waxay ka kooban yihiin macdano dhawr ah oo laga dhadhansan karo biyaha aan saafiga ahayn waxaana dhici karta inayna xoorka saabuunta oo kale lahayn. Qasabadaha ama tuubooyinka biyuhu waxaa laga yaabaa inay si degdeg ah u dhamaadaan dhibaatada ugu wayn ee ugu adag waa sida macaadinta biyaha ku milanta looga saarayo macdanta. Biyaha webiyada iyo haruhu ma noqon karaan kuwo ku haboon cabitaanka

*Waxaa laga yaabaa in ay noqdaan biyuhu:*

- *Kuwo ay baakteeriyo saamaysay*
- *Dhadhan xun leh*
- *Ur aad u daran leh*

Biyaha noocan ah waa in la nadiifiyo inta la isticmaalin ka hor . kanaalada biyo mareenada ugu badan ee magaaloyinka sida Addis Ababa waa kuwa ugu muhiimsan ee loo adeegsado goobaha qashin qubka. Suuliyada lagu xidhiidhiyay oo lehna nidaamyada wasakh ka qaadida ee ay qaadayaan kanaaladu iyo godadka bulaacaduhu.



Jaantuska 3.6: Qashinka lagu qubo deegaanka ee wasakheeya Biyaha

Biyaha badankoodu waxay kooban yhiin jeermisyada cudurada dilaaga ah. Caruurta iyo dadyawga masaakiinta ah kuwaas oo aan awaad u lahayn in ay helaan biyo daawo leh waxaana laga yaabaa in ay ka qaadaan cuduro markii ay ku maydhaan jidhkooda kuna dabaashaan kanaalada wasakhoobay. wasakheeyayaasha kale ee biyaha. Sida: laxaamada, maarta, kiimikooyinka I.W.M sidoo kalena sababa jeermisyada dhaliya cudurada sida: qoorgooye (tayfoodhka), cagaarshowga (jooniska), daacuunka I.W.M

Wasakheeyayaasha kale ee kanaalada ama biyo mareenada wasakheeya waa kiimikooyinka beeraha ee ay ka mid yihiin bacrimiyeyaasha (carro-nafaqeeyayaasha) iyo suntan cayayaanka beeraha.



## Hawl-galka 3.5

1. Tax ugu yaraan saddex biyo wasakheeyayaasha ka mid ah ?
2. Tilmaan ilaha ugu waawayn ee wasakhowga biyaha ?
3. Waa maxay dabeecadaha ay leeyihiin biyaha aan nadiifta ahayni ?
4. Sharax farqiga u dhexeeya biyaha nadiifta ah iyo biyaha aan nadiifta ahan ?
5. Sideebaad u saafiyayn lahayd biyaha wasakhoobay heer guri ahaaneed ?

Daryeelka Biyaha. Barnaamijka lagu daryeelayo biyaha waxaa lagama maarmaan ah in la qaato talaabooyinkan:

- *Hubinta wasakhoowga biyaha*
- *Hagaajinta tayada khayraadyada biyaha*
- *Daawaynta hantida biyaha wasakhoobay, waa in ay noqdaan hanta la daaweeyay .*
- *Baxnaaninta qabashada meelaha webiyada si looga difaaco ama ilaaliyo webiyada baaadka*
- *Diyaarinta berkedo ama harooyinka degitaanka taas oo aad awood u yeelan kartaan yaraynta bacaadka*
- *Daawaynta biyaha suntan leh dawlada hoose waxay gacan ka gaysan karaan yaraynta wasakheyayaasha noolaha ah*
- *Hubinta kiimiko ee biyaha wasakhaysan si looga daaweeyo dareeraha kiimikaad ka hor intaan la gelin harooyinka iyo biyo mareenada.*

## 3.1.4 Hawo-Dikhowga

### Wasakhowga hawada

***Maxay tahay waxyeelada inaga soo gaadhaysa dikhawga inagu xeeran?***

***Sidee bay hawadu u wasakhawdaa?***

***Xageebay hawo wasakheeyayaashu ka yimaadaan?***

Hawadu waa ta ugu ahmiyada wayn kheyraadka dabiiciga ah ee dhamaan qaababka nololeed. Xayawaanku waxay qaataan ogsajiinta waxayna sii daayaan (neefsadaan) kaar boon labaogsaydh. Dhanka kalana dhirtu waxay qaadataa kaarboon laba- ogsaydhka waxayna bixisaa ogsajiinta . hawadu waxay ka kooban tahay gaasas badan. Mid kastoo ka mid ah gaasas kaasi (neefahaasi) waxay fulisaa shaqooyinka aasaasiga ah ee geyi la ina siiyay. Hawadu runtii ma aha saafi dhulka dushiisa hawadu ugu yaraan waxay ka kooban tahay siigo (dhas) iyo qaar ka mid ah caynadaha kiimikaad ee wasakheeyaaasha. Qaraxyada foolkaane, dabka kaymaha IWM wasakhaynta hawada oo ay weheliyaan siigada , dambas iyo gaasas (neefo). Uuro waa sida ceeryaamo oo kale waana waskhaynta ay soosaaraan falgalada kiimiikaad ee ka dhexeeya falaaraha (shucaaca) cadceeda iyo nitric ogsaydh, salfar laba ogsaydh iyo haydro kaarboonisyada ku jira hawada.

Haydro-kaarbanadu waa isku-dhisyo ka kooban kaarboon iyo haydroojiin. Waxay inta badan ka yimaadaan gubashada dhuxul-dhagaxda, saliida iyo gaaska

dabiiciga ah. Waxaa intaa dheer oo iyana kaarboon laba ogsaydh, qiiq iyo uuro dambas ah ku siidaaya hawada, warshadaha, baabuurta iyo diyaaradaha. Gaaskan (neeftan) waa mid aad halis u ah oo dili karta dadka hadii ay aad u badato. Waxaa sanadkii 1952 dii u dhimatay dad ku dhaw 4000 oo qof oo ku noolaa magaalada Landan. Waxaa sidoo kale sanadkii 1953 dii u dhimatay inka badaa 200 oo qof oo ku noolayd magaalada Niyuu Yook.

## Baayooloji



Jaantuska 3.7: Dikhawga ka dhasha qaaca warshadaha



### Hawl-galka 3.6

1 Tilmaan hawo wasakheeyaasha faahfaahina saamaynta ay ku leeyihiin Aadamaha?
2 Xagee bay kula tahay diqowga ama wasakhowga hawadu in uu dhacdo khatar ah ku yahay ? waayo ?
3 Kaarboon la ogsaydhku wuxuu leeyahay saamayn taban (xun) iyo saamayn togan (fiican) labadaba. hadaba faahfaahi adiga oo tusaaleyaal ka bixinaya.
4 Sharax sida ay uuradu ku samaysanto?
5 Koox u falanqayn : falanqeeya faaiidooyinka iyo faaiido darooyinka (khasaaraha) warshadaha wax soo saara?
6 Weliba faaiidooyinkooda warshadaha waxsoosaara waa kuwa sida wayn u sababa noocyada kala duwan ee cudurada dadka u keena xanuunka hadii ay saas tahay miyaad ku raacsan tahay samaynta warshado aad u badan magaalada dhexdeeda? keena sababo.

# Roob – Aysiidheed

***Waa maxay roob-aysiidhku?***

***Sidee buu ku samaysmaa roobka aysiidhku?***

***Waa maxay saamaynta roob-aysiidheedku?***

Roob- aysiidheedka waxaa sameeya markii salfar dhaay ogsaydh, kaarboon dhaay ogsaydh ama naytrojiin dhaay ogsaydh ay ku darsamaan biyaha atmosfeerka (Gibilka) dhexdiisa. Xagee bay gaasaskan hawada wasakheeya ka yimaadaan?

Salfar dhaay ogsaydhka waxaa sii daaya warshadaha waa wayn kuwaas oo u adeegsada dhuxul – dhagaxda il tamareed. Gaaskani marka ay isutagaan biyaha roobka sameeyaana roob-aysiidheed. markii ay da'aan roobka aysiidha lihi xaga dhulkana soo gaadhaan, waxay khasaar (dhaawacyo) u geystaan kaymaha, dalagyada, carrada iyo dhismayaasha. Roob-aysii dheedka waxaa qaadi kara dabaylaha gobol ilaa gobol. Sidaa daraadeed saamaynta roob- aysiidheedku ma'aha qodob deegaan gaar ah. Waxay noqon karaan heer goboleed ama heer caalami oo ku xidhan fidsanaanta meelaha ay asiibaan.



Jaantuska 3.8: Roob-aysiidheed

## Ilaalinta hawada

Wasakhowga hawada waxaynu ku hubin karnaa qaadashada falalkan soo socda ee ugu muhiimsan. Wasakhaynta hawada waxaa lagu xakamayn karaa:

- *Ka hortaga ku sii daynta wasakheeyayaasha hawada ee adeegsiga qaboojiyeyaasha . qaboojiyeyaashu.*
- *Adeegsiga shidaalo aan deegaanka wax u dhimayn.*
- *Yaraynta duugoobida iyo dilaaca mishiinada hagaajinta iyo dayactirida mishiinada iyo saliidaynta oo dadaba (si aanay isu lisin) ilaa xad cadadka qurubyada biraha ah ee ku jira hawada.*
- *Adeegsiga sida ugu haboon ee shidaalka la sifeeyay lana saafiyeeyay ilaa heer aanay baabuurtu ku sii dayn karin kaarboon gaas (neef) ah oo in badan lagu qubo hawada.*
- *Adeegsiga sida ugu haboon ee tignoolajiyada iyo kiimikooyinka warshadaha ee aan wasakhaynayn deegaanka.*
- *Yaraynta cadadka qurubyada maatarka ee Atmosfeerka (Gibilka) dhexdiisa.*
- *Yaraynta sunta kiimikaad ee ay soo saaraan warshaduhu.*

# 3.1.5 wasakhaynta carrada

## Wasakhaynta carrada

***Maxaa dhaliya inay carradu wasakhawdo? Waa maxay saamaynta wasakhawga carrada? Waa noocyadee walxaha wasakheeya carrada?***

Maalmahan , dadka intiisa badan waxay isticmaalaan waxyaalo ka samaysan caaga iyo kiimikaalka . ka fikirka shandadaha caaga ahi iyo agabka ama alaabooyinka ka samaysan caaga kuwaasoo ay dadku u isticmaalaan guryahooda magaalada. Waxayna aalaaba isaga tuuraan dibada kadib markii ay u isticmaaleen siyaabo kala geedisan.

***Waa maxay saamaynta ugu daran ee ay waxyaabaha kasamaysan caaga iyo kiimikaalka ay leeyihiin?***

Kiimikooyinka waxaynu u adeegsanaa inaynu ku maydhno oogada jidhkeena iyo dharka, in lagaga ilaasho dalagyada beeraha cayayaanka iyo haramaha waxaa jira in ka badan 1000 kiimiko oo la keeno Itoobiya. Tani waad qiyaasi karta inta kiimiko ee loo rabo carrada.

***Ma magacaabi kartaa qaar ka mid ah kiimikaaliska ay soo saaraan warshadaha Itoobiya?***

Markii waxyaabaha caaga iyo kiimikaaliska ay soo saaraan warshaduhu , waxay ku reebaan raad xun oo keena khataro sun iyo cuduro uu kansarku ka mid yahay dhalin kara.

**Bar-tilmaameed**

Sun waxaa looga jeedaa waabay ama waxyeelo wayn oo haleesha dhirta, xayawaanka oo uu dadkuna ku jiro.

Markii boorsadaha caaga ahi lagu tuuro dhulka waxay carqaladeeyaan hawada ku wareegsan carrada, waxayna ku qaadanaysaa in ay boqol sannadood ku xumaadaan kiimikooyinka ay ka midka yihiin rinji baabiiyaha, xabagta, dhalaaliyaha ama baalashka qalabka xafiisyada iyo guryahaba I.W.M waa kimikooyin aad waxyeel ou leh oo aynu isticmalno.

Markii kiimikooyikan aynu ku qubno goobaha qashin qubka waxay ku da'aan carrada

Markii kiimikooyinka waxyeelada lihi ay la falgalaan hawada waxay soo saaraan khatar sun leh uurooyin ama qaac ku keena cuncun indhahaha ama samababada.

## 3.2 SABABAHA IYO SAAMEYNTA KULULAANSHAHA DUNIDA

***Markii uu casharkani dhamaado kadib, ardaydu waxay awoodi doonaan inay:***

- Garwaaqsadaan sababta dhalisa kululaansh aha,
- Qiimeeyaan saamaynada kululaanshaha ee dadka, baadka dabiiciga ah iyo nolosha duurjoogta.

***Waa maxay kululaanshaha dunidu? waa maxay sababaha ugu waawayn ee dhaliya caalamiyaynta? Sidee baynu ula dagaalami karnaa kululaanshaha dunidu? Ma soo jeedin kartaa qaar ka mid ah naatiijooyinka (cawaaqibka) kululaanshaha dunida?***


kululaanshaha dunidu waa ifafaalaha dhawaanahan dambeba ay sababeen ficilada aadamiga sida:

Warshadaha wax soo saara, adeegsiga tamarta shidaalka, ama gaaska la shito ee noolaha ka soo jeeda. IWM. Wasakhawga hawadu waa sababta kale ee kululaanshaha dunida kaas oo loo yaqaano " saamaynta guriga cagaaran." Gaasaska qaaarkood sida kaarboon dhaayogsaydh, Misayn iyo Koloorofolooro kaarbon (CFC) oo u adeega difaacida waxyaabaha ku wareegsan (ku hagoogan)

Gaasaskan (neefahan) difaacaya waxay is hortaagaan tamarta kulka ee ka tagaysaiyaga oo u baxsanaya siina maraya Atmosfeerka . halkaaas oo saamaynta kulku sii kordhayso. Saamaynta kulku waxay dhalaalisay barafkii cidhifyada dhulka iyo kulka faraha badan ee oogooyinka biyaha ee laga dulhelo oogada sare ee dhulka.

Koloorofolooro kaarboon (CFC) waxaa sii daaya talaajadaha ama wasakh ku quba dhaawacyana u geysata lakabka osoonka. Lakabka osoonku waa xijaab ama daaha gaaska osoonka $O_3$ ah gaaskani ugu horaynba waxa uu ka difaacaa shucaaca ama falaaraha halista ah ee ka dhex dusaya. Cadadka xaddhaafka ah ee falaarahan halista ah oo laga yaabo inay sababaan kansarka ku dhaca maqaarka aadamiga oo kala dhantaala koritaanka dhirta (tusaale :- wax soo saarkii canabka ee dalka Jilli si caadi ah ayay hoos ugu dhaceen iyadoo ay ugu wacan tahay saamaynta falaaraha halista ah.

Nusqaanta ama dhimitaanka lakabka Osoonku waa mid si cad loogu arkay gobolada Aartiga iyo anta-aartiga. Dhibaatooyinka wasakhowga hawada waxaa Roob aysiidheedka . Roob aysiidheedku wuxuu ka samaysmay markii gaasaska sida salfar, Naytroojiin ogsaydhaada iyo kaarboon dhaay ogsaydhka ay sii daayaan warshadaha kala duwan, gaadiidka , soo saarista dhuxul dhagaxda iyo warshadaha quwadaha kulka laxidhiidha ee aduunyada oo dhan.



Jaantuska 3.9: Lakabka Osoonka oo xoqmay

Waa wax iska cad oo la fahmi karo roobka ka hooseeya xaaladihii caadiga ahaa in uu yahay mid aysiidhaysan. Laakiin roobka aysiidha waxaa looga jeeda markii roobku ka kooban yahay aysiidh aad uga badan oo sababi karta dhaawac aad u wayn oo gaadha aadamiga iyo dhirta. Roobka aysiidhu waa dhexdhexaadnimada carrada Aalkalaynka ahi markii ay ku dul dhacdo dhagaxnuuradeedka.

Waxay noqotaa khatar wayn markii ay roobka aysiidha lihi ku dul da'aan carro aysiidh leh dhibaataduna waxay noqotaa labo laabiyo in ay dhaliso dhaawac wayn oo haleesha aadmiga iyo dhirta.

Tani waxaa loo tixgeliyaa roobka oo laga yaabo in ay u biyo shubaan oogooyinka biyaha macaan, haraha aysiidhoobay iyo biyo mareenada. Waxay sidoo kale saameeyaan dalagyada iyo dhirta kale iyo kaymahaba.



## Hawl-galka 3.7

1 Weligaa ma dareentay sida isbedelka cimiladu u saameeyo aadmiga?

2 Sharax sida waxqabadka aadamigu u keeno aduunyo kululaanshaha?

3 Koox u falanqeeya sida uu lakabka Osoonku u dhinmayo (naaqusmayo)?

4 Waa caynadee xiriirka uu kululaanaha dunidu la leeyahay wasakhaynta hawada?

5 *Isbedel:* adiga oo adeegsanaya gaadiidka dadwaynaha kula talibaabuurta gaarka loo leeyahay in ay yareeyaan wasakhaynta hawada .miyay kugu raaceen? Waayo? u sharax si xog waran leh faaladaada.

Mar horeba waxaynu aragnay in dhulka heerkulkiisu sii kordhayo wakhti ilaa wakhti. Tani waxaa laga yaabaa oo loo aanaynayaa in ay ugu wacan tahay faragelinta aadmiga ee deegaanka dabiiciga ah

### *Miyaad dareensan tahay in deegaanka aad ku nooshahay uu ka qalalan yahay hada ka hor?*

Saynisyahanada iyo cimiloyaqaanadu waxay sharxaan baqdintooda in ay cawaaqibka isbeedelka cimilo ay isbedelo waawayn ku keeni doonto aadamaha waddankan. dhibaatadu waxay noqon doontaa yaraanshiyo badan in la qaato talaabooyinka sidii xaalada loo yarayn lahaa mooyee.

## Sheeko gaaban

### Dhalaalka Barafka

Natiijada kale ee kululaanshaha dunida oo ah dhalaalka barafkii cidhifyada iyo heerka badda ee sii kordhaya. Toban ilaa labaatan kun oo sanno ka hor. 32% ka mid ah oogada badwaynta waxaa qarin jiray baraf gaar ahaan xilliga jiiaalkii.

Maanta Atmosfeerka aadamiga waxaa laga yaabaa in ay u horseedaan isbadalo cimilada. ah oo joogto noqda iyaga oo u sii maraya kululaansh aha midka ugu wayn ee cawaaqibka ama natiijada tani loo tixgeliyaa waa dhalaalka barafka aduunkan balaadhan, oo ay weheliso sare u kaca shabakadii heerka badda, goboladii xeebaha ku yaalay oo uu hoos dhacay daadadkii . sidoo kale waxaa la aaminsan yahay in ay ka kululaansho badanyihiin meelaha qalalannin ay ka sii fidi (balaadhani) doonaan

Lamadegaanoobida waxaa sababa aadamiga waxqabadyadiisa oo noqday masiibooyinka aduunyo. Tirada dadka ee sii kordhaysa sida dhaqsaha badan waxaa lagala kulmi doonaan dhibaato aad u daran oo cunno yaraansho iyo baahiyihii kale ee aasaasiga ahaa . xaaladaha ka sii daraya ee abaaraha heer dagaan ama heer goboleed kululaanshaha ayaa laga dunida yaabaa inuu yahay isku dhiska dhibaatada dunida.

## Sheeko gaaban

### Baaba'a Kaymaha Rooban ee Amaasoonka


Tilmaamaha ilaa xad loo dhaba gallay waa kuwo soo jiidasho leh soona jeediyeen saynisyahanada, ururada caalamiga ah iyo dawladaha kulamo dhawr ah oo ay qabteen waddamo kala duwan ayaa loogaga wada hadlay arimaha deegaan ah aaneed, kulamadaan waxaa ka mid ah kii ka dhacay Kyoto ( jabaanka) hab-maamuuseed wuxuu ahaa kii ugu ahmiyada badnaa dalkeenan Itoobiyana wuxuu ka mid yahay waddamadii saxeexay. Ujeeddada gundhiga u ahayd kalfadhigan waxaay ahayd xadaynta gaasaka guriga cagaaran ee lagu sii daynayo atmosfeerka si looga hortago dhacada isbedelka cimilada. Kalfadhuga waxaa lagu guulaystay in qaraar laga soo saaro. Sidii loo baxnaanin lahaa loona ilaalin lahaa kaymaha qaybaha kala duwan ee dunida.

## Sheeko gaaban

### Isbedalka cimilada ee aan la saadaalin karin, duufaanada, dabaylaha iyo fatahaadaha ka dhashay El.Nino

Sida dabiiciga ah badwaynadu waxay leeyihiin awood ay ku keydiyaan cadadka kulka kaas oo awood u siiya in ay saamayn wayn ku keenaan cimilada dunida. Markii heerkulka badwayntu isbedelo. Waxay ahmiyad wayn ku yeeshaan saamaynta jawiga ama cimilo maalmeedka qaybaha berriga kaas oo lagahelo halka ay iska haystaan (iskagalaan) baaddaha waawayn waxaa jira xiriir ka dhexeeya Atmosfeerka ku xeeran iyo badwaynta. Xidhiidhkan waa mid lagu muuijiyo dhacdooyinka El Nino iyo la Nina kaas oo badanaa ugu dhaca si xilliyeed ah Badwaynta Baasifiga.


Xidhiidhka ama is dhexgalka ka dhexeeya Badwaynta iyo Gibilka hawada waxaa lagu sharxaa sidan : cadaadis aad sare ugu kaca dhinaca abari ee B/waynta basifiga si aad ahna hoos ugu dhaco dhinaca galbeed ee B/waynta baasifiga (dhanka Indoniishiya iyo Filibiin) . hawadu waxay aad ugu socotaa xaga hoose ee bariga Baasifiga bixisaana xaalado qalalan., bannaan ah oo samaysa lamadegaanka Atakaama ee dalka Beeru (Peru) halka hawada qoyan ee kala koraysa ee badan ee galbeedka Baasifiga bixiso roobab culus oo ka da'a . dhaqdhaqaaqani hawo wuxuu sameeyaa wareega hawada markii hawadu ay xaga sare u kacdo Galbeed ilaa dhamaad ka dhanka kalena marka ay hawadu oogada u socoto Bari ilaa Galbeed oo loo yaqaano dabaylo ganacsiyeed.




Jaantuska 3.10: a El Nino dhacdada (1)

Natiijada ka dhalata el nino ee xaaladaha maalmeedka

- *Sannadihii 1982 kii – 1983 kii dhacdadani waxay ahayd tii ugu waynayd ee abad la diiwaangeliyo.*
- *Sanadihii 1986 kii iyo 1992 kii waxaa ay muujinaysaa in ay ahayd saamayntii ugu waynayd ee laga bilaabo darfaha Badwaynta Baasifiga iyo meelo ka fog.*
- *Abaaro aad u daran oo laga diiwaan geliyay shaal iyo koonfurta Afrika. iyo dalka Hindiya*
- *Waxaa ka jiray jiilaalo aad iyo aad u qabow badhtamaha Waqooyiga Ameerika.*
- *Xaalado dabaylo leh (duufaano leh) oo leh fatahaado leh sida kalifoorniya.*
- *Qoyaan, cimilo dh/dhexaada, iyo jiilaalo dabaylo leh oo ka dhacay Ingiriiska iyo Waqooyiga ilaa Galbeedka Yurub.*




Jaantuska 3.11: b EL Nino dhacdada (2)

# GUNAANADKA CUTUBKA

- Dhirta iyo xayawaanku waxay ku xidhan (tiirsan) yihiin agagaarkooda (nawaaxigooda).
- Dhirta iyo xayawaanku sida dadka ayay u nool yihiin bulsho.
- Bulshada dhirtu waa isha koowaad (asaasiga ah) ee cunnada.
- Nooleyaasha kale (xayawaanka) waxay ku tiirsan yihiin dhirta.
- Qaab noloeedku sida qaalibkaah waa mida ku xidhan shanta (5) biio ee muhiim ka ah ee aynu haysano.
- Geeduhu waa naflay ka mida ah bey'ada ku xeeran deegaanka.

- Kayntu waa mida ugu ahmiyada badan khayraadyada ay dadku isticmaalaan.
- Kayntu waa geyiga ka samaysan geedaha waxyaalaha nool ee kale iyo waxyaalaha aan noolayn ee kale oo wada jira.
- Aadamigu wuxu xakamayn (maamulli ) karaa dhirta iyo xayawaanka isaga oo ka faaiidaysigiisa u samaynaya.
- sidoo kala xidhiidhkiisa Is dhex galeed ee uu la leeyahay aadmigu deegaankiisa isaga oo kharibaya isu dheelitirnaantii geiyiga.
- Dhir –xaalufintu waa midka mid ah dhaawacyada ugu halista badan ee uu aadmigu u gaysanayo ama ku samaynayo deegaankiisa : saamiga dhir- xaalufka waa mid uu xoojiyo koritaanka degdega ah ee dadka . wadamada soo koraya ayaa noqday kuwa ugu khatarta badan halkaas oo hab- nololeedka dadka intiisa badan uu ku tiirsan yahay beera dhaqameed. (taasoo xaqiiqdii dabaqada kaymaha loo baabiinayo helitaanka dhul beero laga dhigto)
- Khayraadyada kale ee dabiiciga ah kaas oo ay si aad u saraysa u saameeyaan aadmiga faragelintiisa dhinacyada biyaha, carrda iyo hawada:
- Wasakhaynta biyaha, hawada iyo carradu waa kuwo ay sababeen qashinka la qubayo ee halista ah, gaasaska ( neefaha ) ay sii daayaan warshaduhu, baabuurta, gubashada mishiinada, koloorofoloora kaarboon (CFC) I.W.M gaasaskani waxay la falgalaan biyaha atmosfeerka dhexdiisa oo natiijada ka dhalataa ay noqoto aysiidh roobeed. Aysiidha roobka ay la socotaa wuxuu saamaynayaa dhirta iya xayawaanka labadaba.
- Wasakhaynta carradu sidoo kale waa mid ay sababaan kiimikooyinka iyo bacaha caaga ahi . kiimikaaliskani waxay ku da'aan carrada soona saara qaac sun leh oo halis ah oo sababa cuduro.
- Wasakhaynta si guud ahaaneed looma xakamayn karo.
- Aadamigu way baxnaanin karayaan wasakhaynta yareyna karaan khayraadyada dabiiciga ah iyaga oo ku dabaqaya hababka kala duwan ee ilaalinta ama daryeelka .
- Talaabooyinka ugu ahmiyada wayn si loo hakiyo (hubiyo) wasakh owga waa iyada oo la abuuro wacyigelin lagu sameeyo mid kasta oo ka mid ah ururada bulshada. Talaabadan waxaa lagu fulin karaa qoraal aan rasmiga ahayn ee siyaasada ilaalinta ama difaaca deegaanka iyo baxnaanintiisaba, ujeeddooyinka siyaasadeed waxay

mudnaanta siin doonaan habka ay dadku uga qayb qaadanayaan go' aan qaadashada la'aanta kana qayb qaadanayaan hay'adaha maamulku.

- Mudnaanta ugu horaysa oo la siinanayo haweenka isla markaana awood buuxda loo siinayo awoodooda sababta oo ah waxay noqdeen kuwa ugu saamaynta badan uguna baylahda badan bulshada ay ka midka yihiin.

# LAYLISKA GUUD EE CUTUBKA

## I *Kaga jawaab su'aalahan soo socda jawaabo kooban:*

1 Magacaw shaqooyinka dhirta Geyiga?

2 Sidee buu kolorofloori kaarboon u dhimaa (xoqaa) lakabka Ozonka?

3 Magacaw arimaha dhaliya kululaanshaha dunida?

4 Isla falanqeeya samaysanka roob-aysiidheedka iyo saamayntiisa uu ku leeyahay dadka iyo noolayaasha kaleba?

5 Dalka Baakistaan (Pakistan) waxaa saameeyay daadad ka badan intii lagu tala galay/ maxaad ku soo jeedin kartaa sababaha ku saabsan daadka wax ba abiin karaya?

6 Sharax khayraadyada dib loo cusboonaysiin karo iyo kuwa aan la cusboonaysiin karin?

7 Biiadu waa ta goaamisa nolosha dhirta. Sharax sababta?

8 Dhamaan nooluhu waxay isku leeyihiin door ama kaalin geyiga dhexdiisa miyaad ku raacsan tahay? sharax.

## II *Tii run ah "Run " ku qor tii been ahna "Been "ku qor*

1 Xayawaanka sida tooska ah u quuta dhirta waxaa loo yaqaanaa quutayaasha labaad.

2 Rahu wuxuu cunaa kabajaaga, kabajaaguna wuxuu cunaa cawska. Sidaa darteed rahu waa quutaha labaad.

3 Bii'ada kayntu waxay ka kooban tahay oo keliya soo saarayaasha iyo quutayaasha koowaad.

4 Qudhminta baakteeriyadu waxay qudhmyaan markii dhirta iyo xayawaanka labaduba ay dhintaan.

5 Faragelino badan laguma hayo deegaanka.

## III Buuxi meelaha bannaan

1 __________ waa waxqabad dhaqaale oo saamayn ku leh khayraadka keymaha waddamada soo koraya.

2 __________ iyo __________ waa kuwa ugu caansan ee kheyraadyada dhulka.

3 Biyaha ka kooban __________ urta xun.

4 __________ waa nooc si caadi ah loogu adeegsado talaajadaha.

5 Dhirtu waxay qaadataa $CO_2$ waxayna bixisaa __________.

## IV Isku aadi Joog-u-taxa B iyo Joog-u-taxa T

| | "B" | | "T" |
|---|---|---|---|
| 1 | kululaanshaha dunida | B | Dib u dhalinta wakhtiyo badan oo jiiyoolaji ahaan |
| 2 | Shidaalka | T | Koritaanka meelaha bilaa dhirta ah |
| 3 | Biyo aan dawo lahayn | J | Iskii dib isu cusboonaysiin |
| 4 | Carrada | X | Saamaynta Guriga cagaaran |
| 5 | Daryeelista | KH | Dhagax macdanta birta |
| | | D | Dhaliya cudur |
| | | R | Macdanta Birta |

# CUTUBKA 4
# ARIMAHA DADWAYNAHA



## Ujeedooyinka Cutubka

***Markii uu cutubkani dhamaado kadib ardaydu waxay awoodi doonaan:***

- In ay fahmaan kaalinta ay dhalinyaradu ka qaataan la dagaalanka HIV/AIDS gacana ka geystaan siyaasada dadwayne iyo sinnaanta jinsiga
- Inay tusaalayaal ka bixuyaan iyo hababka xalinta khilaafyada ka dhex-dhaca dhalinyarada
- Inay sharaxaan ujeedooyinka ugu muhiimsan iyo u hogaansanaanta qawaaniinta (xeerarka) Qaramada Midoobay iyo fikrada caalamiyaynta

## Tusmooyinka ugu Muhimsan

**4.1** ARIMAHA LA XIDHIIDHA DADWEYNAHA
**4.2** XUQUUQDA AADMIGA IYO BADBAADADA
**4.3** BARNAAMIJYADA ISKAASHI
**4.4** CAALAMIYAYNTA

- *Gunaanadka Cutubka*
- *Layliska Guud ee cutubka*

# HORDHACA

Tan iyo markii ay aadamigu bilaabeen inay degaamo samaystaan, beero-falashada iyo xoolo dhaqashadana ku dhaqmaan. Tirada dadku si xawli leh ayay u koray say. Koritaankan tirada dadka ayay ka dhalatay tirada arimaha busho oo noqotay arimaha dadwaynaha

Waayahan dambe wasakhowga, saboolnimada , gaajada., koritaanka degdega ah ee dadka, raadreebka shaaca noqday ee HIV/ AIDS ku xadgudubyad xuquuqaha aadamiga iyo sinnaanta jinsigu waxay noqdeen qaar ka mida kuwa ugu sareeya arimaha dadwaynaha ee dunida maanta.

Arimahaasi u waxay noqdeen kuwo loo tixgeliyo arimo badan oo dhaliya, gaarahaan waxa ay ka kooban tahay caalami yeyntu halkaa soo uuna ddalna gooni isu taagayn maxaa yeelay tignoolojiyada sida joogtada ah u socota, dhaqanka, xogta, kaalmada lacagta adag I.W.M ee qaarad ilaa qaarad kale.

## 4.1 ARIMAHA LA XIDHIIDHA ADWAYNAHA

### 4.1.1 kaalinta dhalinyarada kaga aadan la dagaalanka HIV/AIDS

Ma xasuusan tahay casharkii aad kusoo qaadateen Fasalkii Todobaad ee la xidhiidhayCudurka halista ah ee saamaynta wayn leh ee HIV/AIDS kaas oo dalalka ka hooseeya saxaaraha Afrika ay yihiin meelaha ugu daran dunida ee uu aadka waxyeelada u gaarsiiyay HIV/AIDSku? markii laga yimaado taas, waxaad sidoo kale soo baratay inta ay le'eg tahay dhalinta uu cudurkan HIV/AIDS ku asiibay iyo dhaqaalaha dalkaba.

AIDS wuxuu baabiiyay qarnigii 20aad ee dhamaaday noloshii dad badan oo harumar lahaa

***Fikrad ma ka haysataa fayraska HIV/AIDS ka? HIV-gu waa fayraska (ilima-aragtayga) weerara qaybta difaaca jidhka aadamaha ee dhiiga cad.***

Fayraska HIV-gu wuxuu dhimaa Unugyada difaaca jidhka aadamaha. Wuxuu fayrasku la dagaalamaa oo uu awoodiisa dhimaa dhiica cad ee cudurada ka difasca jidhkeena.

Way iska caddahay in uu HIV/AIDS-ku yahay dilaa aad u daran oo sababa dhimashada dad aad u badan oo ku nool, dalka Itoobiya.

Dalka Itoobiya waxaa markii ugu horaysay lagu arkay sannadkii 1984 G.C. Da'da dhalinyaradu waxay noqotay ta ugu waxyeelada wayn ee uu cudurku haleelay maxaa yeelay da'dooda oo ah ta ugu kulul ee xaga galmoodka markii loo eego da'da kooxaha kale.

Khasaaraha dhimashada waa mid u dhacda heer qaran iyo heer caalami hay'adaha la dagaalama cudurkani dilaaga ah hawlaha ay qabtaan ilaa iyo haatan waa daryeelista dadka uu asiibay cudurka dilaaga ahi hal shay oo wanaagsan oo ku saabsan cudurkani halista ah ee HIV/AIDS, waa si aanu ugu fidin ama ugu faafin bulshada islamarkaana lagu wacyi geliyo inay dadka qaba cudurku ula xidhiidhi karaan bulshada caadiga ah sida

- *Islafalanqaynta*
- *Sheekaysiga*
- *Taabashada, shaqsiga uu hayo cudurkani*
- *Gacan-qaadka I.W.M*

Waana sababta ahmiyada loo siiyay kaalinta ay dhalinyaradu ka qaataan la dagaalanka cudurka HIV/AIDSka.

- *Da'dani waa kooxda dadka ugu waxtarka badan ee isku duwida iyo guulo ka soo hooynta hawlaha kala duwan.*
- *Waa da'da uu ugu saamaynta badan yahay HIV/AIDS-ku*


## Bartilmaameed

Halku-dhegiyadii shirweynihii caalamiga ahaa ee ay waddamada dunidu kaga wada hadlayeen AIDS ka iyo cudurada laysku qaadsiiyo galmoodka sidii looga horteegi lahaa ee sannadkii 2003dii waxaa ka mid ahaa "waxba manihin inaga la'aanteenu" "waxaynu doonaynaa inaynu qayb ka ahaano xalka ee aynaan noqon dhibaatada."



## Hawl-galka 4.1

1 Adiga oo tixraacaya shaacnimada HIV /AIDS ka qaarada Afrika, isku day oo ka soo saar warbixin la xidhiidha wadarta boqolkiiba inta ay waxyeelada HIV la dhiban ee Itoobiya iyo Degaankiina?
2 Maxay noqonaysaa darajada ama kaalinta ay Itoobiya kaga jirto marka la barbar dhigo dalalka kale ee Afrika?
3 Door noocee ah ayay dhalinyaradu ka qaadan karaan la dagaalanka HIV/AIDS ka?




*Jaantuska 4.1* ***Dhalinyaro (Wiil iyo Gabadh)***

Kaalinta dhalinyarada kaga aadan dhinaca la dagaalanka HIV/AIDS ka waa mid guulo lagaga gaadhi karo, habab kala duwan.

Waxaa loo habayn karaa:


- *Naadiyo ku saabsan la dagaalanka HIV/AIDS ka.*
- *Xarumo wacyi-gelin iyo la-talineed.*
- *Muuqaalo fiidiyow ah oo bulshada loogu soo bandhigi karo.*
- *Shaqooyinka fanka ama farshaxanka iyo dabaaldegyo ama cayaaro oo lagu abuuri karo fursado lagu gudbiyo fariimaha la xiriia masiibada.*

***Waamaxay kaalinta ay dhalinyaradu ka cayaari karaan la dagaalanka HIV/ AIDS?***

Waxaynu soo baranay hababka ama talaabooyinka ay dhalin yaradu ka qaadan karto doorkooda. Waxaynu ku baran doonaa oo hoos ku xusan kaalinta ama doorarka ay dhalinyaradu ka qaadan karaan

## *Horumarinta xirfadaha nolosha*

***Dhawrsanaan:*** xaqiiqdii waa xirfad nololeed la kobcin karo taas oo ay dhalinyaradu ku dhaqmi karaan iyaga oo taxadar iyo feeji gnaan badan muujinaya, hal-ku-dhegooduna noqonayo “Ha” galmoon guurka horti”.



**Jaantuska 4.1: Galmoodka xaaraanta ah**

## Sheeko gaaban

Xaawo waxay ahayd ardayad ku nool magaalada Jigjiga. Waxay xaawo la noolayd hooyadeed, aabaheed iyo walaalaheed oo wiilal iyo gabdhaba leh. Waxay xaawo qoyskoodu had iyo jeer islafalanqayn jireen halista iyo Sumcad Xumada uu Cudurka HIV/AIDS-ku sababo. Waxayna markasta ku gunaanadi jireen doodooda hal ku dhega “ha galmoon guurka hortii” oo xaawo u ahayd wacyi galin wanaagsan. Waxaa jirtay xataa in uu wiil ay isku fasal ahaayeen oo la yidhaahdo xaamud ka codsaday in ay galmo wadaagaan balse xaawo ka ma aynan yeelin oo nafteeda way ka ilaalisay xumaan u horseedi karta cudurka dilaaga ah ee HIV/AIDS. Xaawo waxay ahayd gabadh fiican oo dadaalkeeda iyo kartideeda dadku isu wada sheegay. Xaawo dhawrsanaanteedii waxay dhaxal siisay in ay guulo badan ka gaadho nolasheeda oo maanta waxay kaaliye maareeye ka tahay shirkad wayn waana hooyo guursatay Fiisigis yaqaan ilaahay cilmi iyo garashaba u dhameeyay.

- *Ka dheeraanshaha (iska caabiyida) ciyaala-suuqa iyo dibjirnimada. Dibjiirnimadu waa mid ka mid ah dhaqamada xun-xun ee duufsan kara dhalinyarada, una horseedi kara inay ku dhaqmaan falalka galmoodka. Waa mid iska caadi ah in wiilasha iyo hablaha uu dhex-maro xidhiidh saaxiibtinimo oo aanay ogayn waalidiinta dhashay iyaga o ka faaiid aysanaya daba gal la'aanta ay ka dareemeen waalidkood oo aan daan iyo muraadba ka lahayn, hadii ay Dugsiyada tagaan iyo hadii ayna teginba. Arimahaas iyo kuwo kaleba waxay ku dhiiri gelinayaan dhalinyaro xun-xun oo dibjiriin ah oo mar horeba faraha ka baxay oo aad ku arki karto magaalooyinka waawayn dhalinyaradaas oo ka kooban wiilal iyo hablaba oo dhamaantood isla seexda meelaha wasakhda leh, gidaarada hoostooda iyo dhinacyada wadooyinka.*

Magaalooyinka waawayn qaarkood dhalinyarada dibjiriinta ahi waxay samaystaan xeerar badanaa ku dhisan sida loo kala xoog badan yahay. Meelaha qaarkoodna dad waawayn oo rag iyo dumarba leh oo dibjiriinta ku shaqaysta ayaa jira. Shaqooyinka ay qabtaana waxaa ka mid ah: Tuugnimo, ka ganacsiga jidhka iibinta mukhaadaraadka sida: maandooriyaha xashiishada oo kale.

Hadaba, waalidiinta waxaa la gudboon inay ubadka ku barbaariyaan anshax wanaagsan oo ay badiyaan fursadaha ay kula kulmayaan ubadkooda si aanay faraha uga bixin. Dhalinyaraduna waa inay iska caabiyaan kuwa ula imanaya dhaqamada xun-xun ee doonaya inay duufsadaan

- *Ka fikir mustaqbalka Waxaa jirta maahmaah odhanaysa"mustaqbalku waa dhalaalka (Caddaanka) dhalinyaronimo"xaqiiqdii waxay leedahay fasiraadyo farabadan. Laakiin, isticmaalka qodobkan waa mid dahsoon oo ah inay dhalinyaradu lahaadaan in badan oo safar (socdaalo) ah, waxqabad badan iyo waxtar badan . Dibjir nimada aan loo baahnayn aakhirkiina la soo afjaro masiibada inkastoo danaynta ama doonista galmoodku uu yahay rabitaan dabiici ah, odhaahdoodu (muuqaalkoodu) waxaa laga yaabaa inay weheliso ahmiyad siin yar.*



Jaantuska 4.2: Dadka ku shaqaysta dibjiriinta

*Xaaladaha meesha uu HIV/ AIDS ku ka yahay dab wayn oo meel qabsaday oo kale sida dabka duurka, dhalinyaradu waa inay ku fikiraan mustaqbalkooda. Fallalka galmoodka halista ahi waxay la mid tahay isku martiqaad dhimashadaada*

Mahmaah soomaaliyeed baa tiraahda:

"Hashu laanta mooyee laaca (qawga) ama waraarka ma aragto"



Jaantuska 4.3: Ka fikirka mustaqbalka



## Hawl-galka 4.2

Ardayda: Ardayeey waa in aad taxdaan ama qortaan mustaqblkiina waxa aad ku taamaysaan in aad noqotaan.


Tusaale ahaan:

- ◊ *Waxaan doonayaa in aan noqdo qareen*
- ◊ *Waxaan doonayaa inaan noqdo dhakhtar caafimaad*
- ◊ *Waxaan doonayaa in aan noqdo*

Raiisal wasaare………. I.W.M

- ◊ *Kadibna, sare u qaad su'aashan- sidee baad ku gaadhaysaa tan?*
- ◊ *Waa maxay waxa aad dalkaaga kaga qayb qaadan doontid marka aad waynaatid?*

Fiiri sawirkan. sawirkani wuxuu ku tusayaa qof uu asiibay HIV/AIDS ku



Jaantuska 4.4: Qof uu asii bay HIV/AIDS ku

## II Daryeel siinta iyo taageerida dadka la nool fayraska HIV/AIDS

Waxaa is-weydiin mudan, marka ugu horaysaba waa kuma qofka aad ka taageeri doontid dee ka tirsan qoyskiina, deriskiina iyo kuwa kale ee la nool fayraska HIV/AIDS? Dhamaantood waa dad kula mid ah waana xilka qof kasta oo inaga mid ah ka saaran in la caawiyo.

Masiibada HIV/AIDS ku waa mid qof kasta oo sameeya galmoodka halista ah. Markii uu cudurkani ku dhaco qof ee uu iska war helo wuxuu yeeshaa dabeecado ka duwan sidii lagu yaqaanayoo ay ka mid yihiin: Cabsi, argagax, rajo-dhigid, i.w.m. wuxuu ka go'aa saaxiibadii, wuxuuna cuqdad ka qaadaa marka uu arko saaxiibadii iyo qaraabadiisii oo ka fogaanaysa. Waxaa kale oo aad arkaysaa lammaaneyaal is qabay oo qoyskoodii hal kaa ku bur burayo.

Dadka la nool fayraska HIV/AIDS ku waxay u baaahan yihiin in la dareensiiyo in la ogol yahay, haleesha oo la jecel yahay. Daryeel dhamaystiran hadii la siin lahaa waxaa laga yaabaa in ay wakhti iyo kharash badan ku qaadato, laakiin waxaa jira waxyaabo qof kastaaba qaban karo dhalinyaradu waxay ka caawin karaan:

- *Qaadashada wakhtiyo la booqdo*
- *La sheekaysi ama la fadhiisi iyo gacan qabasho*
- *Nadiifinta meelaha ay seexdaan , u abuurid hawo qaadasho fiican, iyo nadiifinta deegaanka si looga difaaco jeermisyada*
- *Ku dhiri gelinta in ay booqdaaan kuwa kale kuwaasoo sidoo kale qaaday cudurka una baahan daryeel guri*

**Feejignaan**

*Markii aad daryeelaysid qof qaba AIDS waa inaad gacmahaaga badanaa saabuun ku maydhid iyo biyo, gaar ahaan marka uu caawiyo kadib shaqsigiisa nadiifiyaha ahi.*

## Hawl-galka 4.3



Isu habeeya idinka oo ah koox ardayda kamid ah naadiga ka hortaga AIDS ka ama Naadi samofal oo kale.

Bal kooxdu ha booqato labo ama in ka badan oo qoysas uu saameeyay HIV/AIDS ku. Kooxdu warbixin ha ka diyaarsato hadii ay qoysaskani noqdeen dhibanayaal maxaa saaxiibadood ah.kadibna ha u furaan dood iyo isla falanqayn fasalka habka loo bedeli karo xaalada.

Gebagebada : Jacayl, taageero iyo daryeelka qoyska iyo saaxiibada waxay u samayn karaan in badan si ay u caawiyaan dadka la nool HIV/AIDS caafimaad ku noolaan, dherer iyo ka nolol wax soo saar badnaan. Xusuusnow , daryeelista qof qaba AIDS kuma qaadsiin doono AIDS. Dhalinyaradu ha garwaaqsadaan tan hana tixgliyaan doorkooda kaga aadana ha ka qaateen

## LAYLIS

### *Tii run ah "Run" ku qor tii been ahna "Been" ku qor*

1 Wakhti xaadukan fayraska HIV/AIDs wuxuu noqday qodob ka mid ah arimaha dadwayne ee Itoobiya iyo Afrika.

2 Dalalka saxaaraha ka hooseeya ee Afrika waa ka ugu badan ee uu sida sare waxyeelada gaystay cudurku

3 HIV/AIDS ma aha qodob laga tixgeliyo waddankeena

4 HIV/AIDS waa fayraska asiiba unugyada dhiiga cad ee aadamiga ka difaaca cudurada kaas oo laga helay dadka iyo xayawaankaba

5 Halka hab ee suurogalka ah ee la dagaalanka HIV/AIDS waa samaynta oo keliyan naadiyada.

6 Barashada dhawrsanaantu waa mid ka mid ah doorarka ay dhalinyaradu ka cayaari karaan

7 Waxyaalahan kala duwan ee ay dhahinyaradu kaga kaxayn karaan dhibanaha HIV/ AIDS waa dibjirnimada.

8 Daruuri ma aha in gacmaha lagu madho saabuun kadib marka la caawinayo qofka qaba HIV.

## 4.1.2 Istiraatijiyadaha Lagu Yaraynayo Koritaanka Dadka ee Itoobiya

***ardaydu waxay awoodi doonaan inay:***

- Garwaaqsadaan koritaanka dadka ee isbedel- jiheysnaanta Itoobiya
- Aqoonsadaan istiraatijiyadaha loo dejiyay in lagu yareeyo kororka degdega ah ee dadka
- Sare u qaadida ahmiyada siyaasada dadwaynaha iyo istiraatijiyadaha yaraynta saboolnimada dalkeenan Itoobiya

### *Isbedel-marxaladeedka Koriinka xawliga ah ee dadka Itoobiya*

Tira koobku waa isha ugu muhiimsan ee barashada isbedel-marxaladeedka koritaandka dadka. Haddaba marka aynu fiirino taariikhda isbedel-marxaladeed ee koritaanka tirada dadka koritaanka tirada dadka Itoobiya intii u dhaxaysay sannadihii 1900 ilaa iyo kii ugu dambeeyay oo ah 2007dii waxaad ka garan kartaa qiyaasaha ay ina siinayaan xogta iyo warbixinada ku ad shaxda hoos ku xusan.

**Shaxda 4.1: Isbedel marxaladeedka koriinka xawliga ee Itoobiya**

| Sannadka | Tirada dadka ( milyan ahaan | Saamiga koritaanka ee sannad kiiba ( boqolikiiba ) |
|---|---|---|
| 1900 | 11.8 | 0.2 |
| 1910 | 12.1 | 0.5 |
| 1920 | 12.9 | 1.0 |
| 1940 | 16.2 | 1.5 |
| 1960 | 23.5 | 2.2 |
| 1980 | 37.7 | 2.8 |
| 2000 | 36.4 | 2.9 |
| 2007 | In kabadan 77 | 2.9 |

Waxaad ku soo barateen cawaaqibka ka dhasha koriinka xawliga ah ee dadka Afrika, Waa mid la mid ah sidoo kale dhab ahaan Itoobiyana. Koriinka xawliga ah ee aan sina loo joojin karin natiijada ka dhalanaysa koriinka iyo waxsoo saar la'aanta aan isu dheeliga tirayn

Tusaale:

- *Guryo yaraan*
- *Xaalufinta kaymaha*
- *Sicir-bararka miciishada*
- *Faqriga i.w.m*



## II Istiaraatijyadaha lidka koriinka xawliga ah ee dadka

***Weligaa adiga iyo walidka ma islafalanqayseen arimo ku saabsan qorshaynta qoyska? In kasta oo barnaamijyo la xidhiidha qorshaynta qoysku ay ka baxaan qalabka warbaahinta kala duwan sida: Raadiyaha, telefishinka jaraa idka, shaneemooyinka i.w. m. Wacyi-gelin miyey u noqonaysaa qoyska?***

Arinta ku saabsan tirada dadku waa mid dhibaatooyin lagala kulmi karo haddii aan laga feejignaan. Waddamo badan oo ka tirsan dunida ayay arintani u noqotay mid ay ahmiyada ugu wayn siiyaan xaga horana kaga jirta siyaasadaha qaranka.

Tirada dadka ee sida xawliga leh u koraysa iyo awooda xamilka deegaanka ee hoos u sii dhacaysa, waxay sii labalaabeen baahiidii ay dadku u qabeen waxyaabaha aas'aasiga u ah nolosha ee ay ka mid yihiin: cunnada, Guryaha, adeegyada caafimaadka iyo waxbarashada. Hadaba guud ahaan arimahaas iyo kuwa kale oo ka sii badan, waxay ka tarjumayaan jiritaanka baahida dadka ee koreysa. Dalka Itoobiya, wuxuu ka mid yahay dalalka ay dhibaatadani saamaysay ee samaystay qorshe siyaasadeed oo lid ku ah dhibaatada ka dhalatay koriinka xawliga ah ee tirada dadka.

Intii ka horaysay sannadkii 1993 kii dalka Itoobiya ma lahayn qorshe siyaasad dadwayne, laakiin Bishii Abriil 1993 kii xilligii Dawlada kala-guurka ee Itoobiya ayaa la ansixiyay qorshaha siyaasada dadwaynaha oo lid ku ah koritaanka xawliga leh ee tirada dadka isla markaana lagu daryeelayo dadka samafalka u baahan.

Haddaba si loo hagaajiyo nolosha dadka, ujeeddooyinka guud ee ay siyaasada dadwaynuhu xooga saarayso waxaa ka mid ah:

- *in la buuxiyo dal-daloolada ka muuqda isku dheelitir la'aanta ka dhaxaysa koritaanka xawliga leh ee dadka iyo wax-soo saarka dhaqaale ee hooseeya.*
- *In sare loo qaado arimaha qoyska ee ay ka mid yihiin: aqoonsiga haweenka, fursadaha waxbarashada haweenka, ka qayb-qaadashada maamulka si la mid ahta ragga, go'aaminta arimaha u gaarka ah qoyska iyo arimaha kale ee bulsho-dhaqaale.*

## Sheeko gaaban

### Qoyska Fiican

Kani waa qoys ka kooban haweenay wax baratay, oo ka shaqaysa shirkada diyaaradaha Itoobiya. Waxay leedahay oo keliya laba gabdhood iyo hal wiil. Aabaha reerku waa qandaraasle. Qaab-dhismeedka guud ee qoyskani waa hoos ku xusan:


- *Aabe iyo hooyo mishaar fiican qaata*
- *Saddex caruur ah oo dhamaantood dugsi isku heer ah dhigta*
- *Hal adeegto iyo hal waardiye*

Caruurtu way geshi dhar iyo muuqba, aad araga ugu fiican yihiin waxay maalintii wax cunaan afar jeer waxay haystaan dhamaan adeegyadooda dugsi. Qoyskani hooyadu waxay leedahay awood la mid ah go'aanka qoyska waxay si wada jira wax ugu wada cunaan miis wareegsan si anshax leh.

◊ Inla hagaajiyo awooda xamilka deegaanka iyada oo la qaadayo talaabooyinka daryeelka ee loogu talogalay.

*Waxaa la aaminsan yahay in dalka Itoobiya baaxada dhulkii kaymaha lahaa ay yaraadeen laga bilaabo 40% oo ah bilowgii 20 C° ilaa 30% oo ah wakhtigan xadirka ah. Qiyaastii 88,000 hektaar ayaa sannad walba dhir-xaaluf ku dhacaa. halka 6000 hektaar dib u dhirayn lagu sameeyay. Hadaba waxyeelaynta sida xawliga leh ku socota ee saamaysay dhuulkii kay maha lahaa ayaa noqotay arin halis ah oo soo food saartay carradii nafaqada lahayd ee ku haboonayd beeraha. ugu dambeyntiina, waxay arintani keentay in roobabkii yaraadaan, beeralaydiina ay ku fashilmaan dalagyadii ku xidhnaa roobka una horseedo gaajo iyo abaaro ba'an*






*Baranaamijka dibu – dhiraynta*



## Hawl-galka 4.4

- ◊ Bal arday waliba ha magacaabo baaxada qoyskiisa / keeda tusaale : tirada caruurta
- ◊ Isla falanqeeya qaabka noloshoodu tahay . u qaata laba arday oo tusaale ah si ay u falanq eeyaan
- ◊ Ugu dambaynna u ogolaada ianay soo jeedi yaan aragtiyadooda.
- ◊ Idinka oo markaa qaadanaya talaabooyinka loogu tala galay daryeelka.

♦ In la horumariyo bulshada iyo dhaqaalaha iyada oo la hagaajinayo nolosha duqayda dhalinyarada iyo caruurta.



## Hawl-galka 4.5

Sameeya laba kooxood oo taageeraya

b Guurka oo dib loo dhigo

t Waxbarashada dhediga (dumarka)

1 Ka sameeya isla falanqayn faaiidooyin kooda iyo faaiido darooiynkooda.

2 Ka xusha koox ka mid ah labada kooxood hana soo saarto warbixin ay heshiis guud ku gaadheen kooxcdu

### III *Doorka ay dhalinyaradu ka qaadan karaan siyaasada dadwaynaha iyo yaraynta saboolnimada*

Waayahan dambeba doorka ay dhalinyaradu ku leeyihiin gacan ka geysashada dhismaha iyo horumarka dalka Itoobiya waa mid la wada ogsoon yahay. Dawlada Jamhuuriyada Dimuqraadiga Federaalka Ee Itoobiya waxay ahmiyad wayn siisay shaqaalaysiinta dhalinyarada si ay uga qayb qaataan mashaariicda dalka lagu horumarinayo, maadaama ay yihiin da'da ugu firficoon dhalinyaradu ee ka qayb qaadan karaan xaga horumarka, waxaa ka markhaati kacaya kaalinta muuqata ee ay ka qaadanayaan la dagaalanka cudurka halista ah ee HIV/AIDS ka.

## Sheeko gaaban

### Istiratajiiyadaha Dadka ee Shiinaha

Shiinuhu waxay hirgeliyeen barnaamijkii ugu adkaa dunida ee qorshaynta qoyska. Sannadkii 1954kii tirada dadka ee shiinaha waxay ahayd 600 malyan waxayna arintaasi dhalisay in dawladii shiinaha cadaadis wayni kaga yimaado quudinta dadka faraha badan iyo khayraadyada kaleba. sidaa awgeed dalka shiinaha barnaamijkii ugu horeeyay ee qorshaynta qoyska gaar ahaan xakamaynta dhalashada wuxuu u qabsoomay sannadkii 1956kii, barnaamijkii labaadna sannadkii 1964kii iyo barnaamijkii saddexaad oo ay dhaqan geliyeen sannadkii 1970kii iyaga oo ku guulaystay habka kala dheeraynta caruurta hal-ku dhegooduna wuxuu ahaa qoyskiiba hal-ilmo (cunugo).

Kadib badaalo badan oo ay dawlada shiinuhu ku xaqiijinaysay hir gelinta barnaamijka qorshaynta qoyska iyada oo adeegsanaysa cudud dhaqaale iyo cadaadis bulsho ayaa u suuro geliyay inuu qoys kasta haysto hal ilmo oo keliya. Ururada ay ka midka yihiin sanduuqa maal gelinta u qaabilsan ee qaramada midoobay ayaa ku amaantay shiinaha siyaasada xakamaynta dhalashada ee shiinaha. Sannadkii 2007dii saamiga dhalashada shiinuhu hoos ayay u dhacday

oo gaadhay ilaa $\frac{12}{1000}$ (kunkii qofba toban iyo laba ayaa ahayd caruur dhalatay)

halka ay sannadkii 1966kii ka ahayd $\frac{45}{1000}$ (Kunkii qofba Afartan iyo shan ayaa ahayd caruur dhalatay)



### Hawl-galka 4.6

1. Waxa aad tagtaa xarunta caafimaad ee kuu dhow, adigo oo u kuurgelaya haddii ay jirto hooyo ku xidhan xarunta oo ku dhaqanta qorshaynta qoyska oo joogto ah, kadib warbixin yar oo kooban ka soo qor.
2. Waxaad booqataa xarunta xaafadda ee kuugu dhaw, masuuliyiinta halkaas kuu sugan, adiga oo waydiinaya tirada dadka degen xaafada.

### Gacan ka geysashada hoos u dhigida saboolnimada

Waa maxay saboolnimadu? Qofkee baa la odhan karaa waa sabool? Inkasta oo ay adag tahay in si fudud loo sharaxo sabool, haddana qaar ka mid ah aqoonyahada

ku xeel-dheer saboolnimadu sida ay ku qeexeen aan soo qaadano, waxaa ka mid ah: saboolnimadu waa caydhnimo u horseeda dadka nolol cidhiidhi ah. Saboolnimadu waa marka ay dadkuu waayaan nolosha dhabta ah ee ku dhisan arimahan hoos ku xusan:

- *Xulashada*
- *Ku raaxaysiga heer-nololeedku u saamaxayo.*
- *Sharafta*
- *Is-sharfida, is-xaqdhawrka iyo ixtiraamka dadka kale .*

Inkasta oo qeexitaanadu ay intaas ka badan yihiin, hadana waxaa jira aragtiyo kala duwan oo cadaynaya saboolnimada ka jirta dalal ka tirsan qaarada Aasiya iyo dalalka Afrika ee saxaaraha ka hooseeya waxaana ka mid ah:

- *Dhul, xoolo iyo qalabka beeraha la'aanta*
- *Kuwo aan awoodi karin inay meydkooda aasaan*
- *Kuwo aan awoodi karin inay caruurtooda u diraan u diraan dugsiyada*
- *Haysta guryo aad u liita.*
- *Caruurtooda ka dhigta shaqaale .*
- *Ogolaada shaqada aqoonsiga hoose leh.*

## Saboolnimada sida ay u arkaan shaqsiyaal kala duwan

"Saboolnimadu waa gaajo kugu hesha meel cidlo ah oo aan laga baxsan karin, saacadaha maalintuna kugu noqdaan kuwo badan oo dhaadheer, adiga oo ah qof aan waxna qorin, waxna akhriyin" waxaa tiri hooyo u dhalatay dalka guyaana

"Hantidu waa mid sida Bustaha aynu huwano oo kale ah, saboolnimaduna waa qof bustihii laga qaatay. Hay'ad aan dawli ahayn oo reer Bootuswaana ah.

"Saboolnimadu waa mid aan laga gudbayn ilaa iyo inta uu hab nololeedku horu-kac samaynayn" Qaxooti ka soo jeeda dalka Aserbajaan

***Waa maxay kaalinta ay dhalinyaradu ka qaadan karaan hoos u dhigida saboolnimada Itoobiya?***

Sidoo kale qodobadii la dagaalanka HIV/AIDS - ka iyo ka qayb qaadaashadii siyaasada dadwayne ee heer qaran, si la mid ah ayay kaalin muhiim ah ka qaadan dhalinyaradu dhinaca yaraynta saboolnimada iyaga oo karaan isugu xirnaan kara:

- *Urur is caawiya,*
- *Ururo kala duwan oo dhaqaale,*
- *Ka qayb qaadashada shaqo ee horumarineed ee magaalooyinka iyo miyiga,*
- *Gacan ka geysiga nidaamka dayn qaadashada,*
- *Samaynta bahwadaagnimada iyo abuurida isticmaalida sharciga ah ee hay adaha daynta bixiya.*

## 4.2 XUQUUQDA AADAMIGA IYO BADBAADADIISA

Xuuuqdu waa tixraacida xeerarka iyo shuruucda u dejisan oo looga faaiidaysanayo si la mid ah arimaha siyaasada, dhaqaalaha bulshada iwm. kuwaas oo uu qof kastaa ku doodi karo isaga oo ilaalinaya anshaxa iyo akhlaaqda suuban ee looga baahanyahay.

Sidaa darteed xuquuqdu waa ku doodista aqoonsiga shaqsi ahaaneed ee ay ka mudan yihiin bulshada iyo dawladaba.

**Xuquuqda Aadamiga:** Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay inuu si xor ah u noolaado, u raaxaysto, hanti u yeesho waana xuquuq aas'aasi ah oo caalami ah.

### 4.2.1 Jinsiga



**Hawl-galka 4.7**

Sida caadiga ah haweenka Itoobiya waxaa loola dhaqmi jiray sidii wax raga ka hooseeya. Laakiin haweenku aragtidan aad bay uga soo horjeesteen. Had iyo jeerna ay sare uqaadaan qodobka sinaanta

1. Waa maxay ra'yigaaga waxa aad ku doodaysid?
2. Maxaa saamayn ku leh kala duwananaanshaha raga iyo dumarka ?

| Sinji | Jinsi |
|---|---|
| ◊ Waa muuqaalada dabiiciga ah ee kala duwanaanshaha lab iyo dhedig<br>◊ Waa kala duwanaansho noole ahaaneed oo u dhexeeya labka iyo dhediga.<br>◊ Ahaanshaha lab ama dhedig oo ah mid dabiici ah oo aynaan bedeli karin. | ◊ Waa muuqaalada bulsheed waxayna sharxaan dabeecadaha iyo hab-dhaqanka ee labka iyo dhediga<br>◊ Waxaa go'aamiya bulshada<br>◊ Waa saamaynta xidhiidhka dhaqan diin iyo arimaha dhaliya isu ekaanshaha bulsho. |

Waa sababta keentay jinsigu in haweenku ay noqdaan kuwo salka laga baabiiyo loona tixgeliyo sidii wax ay bulshada ugu liitaan (diciifsan yihiin)



## Hawl-galka 4.8

U kala saara xaaladahan soo socoda idinka oo u eegaya jinsigooda ama qodobada sinjigooda

- ◊ Waxbarashadu waa mid aan u qalmin haweenka Itoobiya
- ◊ Ragu waxay leeyihiin shaarubo halka ay dumarku ka leeyihiin naaso waawayn
- ◊ Waa masuuliyad saaran in ay dumarku nuujiyaan oo ay xanaaneeyaan caruurta
- ◊ Nooca dharka waa mid loogu tala galay labka iyo dhediga
- ◊ Nooca shaqo labka ama dhediga midkood waa in uu ka shaqeeyaa
- ◊ Nooca goobta la rabay wayku sugnaanayaan waa mid laga helo bulsho kasta oo lagu siiyo

Hababka gacan ka geysan kara sinaanta jinsiga

- *In haweenka lagu dhiiri geliyo inay ka qayb qaataan barnaamijyaada horumarinta dalka.*
- *Damaanad qaadka xuquuqda haweenka ee dastuurka iyo xeerarka qaranka.*
- *La dagaalanka dhaqamada takoornimada iyadoo loogu gudbinayo war baahinta*

In haweenka la siiyo waxbarasho u furan awoodna loo siiyo inay xubno badan ku yeeshaan laamaha dawlada

## Sinaanta jinsiga

*Waxaa loo tixraacaa si isku mid ah xaga fursadaha, xaga khayraadyada, xaga xuquuqaha iyo sinnaanta masuuliyad wadaaga iyadoo aan loo kala eegayn sijiga shaqsiyaalka.*

Sida aynu la wada socono dastuurka Jamhuuriyada Dimuqraadiga Federaalka Itoobiya qodobkiisa 35aad wuxuu mudnaanta siinayaa sinnaanta:

- *Wixii ku saabsan adeegsiga xuquuqaha iyo daryeelka lagu xusay dastuurkani, waxay haweenkuna raga la leeyihiin xuquuq siman*
- *Iyada oo la tixgehnayo yasidii iyo taariikahdii dhaxalka u noqotay haweenka si loo helo sixitaan arintaas la xidhiidha. Waxay haweenku xaq uyeelanayaan inay helaan talaabooyin taageero dheerad ah oo ay kaga faaiidaysanayaan hadafka talaabooyinkaas.*
- *Haweenku waxay xaq u leeyihun inay hantaan mulkiyaan, maamulaan, kormeeraan, adeegsadaan hantidana bedeli karaan*


Wuxuu si la mid ah isla wakhtigaas uu dastuurku awoodu siinayaa in haweenka la siiyo mudnaanta uu damaanad qaaday dastuurku . Jinsigu wuxuu ku salaysan yahay qayb-qaybinta shaqaale oo ayku guulaysatay Itoobiya wuxuu ahaa midaamkii ku salaysnaan jiray maamulka raga.

## Sheeko gaaban

In badani ma aaminsana in ay haweenku leeyihiin karti la siman raga. Daraasadani waa mid lagu cadaynayo fikradaa khaldan haween dhawr ah ayaa wakiilo ka noqday oo bedelay kana qaatay doorarka siyaasadeed oo ay ka mid ahay Sinadhu Gebru oo u adeege ka noqotay baarlamaanka

Dr. Sinadhu waxay ahayd haweenaydii ugu horaysay ee awood u yeelatay waxbarashada casriga ah waxbarashadeedi Itoobiya ka sokow dalka dibadiisana wax ku soo baratay waxay dalka Iswiserlaand ku soo qaadatay shan sanno oo

waxbarsho heer Dhigrii ah markii ay dalka ku soo laabatayna waxay noqotay oo ay kaalin muuqata ka qaadatay dhinaca siyaasada markii ay go'aansatay in ay u tartanto kuraasta Baarlamaanka sannadkii 1957 kii. Doorashadeedii ugu horaysayna waxay ku guulaysatay oo ay heshay booska Af-hayeen ku xigeenka aqalka sare ee Baarlamaanka. waxaana ilaa haatan loo aqoonsan yahay qof kii dumar ah ee ugu horeeyay ee loo doorto barlamaanka Itoobiya.



Dr. Sinadhu Gebru

## Daraasada

### Haweenay Duuliye ah oo Itoobiyaan ah





- *Maxaad ka baranaysaa sheekadan?*
- *Miyaad aaminsan tahay in ay haweenku ka yar yihiin raga xaga u qalmitaanka?*

## 4.2.2 Ka hor-taga Dhibaatada

Dhibaatada waxaa lagu xalin karaa marka ka hortag lagu sameeyo, Tusaale: wiilasha ama gabdhuhu waxay ka qayb qaataan dembiyada iyada oo ay ugu wacan tahay saamaynta arrimaha qaarkood. marka ugu horaysa waxay ku dhaqmaanyar

yar fal-dambiyeedyo yaryar oo ay caadaystaan marka dambe horumariya ee loo sii maro dhaqamada kala duwan sida Aalkoolka ama daroogada. Sidaas darted waxaa ka dhasha ka qayb qaadashada dembiyada yar yar ee ka dhaca dhalin yar ada khaas ahaan falaagonimada, kharibada ama burburinta u kaska ah iyo rabshadaha kaas oo sababa khasaare ama dhaawac u gaysta hantida dadka. Ku xadgudubka ama si xun u isticmaalka daroogadu (maandooriyuhu) waa kelmada ku taxaluqda isticmaalka la caadaystay ee aalkoolka (khamriga) iyo Buuriga (sigaarka) sidoo kale xataa nuugista qaaca batroolka



**Hawl-galka 4.9**

Ma qiyaasi (malayn) kartaa sababaha dhaliya fal dambiyeedyadan?

## Xaaladaha dhalinyarada ku kalifa inay ku kacaan falal dembi

Waxaa la aaminsan yahay xaaladaha ku kalifa inay dhalinyaradu ku kacaan falaldembi inay ka mid yihiin:

- *Ciqaabid iyo dabagal la' aanta dawlada*
- *Markii ay raacaan si ula kac ah dad shisheeye ah oo cadow ku ah dalka*
- *La 'aanta waalid xakameeeya oo ku filan*
- *Ka rajo dhigista ay sababtay fursada shaqo oo xadidan*
- *Ku fashilaada dugsiga*
- *Korodhka aalkoolka iyo maandooriyeyaasha oo ay heli karayaan*
- *Saboolnimada iyo maamul suuban la' aanta*

Ka fogaanshaha dembiyada ka dhaca dhalinyarada talaabooyinka lagu yarayn kara waxa ka mid ah:

- *Markii uu jiro qorshe ku talo gal ah oo ku aadan kuwa dambiyada samaynaya.*
- *Waxaa loo baahan yahay isku duwida talooyinka ka soo yeedhaya guriga, dugsiga, masaajidka, kaniisada, bulshada rayadka iyo kuwo kale ee wacyi gelinta. Dhalin yarada oo loo habaynayo naadiga wiilasha, madadaalo, ururo samofaleed iyo ururo dhalinyarada loo marayo*
- *Bulshadu waa inay qaybteeda ugu muhiimsan ee la taaban karo ka qaadato*

- *Bulshadu waa inay waxqabad dhab ah.*
- *Muwaadiniintu waa inay warbixin ka siiiyaan ku saabsan dembiyada waaxda Booliiska Dagaanka.*

# 4.3 BARNAAMIJYADA ISKAASHI

## Ururka Jamciyada Quruumaha ka Dhaxaysa

Ururkan waxaa la aas'aasay sannadkii 1945kii, kadib dhamaadkii dagaalwaynihii labaad ee dunida. Ururka Jamciyada quruumaha ka dhaxaysa waa urur caalami ah oo ay xubno ka yihiin dhamaan waddamada xorta ah ee dunidu.

Xubnaha ka tirsan waa kuwo u hogaansan xeerarkan soo socda:

- *Ururku waa mid ku salaysan sinaanta dawladnimo ee dhamaan xubnaha ka tirsan*
- *Si loo xaqiijiyo dhamaan xuquuqahooda oo idil waxtarkana u leh waa ka mid noqoshada xubnaha ururka jamaciyada quruumaha ka dhaxaysa, xubnuhu waxay u gudan doonaan waajibaadyadooda si ay daacadnimo ku dheehan tahay.*
- *Dhamaan xubnuhu waxay u dejin doonaan muramadooda caalami habab nabadeed.*
- *Dhamaan xubnuhu waxay ka waan toobi doonaan xidhiidhadooda caalami inay u adeegsadaan xoog ka soo horjeeda waddan kasta*
- *Dhamaan xubnuhu waxay siin doonaan Q.M . kaalmo kasta oo ka qayb qaadan kara xoojinta ama adkaynta nabada iyo amniga caalamka .*
- *Ururku wuxuu xaqiijin doonaa in waddamada aan ka tirsanayn inay ku dhaqmaan una hogaansamaan xeerarkan.*
- *Q.M ma faragelin doonto arimaha gudaha ah ee waddan kasta gaar ka u ah.*

Ujeeddooyinka ururka jamciyada ququumaha ka dhaxaysa waxaa ka mid ah:

- *Adkaynta amniga caalamka.*
- *Horumarinta xidhiidhka saaxiibtinimo ee waddamada dhaxdooda oo ku salaysan is ixtiraam xeerka xuquuqda sinaanshaha dadayawga.*
- *Ka guul gaadhida calamiga ah ee xalinta dhibaatooyn. dhaqaale bulsho, dhaqan iyo binaadaminimo*
- *In laga dhiga xarun ku haboonaanshaha dhaqdhaqaaqyada waxqabad ee waddamada si loo gaadho wax wadaagista dhamaadka*

## II Hay' adaha gaarka ah ee ururka Jamciyada quruumaha ka dhaxaysa

waa ururada loo aasaasay inay ka shaqeeyaan ujeedo cayiman laguna sameeyay heshiisyo dawladeed. Qaar ka mid ah waa kuwan:

- ***Hay'ada shaqaalaha caalamka (ILO)*** *in si balaadhan loo horumariyo xaaladaha shaqaale, sare u qaadida shaqaale wax soosaar leh, iyo horumarinta bulsho heer nololeed keeda sare loo qaado*
- ***Hay'ada cunnada iyo beeraha (FAO)*** *hadafkooda ugu wayni waa tirtirida gaajada qiyaasta dunida*
- ***Hay'ada waxbarashada, sayniska iyo dhaqanka Q.M (UNESCO):*** *Waxaa la aasaasay 1946 kii si loo dhiirigeliyo wadashaqaynta waddamada dhexdooda meelaha waxbarashada, sayniska , dhaqanka iyo isgaadhsiinta .*
- ***Ururka caafimaadka aduunko (WHO):*** *wuxuu isku dubaridaa maalgelina ku sameeyaa barnaamijyada daryeelka caafimaadka . ku dhawaad waddan kasta oo dunida ah. Wuxuu ka shaqeeyaa yaraynta cudurada aadmiga.*
- ***Hay'ada lacagta aduunka (IMF):*** *waa ururka dhaqaalaha caalamka ujeeddadiisuna ay tahay in sare loo qaadoa ganacsiga dunida .*
- ***Bangiga horumarinta iyo dhismaha caalamka (IBRD):*** *ujeeddoyinkiisa ugu wayn ee bangiga waa in gacan laga siiyo dib u dhiska iyo horumarint awaddamada katirsan una shaqaysa. xaga amaalgelinta lacagta adag ee mashaariicaha oo looga dan leeyahay wax soosaarka. In sare loo qaado maalgelinta qalaad ee gaarka looleeyahay oo ay ujeeddadooda. wax soosaar ku fulinayaan lacag ay iyagu iska leeyihiin*
- ***Ururka ganacsiga Dunida (WTO):*** *waa urur caalami ah kaas oo lagu taageeray warbixinadiisii ku saabsanaa shuruudaha xeerarka ganacsiga iyo xeer (nidaam-maamuleedkaba). Itoobiya waxay ka codsatay ururka (WTO) in loo ogolaado ka mid noqoshada dhawaan.*

# 4.4 CAALAMIYAYNTA

***Marka uu casharkani dhamaado kadib ardaydu waxay awoodi doonaan inay:***

- Garwaaqsadaan fikrada caalamiyanta,
- Aqoonsadaan fursadaha iyo isbedelada khuseeya ganacsiga, xorta iyo dhaqanka.

***Miyaad taqaanaa ereyga ama fikrada caalamiyaynta? Miyaad dareensan tahay sida uu caalamka uga dhigayo hal tuulo?***

*Qeexitaan:*

- *caalamiyayntu waa koritaanka isku keenida qaaradaha kala duwan ee dunida,*
- *caalamiyayntu waa erey qeexaya soo if-baxa bulsho caalami ah oo wadaagta xagdhaqan, dhaqaale, siyaasad iyo dhacdooyinka dunida,*
- *caalamiyayntu waa kobcinta dhaqaalaha siyaasada Tignoolojiga, dhaqanka i.w.m. waxayna isku xidhaa shaqsi ilaa heer dhamaan dalalka dunida oo dhan ah.*

*Inkastoo dadka intiisa badan ay sii wataan inay ku noolaadaan qaran keliya, iyaga oo si dhaqan ahaaneed, qalab ahaaneed iyo cilmi nafsi ahaaneedba mashquulsan yihiin la noolaanshaha dadyawayna abidkood ka hor ayna la noolaan jirin ee waddamada kale .*



**Hawl-galka 4.10**

Is bar- bardhiga iyo is – diidmada Dunida iyo Tuuladiina

- ◊ Sheeg gaadiidka isgaadhsiinta ee ugu xawaaraha dheer magaaladiina?
- ◊ Adiga oo adeegsanaya ereyada loo adeegsaday qeexida caalamiayaynta ka fikir kuwa faaiida kuu leh?

## Fursadaha caalamiyaynta ee gannacsiga, dhaqanka iyo xogta

khabiiro badani waxay caalamiyaynta ku asteeyaan horumarinta isgaadhsiinta, gaadiidka iyo tignoolojiyada xogta. Horumarada ay aadamigu ka sameeyeen waxyaabaha inagu xeeran waxay awood u siiyeen in waddamada dunidu sidii dad tuulo wada degan la isaga war-qabo kale waddamada dunidu waxay heli karaan in ay ogaadaan wax kasta oo jira xogtaas oo loo marayo Internetka. Qiimaha ugu jaban leh, dadku ay ka baari karaan bogga internetka xogta ay doonayaan – wakhtiga ugu gaaban safar la' aan iyaga oo meelna ukian.

Marka laga yimaado kuwaas oo dhan, caalamiyayntu waxay keentay fursadahan:

- *isticmaalka Taleefanada in ka badan 80%*
- *Ka saarida waxyaabaha gacan ku samayska ee aasnaa mudada dheer ee meelaha u dhaxeeya waddamada*
- *Samaynta ganacsi u koraya in ka badan toban laab*
- *Soo if bax dhaqan aduunyo*

## Caalamiyantu isbedelada ay ku keentay ganacsiga dhaqanka iyo xogaha/warbaahinta

Dhaqaaleyahano badani waxay aaminsan yihiin in la baabiiyay caqabadihii ganacsiga lana kordhiyay dhaqdhaqaaqa xorta ah lacagaha culus ee ka talaabaya xuduudaha ee noqday cidhiidhiga dakhliga fiican ee ka soo gala farqiga kala duwanaanshaha ee u dhexeeya waddamad hodanka ah iyo kuwa saboolka ah. Tani si guud ahaaneed uma dhicin. Taas bedelkeedii,

*Shiinaha iyo Hindiya waa laba dal oo ka faaiidaystay caalamiyaynyta*

- *Saamiyada saboolnimadad oo korodhay waddamada soo koraya marka laga reebo Shiinaha iyo Hindiya*
- *Faaiidooyinka ugu badan waxaa ka hela dalalka horumaray markii loo eego dalalka saboolka ah.*
- *Cudurada halista ahi waa caqabadaha caalamiyaynta.*

Tusaale:

- *2003 dii cudurka dilaaga ah ee ku dhaca sanbabada ee loo yaqaano (SARS) oo ka soo jeeda asalkiisu shiinaha oo si degdeg ah ugu baahay dunida caafimaadkana halis ku ah.*
- *Faafitaanka ama fiditaanka HIV/AIDs ee sida degdega ah ugu fidaya dunida gaar ahaan Afrika, Hindiya, Shiinaha Indooniishiya i.w.m.*
- *Dadka oo cabsi wayn ka qaba isbeedelada ku dhacaya dhaqa.*
- *Waddamada xorta ah ee aan weli horumarin waxay ka baqayaan halista waddamada horumaryay ee dhinaca go'aanka arimaha caalamiga ah*

## GUNAANADKA CUTUBKA

- 1960kii kadib dunideena waxaa soo food saaray dhibaatooyin caafimaad iyo dhaqaale taas oo ay beesha caalamku ku kala duwan yihiin darajo ahaan.
- Dhowaanahan HIV/AIDS, korodhka degdega ah ee dadka, saboolnimada, ku xad-gudubyada xuquuqaha aadmiga waxay noqdeen kuwa xagahore kaga jira arimaha dadwaunaha.
- Arimahani waa kuwa halis badan waddamada soo koraya siiba, dalalka ka hooseeya saxaaraha Afrika.
- Itoobiya waa mid ka mid ah dalalka ka hooseeya saxaaraha Afrika ee ay haysatyo dareenka xanuunka badan ee dhibaatadan aadka u daran ee HIV/AIDS.
- Siyaasada iyo istiraatijiyada ay Itoobiya hoos ugu dhigayso yaraynta saboolnimada iyo dhibaatada waa mid.
- Muuqaalada kale ee dhowaanahan itoobiya welwelka ku haya waa sida caalamiyaynta oo kale.
- caalamiyayntu waxay yeelatay aragtiyo kala duwan. waxaa jira qaybo muujinaya fursadahooda loogu talagalay wadamada dunida.
- Waxaa lidkeeda ah, ah sare u qaadida tignoolajiyadaha iyo fursadaha aalaaba caalamiyaynta oo sii kordhinaya farqiga u dhexeeya dalalka hodanka ah iyo dalka saboolka ah iyo xataa halista dawladnimo ee waddamada saboolka ah

## LAYLISKA GUUD EE CUTUBKA

**I** ***Weedhahan soo socda ku qor tii run ah "Run" haddii ay been tahayna "Been"***

1. Caalamiyantu waa mid uu dal waliba aqbalay in si siman looga faaiidaysto.
2. caalamiyayntu waa midka dhalatay farqiga u dhexeeya waddamada horumaray iyo waddamada soo koraya.
3. Falal-dambiyeedyada yaryar ee ay ku kacaan dhalinyarada dalaka Afrika ee ka hooseeya saxaaraha ka mid ma'aha arimaha dadwayne.
4. Cudurka halista ah ee HIV/AIDS-ku waa mid la isugu gudbin karo salaan.

## II Ka dooro jawaabta saxda ah

1 Qaybtee buu cudurka dilaaga ah ee HIV/AIDS ku sida xun u saameeyay

B Kaariibiyanka

T Waddamada carabta

J Dalalka Afrika ee saxaaraha ka hoo seeya

X Simbaabwi

2 Waa dalkee dalka uu sida aadka ah cudurka HIV/AIDSku faraha baas ku hayo ee kamid ah dalalka Afrika ee saxaaraha ka hooseeya

B Jamhuuriyada koonfur Afrika

T Bootiswaana

J Afrika inta saxaaraha ka hoosaysa

X Simbaabwi

3 Dhamaan kuwan soo socda waa ka mid siyaabaha la isku qaadsiiyo fayraska HIV marka laga reebo

B Galmada xaaraanta ah

T Dhiiga la isku shubo

J Wadaagida qalabka yaryar sida: irbada, makiinada i.w.m

X Salaanta gacan qaadka ah

4 Istiraatijiyadaha ay Itoobiya u dejisay xakamaynta tirada dadka ee xawliga ku socota waxaa ka mid ah

B Sare u qaadista u samafalka dadka

T Tixgelinta haweenka

J Qorshaynta qoyska

X Dhamaan

5 Kaalinta ay dhalinyaradu ka qaadan karaan la dagaalanka cudurka HIV/AIDS ka waa

B Daryeelista dhibaneyaasha

T Ka dheeraynta daryeel

J Dhawrsoonanta

X B iyo J waa sax

6 Kuwan soo socda keebaa ka caawin kara Itoobiya koritaanka xawliga leh ee tirada dadka.

- B Guurka degdega ah
- T Yaraynta Dhalmada
- J Dhiiri gelinta kala saraynta
- X Wax-barida HAweenka

## III *Buuxi meelaha bannaan*

1 Labada dal ee Aasiya ee ka faaiidaystay caalamiyayntu waa ______________ iyo ______________ .

2 Xuquuqda aadamiga waxaa ugu muhiimsan xuquuqda ______________ iyo ______________ .

3 Barnaamijkii ugu horeeyay ee uu shiinuhu fuliyo ee yaraynta dhalmada wuxuu bilaabay sannadkii ______________ .

4 Mid ka mid ah waxyaabaha waxyeelada u geysta wooda xamilka ee deegaanka waxaa ka mid ah ______________ .

5 Tirada $CD_4$ ee qofka caadiga ah waa inta u dhaxaysa ______________ .

## IV *Ka Jawaab Su'aalahan*

1 Maxay tahay sababta ay dhalinyaradu muhiimka ugu yihiin la dagaalanka cudurka HIV/AIDS ka?

2 Magacaw xuquuqaha loo aqoonsaday xuquuqda Aadamiga iyo Dimuqraadiyadaba?

3 Sheeg laba ka mid ah falal-dambiyeedyada yaryar ee ka dhaca dhalinyarada?

4 Waa maxay sababta ay waddamada soo koraya uga cabsi qabaan caalamiyaynta?

# CILMIGA BULSHADA

## BUUGGA ARDAYGA

### Fasalka 8aad

ISBN 978-99944-2-120-6

JUMHURIYADA DIMOQRAADIGA FADARAALKA EE ITOOBIYA

WASAARADDA WAXBARASHADA

Birr 68.00